AD'HAM SHARQAAWI

# DHAMBAALLADA QURAANKA

TURJUME

CABDULXAKIIM MUXAMMAD OBSIIYE

# DHAMBAALLADA QURAANKA

AD'HAM SHARQAAWI

(Qays Binu Saacida)

TURJUME:

Cabdulxakiim Muxammad Obsiiye

Si aad u hesho buug badan oo PDF ah

Telegram ku search'garee :

KAYDBOOKS

KAYD—BOOKS

# HORDHAC

Farxad iyo rayrayn ayay ii tahay in aan turjumo buugga dhambaallada Quraanka kariimka ah ee uu qoray qoraaga caanka ah ee Ad'ham Sharqaawi oo u dhashay wadanka Falastiin. Ugu horrayn, amaan oo dhan waxa iska leh Allah weyn ee ii suuraggaliyay hawshan baaxadda leh. Laga soo bilaabo 2007dii waxa aan ku dhex jiray barashada iyo baridda Quraanka kariimka ah iyo culuumtiisa. Muddadii aan ku gudajiray hawshan, waxa aan si weyn u dareemay mudnaanta uu tafsiirka Quraanka kariimku iyo fahankiisu ay u leeyahay macallinka, ardayga iyo guud ahaan bulshada jecel akhriska Quraanka. Dhambaallada Quraanku waxa uu ka mid yahay buugaagta soo dhowaynaya fahanka fasirka Quraanka kariimka ah iyo macaanidiisa mucjisada ah. Buuggani waxa uu isku xidhayaa Quraanka kariimka ah iyo noloshaada gaarka ah. Marka laga tago macaanida guud ee aayadaha Quraanka, waxa uu soo gudbinayaa sooyaalkii, murtidii, miiddii iyo aqoontii dadkii hore ee wanaagsanaa. Muddada aad ku dhex jirto akhrinta buuggan, waxa aad ku raaxaysandoontaa fahanka iyo dhuuxista macnaha aayadaha Quraanka kariimka ah.

# EREY KU SAABSAN BUUGGAN

Buugga *"Dhambaallada Quraanka"* ee uu turjumay walaalkay **Cabdulxakiim Muxammad Obsiiye** oo asalkiisa uu qoray qoraaga Ad'ham Sharqawi waa buug jaad-goonni ah oo ka duwan badi buugaagta aynu akhrino. Waa buug akhriskiisa aan laga caajisayn isla jeerkaasna aan laga xiiso goynayn.

Waa buug xambaarsan farriimo xeel dheer oo qoraagu uu ka dheegay Kitaabka Quraanka ah, waxana uu si toos ah ula hadlayaa qof kasta oo dhugta, isla jeerkaasna waxa uu tibaaxayaa casharro nololeed oo anfacaya nafta iyo bulshada labadaba.

Buuggu maaha tafsiir aayadaha Quraanka ah micnaynaya sidii aynu ku naqaannay kutubta tafsiirka, isla jeerkaasna maaha laqbadii aynu ka barannay culimada ee kalmadaha Quraanka iyo micnahooda la isa saarayay, waxa uu buuggu soo qaadanayaa aayado ama qayb ka mid ah aayad kaddibna waxa uu ka dheeganayaa oo ka soo saarayaa casharro nololeed iyo talooyin si toos ah u taabanaya qalbiga.

Kolka laga yimaaddo xulashada aayadaha waxa quruxda buugga sii kordhinaya gaagaabnaanta casharrada oo qofku aanu ku daalayn, isla jeerkaasna awood u siinaya qofka in

uu kolba qayb kooban si fiican u dhugto, casharro iyo talooyin nololeed oo isbeddel dhab ah noloshiisa ku samaynayana uu kala baxo.

Waxa kale ee buugga xiisaha gaarka ah u yeelaya ayaa ah in sida aynu buugaagta kale uga barannay aanu ahayn buug isku xidhan oo bilowgiisa iyo dhammaadkiisu is haystaan. Waa buug bog kasta oo ka mid ahi uu madax bannaan yahay, isla markaasna aad gaarkiisa u akhrisan karto, qayb kastaa waa casharro gaar ah oo aan ku xidhnayn qaybaha kale, sidaas awgeed waxa aad awood u leedahay in marba dhinaca aad doonto aad kaga timaaddo.

Qoraaga buugga oo Ilaahay ku mannaystay qoraalka iyo fududaynta fekradaha ayaa waxa uga dambeeyey afka Soomaaliga usoo haltebiyay qoraa isaguna awood buuxda u leh turjumaadda iyo in uu kuusoo dhaweeyo macnihii saxda ahaa ee qoraagu ka lahaa qoraalka buugga. Ilaahay ha barakeeyo qoraaga iyo turjumaanka labadaba, waxa ay innoo dhiteeyeen dhaxal aan duugoobayn oo ah dhambaalladii Quraanka.

**Xamse Cumar Kujoog**

## HIBAYN

Waxa aad go'aansataa in aad dambaabto. Meyd baa lagula soo ag maraa, deedna waa aad argagaxdaa. Awooddaada ayaa kugu bixisa in aad ku xadgudubto miskiin taagdaran, kadibna waa aad xanuunsataa oo isbeddeshaa. Si xad dhaafa ayaa aad ugu kalsoonaataa dadka oo waa lagugu wacad furaa, kadibna waa aad ku waantowdaa. Waa aad dambaabtaa oo dareentaa cidhiidhi, kadib waxa aad maqashaa aayad, laabtaada ayaana ballaadhata. Arrin baa aad ku wareertaa, xadiis Nebi ayaa aad maqashaa oo waa aad ku hanuuntaa. Guud ahaan, dhambaalladani waxa ay kaaga imanayaan xagga Alle (swt).

Buuggan: *Dhambaallada Quraanka,* waxa loo hibaynayaa guud ahaan kuwa rumaysan in uu Alle mar kasta innoo soo diro farriimo; si uu innoogu soo celiyo xaggiisa.

﴿أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ هَدَى ٱللَّهُۖ فَبِهُدَىٰهُمُ ٱقۡتَدِهۡۗ﴾ الأنعام: 90

*"Kuwaa, Ilaahay ayaa hanuuniyay ee adiguna ku dayo hanuunkooda"*

**Allahayow,** kuuguma tukanayo hannaan kuu qalma. Uma soomayo sidii Daa'uud oo kale. Marka aan bukoodo, uma adkaysanayo sidii Ayuub oo kale. Kuuguma tasbiixsanayo sidii Yuunus oo kale markii uu ku jiray caloosha Nibiriga. Diintayda kuma qaadanayo awooddii Yaxye oo kale. Araggayga uma laabanayo sidii uu Yuusuf u ilaashayda xubnihiisa oo dhan, umana dhaafid badni ilaa aan ka idhaahdo: *"nabadgala, xor baa aad tihiine"*, **balse sida ay kuu jecel yihiin, si la mid ah baa aan kuu jecelahay Allahayow!**

﴿وَرُسُلًا لَّمْ نَقْصُصْهُمْ عَلَيْكَ﴾ النساء: 164

*"Iyo rusul kale oo aannaan kaaga warramin."*

Dadku haddii ay dafiraan ama diidaan wanaaggaaga, ha quusan waayo; milge iyo maamuus waxa kuugu filan in uu kuu ogyahay Ilaahay (swt). Miisanka Nuux waxba ku biirin mayso in aynaan garanayn, sidoo kalena Nebiyada aan la innooga warramin, garasho la'aanteennu waxba ka bi'in mayso. Ciidankii Haaruun Al-Rashiid[1], waxa uu ahaa labaatan kun oo askari, kuwaas oo aan diwaan gashanayn, mushaharna aan ka qaadan jirin dawladda, sababtuna waxa ay ahayd; si aanay u ogaan cid aan Alle ahayni. Saa'ib binu Aqrac[2] ayaa hoggaamiyihii Mu'miniinta ee Cumar uga tacsiyadeeyay shuhadadii ku dhimatay duullaankii Nahaawund[3]. Saa'ib baa bilaabay tirinta mudantii iyo madaxyaweyntii ku qudh-baxday dagaalka, waxaanu sii raaciyay hadalkiisa: *"iyo qayb kale oo ka mid ah danyarta Muslimiinta oo aanu garanayn amiirku."* Cumar oo ilmaynaya ayaa yidhi: ***"dhibi mayso garasho la'aanta Cumar maxaa yeelay; Ilaahay baa garanaya"***

---

[1] **Haaruun Al-Rashiid (149-193H):** waxa uu ahaa khaliifkii 5aad ee dawladdii cabbaasiyiinta. Waxa uu ku caan baxay halgan iyo cibaado.

[2] **Saa'ib binu Aqrac:** waxa uu ahaa nin reer Kuufa ah oo ka qaybgalay dagaalladii Muslimiinta, imaamu Bukhaarina waxa uu yidhi: "Saa'ib, Nebiga waa uu soo gaadhay oo madaxiisa ayaa uu salaaxay"

[3] **Duullaankii Nahaawund:** dagaalkani waxa uu ka mid ahaa kuwii ay Muslimiintu la galeen dawalddii Beershiya oo dhacay sanadkii 19H.

﴿إِنَّ ٱلْحَسَنَٰتِ يُذْهِبْنَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ﴾ هود: 114

*"Wanaagyadu waxa ay tagsiinayaan xumaanaha"*

Mar kasta oo aad fasho dambi, ku dheh naftaada: *mar keliya ayaan gefay ee noloshayda oo dhan ma guuldarraysan."* Ha quusan ee weysayso oo tuko laba rakcadood, intaa kadib ku tasbiixso farihii aad ku dambaabtay, kuna akhri Quraanka isla indhihii aad ku fiirisay xaaraanta waayo; taaha kuwa towbad keenaya Alle agtiisa waxa uu la mid yahay faqa kuwa addeecaya, Eebbena naftiisa ayuu u bixiyay dambidhaaf badane sababta oo ah; waxa uu kaa doonayaa in aad u soo laabato xaggiisa!

﴿بَلِ ٱلْإِنسَٰنُ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ بَصِيرَةٌ﴾ القيامة: 13

*"Insaanku isaga ayaa u xogogaalsan naftiisa"*

Waxba ku tari mayso ammaanta kuwa wax ammaanaa marka ay kugu sheegaan wax aanad ahayn, sidoo kalena waxba kaa dhimi mayso eedda kuwa wax eedeeyaa haddii ay kugu tuhmaan wax aanad ahayn. Si kasta oo uu u wanaagsan yahay insaanku, waa hubaal in uu jiro mid necebi, xataa Nebiyadii Ilaahay ma wada jeclayn dadku. Si walba oo uu u xun yahay qofku, waxa la soo helayaa kuwo jecel, xataa Fircoon iyo Namruud dad ayaa u sacabba tumi jiray. Mudraf binu Cabdillaahi[4] ayaa yidhi: imaamu Maalik binu Anas[5] ayaa igu yidhi: "dadku maxaa aay iga lahaayeen?" Waxa aan ku idhi: *"saaxiibka dhabta ahi waa uu ku ammaanayay, cadowguna wax buu kaa sheegayay"* Imaamka ayaa yidhi: *"dadku wali waa sidaas, laakiin Ilaahay waxa aannu ka magan galnay in ay midoobaan carrabadoodu."* Imaamku, Ilaahay (swt) waxa uu ka magan galay dadku in ay wada ammaanaan oo uu kadsoomo, ama in ay wada caayaan oo laga helo wax ka mid ah xumaanaha ay ku sheegayaan.

---

[4] **Mudraf Binu Cabdillaahi:** waxa uu ahaa imaam iyo haldoor noolaa wakhtigii taabiciinta. Sheekhu waxa uu ku caan baxay soo warinta xadiiska nabiga.

[5] **Maalik Binu Anas (93-178H):** magaciisu waa Maalik binu Caamir Al-Asbaxi oo ku dhashay magaalada Madiina. Waa faqiih, muxaddis iyo imaamka mad'habka Maalikiga.

*"DHIMASHADU MAAHA DHAMMAAD, BALSE KELIYA WAA BARBILOW"*

﴿وَءَاتَىٰكُم مِّن كُلِّ مَا سَأَلۡتُمُوهُۚ﴾ إبراهيم: 34

*"Isagu (Alle) ayaa idin siiyay shay walba oo aad waydiiseen"*

**Isagu waa Alle** oo qofka u yimaadda isaga oo baqanaya ammaan buu siiyaa, ka u yimaadda isaga oo qalbi jabsan, niyadda ayuu u dhisaa, ka u yimaadda isaga oo hiil u baahan waa uu u hiiliyaa, ka u yimaadda isaga oo murugaysan waa uu farxadgeliyaa, ka u yimaadda isaga oo lunsanna waa uu hanuuniyaa. Adigu, xulo wakhtiyada ducada la aqbalo, baahidaadana u bandhigo Alle. Ka kac hurdada habeenka qaybtiisa dambe oo isaga bari, ducadana ku dedaal oo ha quusan. Eebbahaa ku kalsoonow waayo; gacmo loo taagay xaggiisa ma sooo celiyo yaga oo madhan. Intaas oo dhan ka horna, noqo xalaal miirad, xadiiskuna waxa uu leeyahay: ***"Hagaaji hungurigaaga, waxa aad noqonaysaa mid la aqbalo ducadiisa e."***

﴿عَسَىٰ رَبُّنَآ أَن يُبْدِلَنَا خَيْرًا مِّنْهَآ﴾ القلم: 32

*"Waxa dhab ah, Rabbigayo in uu noogu beddelayo wax ka wanaag badan yada."*

Aayaddan sare, kaga naso xanuun kasta oo ka dhashay fursad kaa dayacantay, shaqo walba oo aad wayday, jacayl kasta oo aad kala irdhowdeen iyo saaxiib kasta oo aad u haysatay daacad, balse gadaal kaaga xumaaday. Ilaahay, waxa uu kaa qaado xikmad ayuu ka leeyahay, waxa uu kuu daayaana waa naxariis xaggiisa ka ahaatay, ee haddii aad fahanto xikmadda mahadnaq, haddii kalena iska adkayso maxaa yeelay; guud ahaan qorshayaashiisu waa wada wanaag haba ku xanuujiyaane.

﴿وَقَاسَمَهُمَآ إِنِّي لَكُمَا لَمِنَ ٱلنَّـٰصِحِينَ﴾ الأعراف: 21

*"Ibliis, waxa uu ugu dhaartay labadooda (Aadan iyo Xaawa) waxa aan idiin ahay mid idiin khayr miiraya."*

Aadan iyo Xaawa, kum soo dhicin maankooda qof ayaa magaca Ilaahay ugu dhaaranaya been, balse Ibliis ayaa falkaa falay oo uu wax-sheegiisii noqday in uu walxaha ugu bixiyo magacyo qurxoon; si uu u lumiyo. Geedkii xumaanta, ayuu ugu sheegay kii waaritaanka, isla shaqadanna maanta waxa haysa xerta Ibliis. Khamrigu waa cabbitaan ruuxi ah, qaawanaantu waa qurux, xumaantu waa xarrago, gogoldhaafkuna waa furfurnaan iyo fayoqab. Haku dagmin magacyada qurxoon, si kasta oo ay isku dooriyaan.

﴿وَسَارِعُوٓاْ إِلَىٰ مَغۡفِرَةٖ مِّن رَّبِّكُمۡ وَجَنَّةٍ عَرۡضُهَا ٱلسَّمَٰوَٰتُ وَٱلۡأَرۡضُ أُعِدَّتۡ لِلۡمُتَّقِينَ﴾ آل عمران: 133

*"U dheereeya dambidhaaf ka ahaaday xagga Rabbigiin iyo janno ballaceedu le'eg yahay cirarka iyo dhulka, taas oo loo diyaariyay kuwa Ilaahay ka baqda."*

**Degdega waayo;** wadku cidna ma sugayo. Barri ayaa aan toobad keenayaa, barri ayaa aan samaysan barnaamij akhris, barri ayaa aan hagaajinayaa habka aan wax u cuno. Barri waa aynu gaadhaynaa, balse waxba kama fulinayno arrimihii maanka ku haynay maanka. Nolosha miyaa, waxa aynu wada rumaysannahay wadku in uu innaga dheer yahay, waana isla sidii ay aamminsanaayeen kuwii daqiiqado ka hor dhintay. **Degdega waayo;** daqiiqado aad habsaanto ayaa noloshaada oo dhan dib-dhigaya. Sheekaba sheeko ayay keentaa ee Sunaabixi[6] baa yidhi: *"Yemen ayaannu ka soo baxnay annaga oo u soconna Madiina, ammintii aannu soo cagadhigannayna waxa la nagu yidhi: "Rasuulkii Alle shan habeen ka hor ayuu xijaabtay."* Shan habeen oo ay dib-dheceen ayaa u diidday sharaftii saxaabinimada[7]. **Degdega waayo;** waxa suuraggal ah saacad aad dib-dhacdeen in ay idin baalmariso jannada.

---

[6] **Sunaabixi:** magaciisu waa Cabdiraxmaan binu Cusayla Al-Sanaabixi oo ka mid ahaa haldoorkii, hormuudkii iyo culimadii taabiciinta.
[7] **Saxaabi:** waa qofka Nebiga (NNKH) la kulmay, rumeeyay, sidaasna ku dhintay.

﴿كُلُّ نَفْسٍ ذَآئِقَةُ ٱلْمَوْتِۗ وَنَبْلُوكُم بِٱلشَّرِّ وَٱلْخَيْرِ فِتْنَةًۖ وَإِلَيْنَا تُرْجَعُونَ﴾ العنكبوت: 35

*"Naf waliba waa ay dhadhamin geeri, sidoo kalena waxaannu idinku imtixaamaynaa shar iyo khayr; si la idiin tijaabiyo, ugu dambaynna xaggayaga ayaa la idiin soo celinayaa"*

Wadku waa weel ay ka wada cabbayaan: *mu'minka iyo dambiilaha, Nebiga iyo ka qooqay, jinka iyo malaa'igta, cid aan Alle ahaynna soo hadhi mayso.* Dhimashadu maaha gunaanad ee waa bilowga nolol cusub, waano iyo wax-sheegna yada ayaa innoogu filan. Abu Nawaas[8], gabyaagii khamriga ee caanka ahaa ayay deris ahaayeen nin wanaagsan oo muddo dheer ugu baaqayay jidka Alle iyo in uu iska daayo cabbidda khamriga. Maalinkii uu dhintay deriskii wanaagsanaa, ayuu Abu Nawaas raacay janaasadii, qabrigiisii ayuu dul istaagay, waxaanu yidhi: ***"maanta ayaa aad ka waano iyo wax-sheegba badan tahay markii aad noolayd. Yacnii waanadii badnayd ee aad ii jeedin jirtay, maanta waxa igaga filan qabrigaagan aan duljoogo."***

[8] Abu Nawaas (145-198H): magaciisu waa Xasan binu Haani oo lagu tiriyo foolaadkii hal-abuurka ee wakhtigii Cabbaasiyiinta. Bilowgii hore waxa uu ahaa af-ku-xoogle nolosha ka dhacay iyo khamriyo-cab cabasho badan, laakiin waagii dambe waa uu toobad keenay.

﴿وَٱسْتَعِينُوا۟ بِٱلصَّبْرِ وَٱلصَّلَوٰةِ ۚ وَإِنَّهَا لَكَبِيرَةٌ إِلَّا عَلَى ٱلْخَٰشِعِينَ﴾ البقرة: 45

*"Kaashada samir iyo salaad; salaadduna waa ay ku culus tahay addoomaha kuwa khushuuca mooyaane."*

Tani waa adduunyo oo waa hoyga falashada ee maaha hoyga hanashada. Waa hoyga imtixaanka ee maaha ka abaalmarinta. Imtixaannada uu Alle mariyo addoomihiisa waxa ka mid ah; in uu ku sallido musiibooyin; kuwii aynu jeclayn oo aynu waynaa waa musiibo, hanti la'aantu waa musiibo, deriska xun, lammaanaha liita iyo maamulaha dulmi falaha ahina waa musiibooyin. Qofka adkaystaa waa uu ku guulaystaa tijaabada, ka cadhoodaana waa uu ku dhacaa imtixaanka. Lama soo helayo qof ka badbaadaya hadimooyinka adduunka, Nebiyada ayaana ugu imtixaan badnaa. Taariikhyahannad ayaa soo wariyay: Dulqarnayn[9] ayaa aad u bukooday mar uu tegay magaalada Baabila. Nin weyni wadkii waa uu yaqaannaaye waxa uu garwaaqsaday in ay is-hurran yihiin geeri. Hooyadii ayaa uu xusuustay, waxaanu jeclaystay in uu u dhiso niyadda. Wan weyn ayaa uu u diray, waxaanu u dardaarmay: *"hooyo marka aan dhinto, gawrac wankan, hilbihiisa kari, kadibna ugu yeedh qof aan waligii*

---

[9] **Dulqarnayn**, waa magaca shakhsi sheekadiisa lagu xusay Quraanka kariimka ah, gaar ahaanna suuradda Al-Kahfi. Waxa uu ahaa addoon wanaagsan iyo boqor caddaalad badan oo dhisay gidaarka innaga hortaagan Ya'juuj iyo Ma'juuj, Sheekadiisa oo faahfaahsanna ka raadi suuradda aynu kor ku soo xusnayn, aayadaha: 83-98.

*balaayo ku habsan, ama aan waayin qof uu jeclaa."* Ammintii uu Alle oofsaday, hooyadii dardaarankii ayay u fulisay, balse waxa fajiciso ku noqotay in aanu qofna u iman waayo; lama soo helayo guri ka badbaaday balaayo. Hooyadii waa ay fahantay dhambaalkii wiilkeeda, yada oo u ducaynaysana waxa ay tidhi: ***"Alle hakuu naxariisto e, waa aad ii samafashay if iyo aakhiraba."***

﴿يَٰزَكَرِيَّآ إِنَّا نُبَشِّرُكَ﴾ سورة: 7

*"Sakaroyow, annaga ayaa kuu bishaaraynayna"*

Lafaha ayaa dabcay, madaxa ayaa cirroobay, xaaskiisu waa madhalays, isla markaana waxa uu ogyahay sababuhu in ay saameeyaan addoomaaha, laakiin aanay raad ku lahayn Ilaahay (swt). Labada gacmood ayaa uu sare u taagay isaga oo leh: *"Allahayow, ii hibee wiil ii gargaara."* Ducadii ayaa laga aqbalay oo waxa lagu yidhi:

*"Sakariyow, annaga ayaa kuugu bishaaraynayna wiil."* Qofka qalbikiisa ku xidha sababaha, Ilaahay (swt) waxa uu uga tagaa sababaha uu talasaartay, ka ku xidha isagana, waxa uu u fududeeyaa sababaha.

﴿فَٱدۡخُلُوٓاْ أَبۡوَٰبَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَاۖ فَلَبِئۡسَ مَثۡوَى ٱلۡمُتَكَبِّرِينَ﴾

**النحل: 29**

*"Gala irridaha jahannama idinka oo ku waaraya, waxaana xumaaday hoyga kuwa isla-weyn"*

Sida uu u bukoodo jidku ayuu u bukoodaa qalbiguna, dawaynta xanuunnada jidhka ku dhaca ayaana ka fudud kuwa ku dhaca qalbiga. Xanuunnada ugu daran ee ku dhaca qalbiga waxa ka mid ah kibirka oo ah: in uu qofku iskala waynaado dadka; waayo waxa uu haystaa hanti, shahaado ama shaqo uu ku mashquulsan yahay. Sidoo kale, waxa jira dad kibra yaga oo faramadhan, jaadkanina waa ka ugu halisan isla-weynida. Xadiiska waxa ku sugan: *"jannada ma galo qofka uu qalbikiisa ku jirto saxar in le'eg oo isla-weyni ahi."* Dadkii wanaagsanaa waxa dhaqan u ahayd in ay dhaksho iskaga daweeyaan marka ay iska dareemaan waxyar oo kibir ah. Saxaabiga Cabdillaahi Binu Salaam[10] ayaa soo dhex maray suuqa isaga oo degta ku sita xidhmo xaabo ah. Dadkii ayaa ku yidhi: "miyaan Ilaahay (swt) kaa fillaan xaabadan?" Waxa uu ugu warceliyay: *"haa, laakiin waxa aan doonay in aan dhabarka ka jabiyo kibirka."*

---

[10] **Cabdillaahi binu Salaam:** waxa uu ka mid ahaa aqoonyahankii iyo indheergaradkii Yuhuudda ee soo islaamay.

﴿وَعَنَتِ ٱلْوُجُوهُ لِلْحَيِّ ٱلْقَيُّومِ ۖ وَقَدْ خَابَ مَنْ حَمَلَ ظُلْمًا﴾

**طه: 11**

*"Wajiyadu waxa ay u hogteen Allaha nool ee u taagan maamulka addoomihiisa, dhab ahaantiina waxa hoogay qofka dambi xambaartay"*

Marka laga tago shirkiga[11], Alle waxa uu ugu neceb yahay dulmiga, cadhada uu u hayo dulmiga iyo dulmi-falahana waxa ka mid ah; in uu aqbalo habaarka uu Gaalku habaaro Muslinka dulmi falaha ah, arrinkanina kama aha jacayl uu u hayo Gaalka iyo nacayb uu u qabo Muslinka, ee Alle waxa uu jecel yahay caddaaladda, waxaanu neceb yahay dulmiga. Ibnu Teymiya[12] ayaa yidhi: *"Ilaahay, dawladda Gaaladda ah*

---

[11] **Shirki:** waa in aad wax uu Alle gaar u leeyahay la wadaajiso asaaggii.

[12] **Ibnu Teymiya (661-728H):** magaciisa oo seddexan waa Axmed binu Cabdixaliim binu Cabdisalaan oo ka mid ahaa foolaadkii iyo hormuudkii culimada waagii Mamaaliigta, sidoo kalena waxa lagu nanaysaa "sheekha Islaamka." Sheekhu sanadkii 661kii Hijrada ayuu ku dhashay magaalada Xarraan, halkaas ayuu joogay ilaa uu gaadhay todoba jir, intaa kadibna waxa uu u guuray magaalada Dimishiq. Sheekha waxa lagu xusuustaa in uu diinta Islaamka ku difaacay qalinkiisii iyo qawlkiisii oo uu doodo la galay faylasuufyadii iyo Alle-diidkii noolaa wakhtigaas. Waxa uu la dagaallamay Tataarkii ku soo duulay Calaamka islaamka, sidoo kale, uu xaqa ku addimay madaxdii Muslimiinta ee dulmi-falayaasha ahaa, ugu dambayntiina waxa uu ku dhintay xabsiga isaga oo u xidhan xaq darro. Ibnu Teymiya, waxa uu ku astaysnaa: dhowrsoonaan, is-dhul-dhig, Alla ka cabsi, aftahamo, aqoon iyo u samafalka waalidka. Sidoo kale, waxa uu ahaa aqoonyahan buuni ku ah diinta Islaamka oo innooga tegay tobanaan kutub ah. Sheekhu, waxa uu lahaa cadow badan oo iskugu jiray Muslimiin, Munaafiqiin iyo

*ee caddaaladda samaysa ayuu uga hiiliyaa ta Muslimadda ah ee dulmiga fasha."* Nin ayaa u qoray Cabdillaahi binu Cumar: *"ii soo qor aqoonta oo dhan."* Waxa uu ugu jawaabay ninkii: ***(Aqoontu, waa ay gudaballaadan tahay ee haddii aad karto in aad Ilaahay la kulanto adiga oo aan: daadin dhiig, quudan xaaraan, sharafta dadka meel kaga dhicin, isla markaana aan waxyeelin midnimada Muslimiinta, sidaa samee nabadgelyo korkaaga ha ahaato e.)***

---

Gaalaba, waxaana suuragal ah in aad aragto yada oo in badan wax laga sheegayo, ee waxa aan kugula talinayaa in aad baadho sooyaalkiisa; si aad wax badan uga ogaato shakhsiyaddiisii.

﴿ثُمَّ أَدْبَرَ وَاسْتَكْبَرَ﴾ المدثر: 23

*"Intaa kadib, waa uu dabajeediyay oo isla-weynaaday"*

Farqi weyn baa u dhexeeya qofka xumaanta samaynaya isaga oo taagdaran oo niyad jabsan iyo ka falaya isaga oo kibirsan, dambigana fudaydsanaya. Aad ayay u kala duwan yihiin shakhsiga xumaanta falaya, marka aad la talisana ku odhanaya: *"ii soo ducee, naf iyo shaydaan baa iga awood bataye"*, iyo ka adiga oo u diirnaxaya ku odhanaya: *"maxaa ku jaban? Waa nolol keliya ee iska raaxayso niyohow."*

Qofka hore, in uu Alle u soo laabto waa ay fududdahay waayo; dhibka haystaa waa xubnihiisa, balse ka dambe sida uu ku soo noqdaa ma sahlana maxaa yeelay; qalbiga ayuu ka bukaa. Sufyaan Ibnu Cuyayna[13] waxa uu odhan jiray:

***"Qofka ay baahida naftiisu ku bixiso xumaan, wanaag ayaa aan u rajeeyaa, laakiin ka uu kibir ku bixiyo waa aan u baqaa waayo; Aadan, Alle ayaa uu caasiyay isaga oo xumaanta jeclaysanaya, waana loo dambidhaafay, balse Ibliis Ilaahay ayaa uu caasiyay isaga oo kibirsan, deedna naxariista Rabbi ayaa laga dheereeyay."***

---

[13] **Sufyaan Ibnu Cuyayna (107-198H):** waxa uu ka mid ahaa culimadii iyo aqoonyahankii Muslimiinta ee lagu majiiran jiray Alle ka cabsiga, aqoonta, akhlaaqda wanaagsan iyo hadalka murtida leh.

﴿وَلَا يَجۡرِمَنَّكُمۡ شَنَـَٔانُ قَوۡمٍ عَلَىٰٓ أَلَّا تَعۡدِلُواْۚ﴾ المائدة: 8

*"Cadhada aad duul u haysaan yaanay idinku xambaarin caddaalad darro."*

Nacaybka daran iyo jacaylka xooggani waa hoog iyo halaag, labadan xanuunna waxa lagu imtixaamay Yuusuf. Nacaybka darani waxa uu ku riday ceel, halka uu jacaylka xoogganina ka geliyay xabsi. Milayada qaar, qalbiyadeenna ma maamulno, haddana waxa la inna faray caddaalad haba innagu adkaato e. Xumaanta qofka aad jeceshahay ha ka dhigin wanaag waayo; waa aad jeceshay, wanaagga qofka aad necebtahayna haka dhigin xumaan maxaa yeelay; waa aad necebtahay. Ahow caddaalad fale wax walba ku hubsada halka ku habboon. Cabdillaahi binu Muxammad Al-Warraaq[14] waxa uu yidhi: Axmed Binu Xanbal[15] ayaannu u tagnay, waxaanu na waydiiyay: *"halkee baad ka timaaddeen?"* Waxa aannu ku nidhi: *"maqaamkii Abu Kurayb[16]."* Waxa uu

---

[14] **Al-Warraaq:** waxa uu ahaa caalim weyn oo ka mid ah culimadii Islaamka ee aqoonta badan u lahayd cilmiga Naxwaha.

[15] **Axmed binu Xanbal (164-241H):** waxa uu ahaa faqiih, muxaddis iyo imaamka mad'habka afraad ee xanbaliga. Imaamku waxa uu ku caanbaxay aqoon badnaan, maskax furan iyo dhaqannada suubban sida: *adkaysiga, is-dhul-dhigga iyo cafiska.* Shaafici oo ammaanaya ayaa yidhi: *"Baqdaad ayaa aan ka soo baxay, kagamana iman qof ka dhorsoon oo ka Alle ka cabsi iyo fahanba badan Axmed binu Xanbal"*

[16] **Abu Kurayb Al-Hamadaani:** waxa uu ahaa imaam iyo muxaddis weyn oo dhashay sanadkii 161H, Waxaana lagu magacaabi jiray sheekha culimada xadiiska.

nagu yidhi: "*u qora waa Sh. wanaagsan.*" Waxa aannu ku nidhi: "*balse, waa uu ku dhaleecaynayay.*" Waxa uu yidhi: "*waa sheekh wanaagsan oo la igu imtixaamay.*"

﴿وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَّاضِرَةٌ ﴿٢٢﴾ إِلَىٰ رَبِّهَا نَاظِرَةٌ ﴿٢٣﴾﴾ القيامة: 22-23

"*Wajiyaa iftiimaya maalinkaa, Rabbigoodna way eegayaan.*"

Nimcada ugu quruxda badan ee laga helayo jannadu maaha dumarka xuural-caynta -in kasta oo ay qurxoon yihiin-, maaha wabiyada butaacaya -in kasta oo ay bilicsan yihiin-, laakiin waa fiirinta wajiga Alle (swt). Marka ay ehelu jannuhu galaan jannada ayuu Rabbi ku odhanayaa: "*maxaa aan idiin biiriyaa?*" Waxa ay odhanayaan: "*miyaanad na gelin jannada, miyaanad foolalkayaga caddayn, sidoo kalena miyaanad naga badbaadin naar?!*" Alle (swt) ayaa ka qaadaya foolkiisa daahii saarnaa, dadka jannadana lama siin shay ka qaalisan daawashada wajiga Rabbigood.

﴿وَلَا عَلَى ٱلَّذِينَ إِذَا مَآ أَتَوۡكَ لِتَحۡمِلَهُمۡ قُلۡتَ لَآ أَجِدُ مَآ أَحۡمِلُكُمۡ عَلَيۡهِ تَوَلَّواْ وَّأَعۡيُنُهُمۡ تَفِيضُ مِنَ ٱلدَّمۡعِ حَزَنًا أَلَّا يَجِدُواْ مَا يُنفِقُونَ﴾ التوبة: 92

*"Dambi korkooga ma ahaan kuwa kuu imanaya; si aad u siiso gaadiid, ee aad ku tidhi: ma hayo. Waa ay jeedsadeen yaga oo ilmaynaya oo ka murugaysan in ay waayeen wax ay ku bixiyaan jidka Eebbe."*

Abu Layla iyo Cabdullaahi binu Muqafal ayaa u yimid Nebiga (NNKH) maalinkii Tabuuka; si uu u siiyo fardo ay ku dagaal galaan. Suubbanuhu waxa uu u sheegay in aanu hayn gadiid ay fuulaan, deedna halkii ayay ka laabteen yaga oo ilmaynaya. Tani waa oohintii markii ay haleeli waayeen wanaagga ee sidee ayay noqon lahayd haddii ay ku dhici lahaayeen xumaan?! Kani waa xaalka qofka Mu'minka ah, aad ayaanay ugu culus tahay in ay ka xidhmaan irridaha Eebbe. Haddii uu wanaag samaynayo waa uu u degdegaa oo Alle ayaa ka hor-istaaga. *Haddaba, xaalkiisu sidee ayaa uu noqonayaa marka uu dareemo in ay isaga iyo Ilaahay kala hortaagan yihiin xumaano uu falay?!*

﴿وَلْيَعْفُوا۟ وَلْيَصْفَحُوٓا۟ ۗ أَلَا تُحِبُّونَ أَن يَغْفِرَ ٱللَّهُ لَكُمْ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ﴾

**النور: 22**

*"Ha cafiyeen oo ha u dhaafeen; miyaydaan jeclayn in uu Alle idiin dambidhaafo? Alle waa dambidhaafe naxariis badan."*

Dhaqanka ugu wanaagsan ee uu Alle (swt) la jecel yahay addoonkiisu, waa ka uu iskala raalliga noqday. Ilaahay, waxa uu jecel yahay cafiska iyo dhaafidda. Alle aad ayuu u jecel yahay kuwa dadka iska cafiya ee wixii lagu sameeyayna aan waxba ka soo qaadin. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu Nebigu saxaabada ku boorriyay wax-bixinta, Culba Binu Sayd oo ahaa sabool aan haysan wax uu bixiyo ayaa inta uu istaagay ku yidhi suubbanaha: *"anigu ma haysto wax aan bixiyo oo aan ka ahayn in aan cafiyo qof kasta oo sharaftayda meel kaga dhacay."*

Maalinkii dambe ayuu Nebigu (NNKH) yidhi: *"mee Culba binu Sayd?"* Culba ayaa kacay oo yidhi: *"waa i kan ergeygii Ilaahayow."* Nebiga ayaa ku yidhi: *"Ilaahay waa uu kaa aqbalay sadaqadaadii."*

﴿قَالَ يَٰبُنَيَّ إِنِّيٓ أَرَىٰ فِي ٱلۡمَنَامِ أَنِّيٓ أَذۡبَحُكَ﴾ الصافات: 102

*"Wiilkaygiyow, riyo ayaan ku arkay aniga oo ku gawracaya."*

Imtixaan ka mid ah kuwii ugu adkaa soyaalka insaanka, ayaa la mariyay oday da' ah oo sannado badan bilaa ubad ahaa. Ammintii u helay wiil, qalbigiisuna uu ku xasilay ayaa la faray in uu birta ka aslo. Kama labalabayn, kamana dib dhicin waayo; waxa uu ogaa riyada Nebiyadu in ay tahay waxyi. Waxa uu u degdegay qaabkii uu u fulin lahaa amarka Alle, yaanu jeclaanba e. Sidaa darted, Ibraahin waxa uu ahaa qaran maxaa yeelay; wax kasta ka hor, xataa naftiisa, qalbigiis Ilaahay ayaa ku weynaa. Alle waa uu ka naxariis badan yahay in uu Ibraahin faro gawraca inankiisa, laakiin markii uu wiilku qalbiga ibraahin ku weynaaday ayuu faray in uu gawraco. Waxa jira qalbiyo uu Ilaahay ka hinaaso cid aan isaga ahayni in ay gasho, ujeeddada gawracuna waxa ay ahayd sidii qalbigiisa looga saari lahaa jacaylka Ismaaciil.

﴿وَقَدِمْنَآ إِلَىٰ مَا عَمِلُوا۟ مِنْ عَمَلٍ فَجَعَلْنَـٰهُ هَبَآءً مَّنثُورًا﴾ الفرقان: 23

*"Waxaanu u hormarinay camalladii ay soo shaqaysteen, oo waxa aannu ka yeelnay bus la afuufay"*

Kitaabka Baxru Al-Dumuuc ee uu qoray Ibnu Qayim Al-Jawsi[17], waxa ku xusan hadal laga wariyo Siciid binu Jubayr[18] oo sidan u dhigan: maalinka qiyaamaha waxa la keenayaa addoon, kitaabkiisa ayaa la siinayaa, kumana arkayo soonkiisii, salaaddiisii iyo camalladii suubbanaa ee uu soo qabtay. Waxa uu odhanayaa: *"Rabbiyow, kitaabkan anigu ma lihi maxaa yeelay; anigu waxa aan soo shaqaystay wanaagyo, kitaabkanna kuma arko." Waxa lagu odhandoonaa: "Rabbigaa ma lumo, mana hilmaamo ee camalladaadii suubbanaa waxa la tegay dadkii aad xamatay".* Iska jir in aad Alle u caabuddo cid kale. Sow hoog iyo halaag maaha in uu barri wanaaggaaga la tago qof aad hanjabisay, mid aad hantidiisa dhacday, mid aad sharaftiisa meel kaga dhacday iyo mid aad shaqadiisa qaadatay adiga oo cid kale garabsanaya.

---

[17]**Ibnu Al-Jawsi (510-597H):** Cabdiraxmaan binu Cali binu Muxammad, waxa uu ku caanbaxay waaninta, wax-sheegga iyo qorista kutubta.

[18]**Saciid binu Jubayr (46-95H):** waxa uu ahaa imaam iyo qaari' caan ah, sidoo kalena waxa uu ahaa taabici ku astaysnaa Alle ka cabsi iyo aqoon.

﴿وَتُوبُوٓاْ إِلَى ٱللَّهِ جَمِيعًا أَيُّهَ ٱلْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ﴾ النور: 32

*"Mu'miniintow, giddigiin Alle u towbad keena; si aad dhammaantiin u liibaantaan"*

Ibnu Qayim waxa uu yidhi: *"addoonka maalmihiisa waxa ugu qaalisan ka uu Eebbihii u soo laabto"*, asarkana[19] waxa ku xusan: *"amminta uu addoonku towbad keeno, mid dhawaaqa ayaa ku dhawaaqaya: hebel Eebbihii ayaa uu la heshiiyay"*. Qofku haddii uu haysto ruux ay aad isu jecel yihiin, kadibna uu soo kala dhexgalo is-maandhaaf, awood walba waxa uu ku bixiyaa qaabkii uu u soo celin lahaa xidhiidhkoodii xumaaday. Ilaahay (swt) baa cid kasta ka mudan in la raalli geliyo. Marka uu kaa dhacdo gef raadaynaya xidhiidhka idinka dhexeeya adiga iyo Ilaahay, u degdeg sidii aad u soo celin lahayd xidhiidhka adiga oo: *mar wax bixinaya, mar dambidhaaf waydiisanaya, mar tukanaya mar kalana Quraan akhriyaya.* Qofka garaadka badan, marka la raalli geliyo, waa uu qaataa; ee maxa aad u malaynaysaa Allaha ugu naxariista badan inta naxariisata?!

---

[19] **Asar (الأثر):** waa hadalka loo tiiriyo Nebiga, saxaabada iyo taabiciinta.

﴿قُرَّتُ عَيْنٍ لِّي وَلَكَ﴾ القصص: 9

*"labadeennba indhadoogsi ayaa uu innoo yahay."*

Hadalka sare waxa ku tiraabtay Aasiya bintu Masaaxim - xaaskii Fircoon- oo ka hadlaysay Muuse. Fircoon baa ugu warceliyay: *"adiga hakuu noqdo indhadoogsi, se anigu wax baahi ah uma qabo"* Nebiga oo falanqaynaya hadalkan ayaa yidhi: *"Ilaahay baan ku dhaartay, ee Fircoon haddii uu u qiran lahaa sida xaaskiisa oo kale in uu ilmahan yari u yahay indha doogsi, sida uu yada u hanuuniyay ayaa uu u hanuunin lahaa, balse hadalkiisa ayaa galaaftay".*

Qadarka Alle ayaa qoray, laakiin niyadda wanaajiya oo wanaag fisha. Qofka loo dhiibay shaqo ee aamminsan in ay xun tahay, sidaas ayay noqonaysaa, ka guursada tiiyoo ay naftiisa ku jirto guurkani waa heshiis lagu guuldarraystay, xumaanta ka dhalata niyaddiisa xun waa uu helayaa. *Malaha wanaajiya maxaa yeelay; waxa suuraggal ah in qofka loo raaco carrabkiisa.*

﴿قُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ﴾ العنكبوت: 63

*"Dheh: mahad oo dhan Alle ayaa iska, dadka badankooduna caqli ma laha."*

Marka aad dabagasho astaamaha uu Rabbi (swt) ku tilmaamay badi dadka, waxa aad soo helaysaa in ay yihiin: *waxba ma garanayaan, ma mahadnaqayaan iyo garaad ma laha.* Dhanka kale, Alle (swt) waxa uu yidhi: *"inyar oo ka mid ah addoomahayga ayaa mahadnaqaya"*. Ha u iilan dadka, gudo waajibka ku saaran, baahidaadana u bandhigo Ilaahay. Imaam Axmed ayaa ku yidhi Xaatim indhoole: *"dadka sidee baa looga ammaan helaa?"* Xaatim ayaa ku yidhi: *"hantidaada sii, waxna haka qaadan. Waa ay ku dhibiye gacan ha u qaadin, sidoo kale, danohooga u gud, beddelna ha waydiisan."* Imaamu Axmed ayaa ku yidhi: *"Xaatimow, waa arrin adag."* Xaatim baa ku yidhi: *"oo haddii aanad sidan falin, horta ma badbaadaysaa?!"*

﴿وَلَا تُطِعۡ كُلَّ حَلَّافٖ مَّهِينٍ ۝١٠ هَمَّازٖ مَّشَّآءِۭ بِنَمِيمٖ ۝١١﴾ القلم: 10-11

*"Ha yeelin dhaar badane kasta oo liita, kaas oo xan badan, isku dirka dadkana u dheereeya."*

Xantu midnimada ayay baabi'ísaa, xidhiidhadana waa ay dumisaa ee maanta maxaa ka badan diradiraalayaasha! Marka uu qof walaalkii wanaag ka sheego isaga oo maqan, ma helaysid qof gaadhsiiya, laakiin haddii uu xumaan ka sheego waa ay u baratamayaan. Dadkii hore, waxa dhaqan u ahayd in ay iska fogeeyaan diradaraalaha. Fudayl binu Cayaad[20] ayaa yidhi: waxa aan la joogay Wahab binu Munabbah[21], deedna nin baa u yimid oo ku yidhi: *"hebel ayaan soo maray oo waa uu ku caayay."* Wahab ayaa ku yidhi: *"Shaydaanku ma waayay ergey aan adiga ahayn?!"*

***"Fadlan, ha noqonina ergo Shaydaan."***

---

[20]**Fudayl binu Cayaad (107-187H):** waxa uu ahaa haldoorkii iyo hormuudkii culimada Muslimiinta ee qarniyadii hore. Fudayl bilowgii hore waxa uu ahaa dhuljiif iyo mooryaan dadka dhaca, balse gadaal ayaa uu ka towbaad keenay.

[21]**Wahab binu Munabbah (34-114H):** waxa uu ahaa taabici weyn oo caan ah, kaas oo lagu yaqaannay wacdinta iyo wax-u-sheegga dadka.

﴿وَإِذۡ قُلۡنَا لِلۡمَلَٰٓئِكَةِ ٱسۡجُدُواْ لِأٓدَمَ فَسَجَدُوٓاْ إِلَّآ إِبۡلِيسَ أَبَىٰ وَٱسۡتَكۡبَرَ وَكَانَ مِنَ ٱلۡكَٰفِرِينَ﴾ البقرة: 34

*"Xus markii aannu ku nidhi malaa'igta: u sujuuda Aadan, waa ay sujuudeen Ibliis mooyaan oo diiday islana weynaaday, waxaanu ka mid ahaa gaalada"*

Ibliis, sujuuddii uu diiday ayaa sabab u noqotay in laga dheereeyo naxariista Ilaahay. Laakiin marka aynu fiirinno xaaladda Ibliis iyo ta Muslinka ka taga salaadda, waxa innoo soo baxaya arrin layaab leh. Ibliis waxa uu diiday in uu u sujuudo Aadan, qofka salaadda ka tagaana waxa uu diidayaa in uu u sujuudo Allaha abuuray Aadan. Xumaan oo dhan Alle ayaa ka hufane, maxaa uga naxariis iyo dulqaad badan ummaddan! ***Si kasta oo ay u weyn yihiin dambiyada dadku, Alle waxa uu ugu baaqayaa towbadkeen.***

﴿وَلَا تُصَعِّرْ خَدَّكَ لِلنَّاسِ﴾ لقمان: 16

*"Dhabankaaga haka jeedin dadka"*

Yaxye binu Muciin[22] ayaa yidhi: waligay ma arag addoon ka gobsan Axmed binu Xanbal. Konton sannadood ayaannu saaxiibo dhow la ahayn, waligii nooguma uu faanin wanaagga iyo dadnimada uu Ilaahay ugu deeqay, waxaanu odhan jiray: *"waxa aannu nahay danyar"*.

Isdhul-dhiga waayo; hantida kaa dhigaysa qof kibirsani waa caydh. Aqoonta kugu bixinaysa sarrayntu waa jahli. Kurisga kaa dhigaya ruux isla weyni waa hoobasho. Awoodda kaa dhigaysa mid xoog badanina waa tamardarro. ***Hodantinimada, sarraynta iyo aqoonta, waxa laga helaa kuwa isdhul-dhiga agtooda.***

[22]**Yaxye binu Muciin**: waxa uuu ahaa imaam, xaafid iyo muxaddis ku takhasusay sunnada Nebiga (NNKH)

﴿وَٱصۡبِرۡ عَلَىٰ مَآ أَصَابَكَۖ إِنَّ ذَٰلِكَ مِنۡ عَزۡمِ ٱلۡأُمُورِ﴾ لقمان: 16

*"U adkayso dhibka ku soo gaadhay maxaa yeelay; arrinkaasi waxa uu ka mid yahay arrimaha adag."*

Waa adduun iyo xaalkii oo waxa aynu ku dul soconnaa qorshaha uu Alle innoo dejiyay. Ma diidi kartid xanuunka kugu dhacaya, awood aad kaga celisid ma lihid geerida ku habsatay qofka aad jeceshahay, sidoo kalena shaqada lagaa caydhiyay -haba aad masaxdid kabaha maamulahaaga waagii berayaba e- waa wax kuu qornaa. U fiirso sida uu suubbanuhu u dhisayo qalbiyada ay musiibadu ragaadisay: *"ogow, wixii kugu dhacay marna kuma seegeen, waxa aan kugu dhicinna marna kuguma dheceen."* Xasan Al-Basri[23] ayaa yidhi: *"haddii aan abaal la innagu siin waxa aynu jecel nahay, maba aynu helneen, Eebbena waa deeqsi oo addoonkiisa ayuu imtixaamaa isaga oo dhibsanaya; si uu u siiyo abaal."*

---

[23]**Xasan Al-Basri (21-110H):** waxa uu ahaa imaam, garsoore iyo muxaddis ka mid ahaa culimadii taabiciinta, sidoo kalena waxa uu ahaa shakhsi haybad leh oo ay dadku aad u tixgeliyaan, wacdigiisana ku soo xoomaan.

﴿وَلَا تَمْشِ فِي ٱلْأَرْضِ مَرَحًاۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ﴾ لقمان: 18

*"Ha socon dhulka adiga oo kibraya waayo; Ilaahay ma jecla islaweyne kasta oo faan badan"*

Imaamu Axmed ayaa soo galay suuqa Baqdaad, xidhmo xaabo ah ayuu ka iibsaday, tunkana waa uu ku qaatay. Markii ay ku baraarugeen dadkii, ayay u soo degdegeen xaggiisa, tukaamadii ayay xidheen, kuwii jidka marayayna waa ay istaageen si ay bariidiyaan yaga o ku leh: *"xaabada aannu kaa qaadno."* Imaamka foolkiisa ayaa casaaday, indhihiisa ayaa ilmeeyay, waxa aanu yidhi: *"waxa aannu nahay danyar, haddii aanu jiri lahayn asturka Ilaahayna, waannu fadeexadoobi lahayn."*

Imaamu Axmed, is-dhuldhigga waxa uu ka bartay Nebiga) oo lisan jiray laxdiisa, kabihiisa iyo dharkiisana tolan jiray, isla markaana la tartami jiray xaaskiisa Caa'isha, Safiyana ilmada ka tirtirijiray. Mar ay saxaabadu qaybsadeen hawsha lax la qalayay ayaa uu mid yidhi: *"aniga ayaa gawracaya"* Mid labaad ayaa yidhi: *"anigu haragga ayaan ka saarayaa"* Nebiguna waxa uu yidhi: *"aniguna waxa aan soo ururinayaa xaabada lagu karinayo."*

﴿مَا يَلْفِظُ مِن قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ﴾ ق: 18

*"Insaanku kuma dhawaaqo erey, haddii uu ku dhawaaqana waxa ag jooga mid ilaalinaya oo tirinaya."*

Ma qorto Malaa'igtu hadalka idin dhexmaraya dadka oo keliya, laakiin waxa ay qortaa shay walba oo aad ku qorayso baraha ay ku wada xidhiidhaan dadweynuhu. Hadalka kiisa wanaagsan iyo kiisa xunba waa laguu diwaangelinayaa, wax kasta oo aad ku qorto baraha bulshadu ku xidhiidhaana waa dhaxal kaa hadhaya. Faallooyinkaagu haddii aanay ahayn wanaagyo kuu sii soconaya, ugu yaraan haka tegin xumaano kuu sii socda.

﴿لَا تَدۡرِي لَعَلَّ ٱللَّهَ يُحۡدِثُ بَعۡدَ ذَٰلِكَ أَمۡرٗا﴾ الطلاق: 1

*"Ma ogide qofyohow, waxa suuraggal ah in uu Ilaahay arrin cusub keeno kadib intii ay is-fureen."*

Qofku waxa uu gaadhaa heer uu quus ka istaago nolosha, deedna xagga Ilaahay (swt) ayaa uu uga yimaaddaa faraj. Yaa islahaa Haajaradii dhex guclaynaysay labada buureed ee Safa iyo Marwo yada oo baadidoonaysa biyo, ayaa uu ceel biyo ahi ka soo burqan labada lugeed ee inankeed dhexdooda! Biyaha samsamku uma ay burqan si ay cabbaan yada iyo wiilkeedu, balse waxa loogu talagalay in ay cabbaan ummaduhu ilaa maalinka qiyaamaha. Ilbidhiqsi gudihii ayaa uu Alle sidan isku dabamariyaa xaaladaha. *"Dhibaatada laguma waaro"*, waxa yidhi Ibnu Qayim. Waxa inna soo wada maray xaalado adag oo innoogu muuqday dhammaadkii nolosheenna, balse maanta waa xusuuso hore.

***"Ha quusan ee Rabbigaa ku kalsoonow maxaa yeelay; cibaadada ugu weyni waa sugidda iyo saadaalinta farajka iyo guusha."***

﴿إِذْ قَالَ يُوسُفُ لِأَبِيهِ يَٰٓأَبَتِ إِنِّي رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِي سَٰجِدِينَ﴾ يوسف: 4

*"Xus markii uu Yuusuf ku yidhi aabbihii: waxa aan arkay kow iyo toban xiddigood iyo qorraxda iyo dayaxa oo ii sujuudaya"*

U fiirso macnaha ereygan: *"aabbihii"*. Ogsoonow halka aad ku aamminayso sirtaada waayo; qof kastaa maaha aammin, mawduuc walbaana ma mudna in lagu ballaadhiyo carrabka. *Mar kale, dadka ha wada dhexgelin ee wax uun iskula hadh.*

﴿قَالَ رَبِّ إِنِّي وَهَنَ ٱلۡعَظۡمُ مِنِّي وَٱشۡتَعَلَ ٱلرَّأۡسُ شَيۡبٗا﴾ مريم: 4

*"Eebbow, lafihii waa ay i tamardarreeyeen, madixiina waa uu i cirroobay."*

Sakariye, irridaha oo dhan ayaa iska soo xidhay, wiil ayaa uu doonayay, balse xal ma uu hayn. Lafaha ayaa dabcay, madaxa ayaa caddaaday, xaaskiisuna waa madhalays. Waxa iswaydiin mudan: *halkee ayuu ka imanayaa ilmuhu yada oo ay jiraan xaaladahan oo dhami?* Sakariye, waxa uu ku kalsoonaa in uu Alle (swt) wax kasta awoodo. Markii uu qalbiga ka jaray sababaha, xilligii ay talo farihiisa ka haadday, isla markaana uu qarwaaqsaday talo in ay tahay ta Alle, ayaa uu qalbiga ku xidhay isaga oo keliya, kadibna waxa u yimid baaqan quruxda badan: *"Sakariyow, waxa aannu kuugu bishaaraynaynaa wiil magaciisu Yaxye yahay."*

***"Qofka si dhab ah ugu kalsoonaada Ilaahay (swt), waxa uu u sahlaa mucjisooyinka."***

﴿فَٱفۡسَحُواْ يَفۡسَحِ ٱللَّهُ لَكُمۡۖ﴾ المجادلة: 11

*"Is ballaadhiya, Ilaahay ayaa idiin ballaadhine"*

Aayaddani waxa ay ka hadashay ballaadhinta fadhiyada, laakiin waa ay ka guda ballaadhan tahay macnahan. Qofka kasta oo u gurmada qof ay xaaladdu jiq ku tahay, Ilaahay ayaa u gargaaraya isagana. Qof walba oo kaba qalbi jabay, Alle ayaa kabaya qalbigiisa. Qof kasta ka farxiya qof kale, isagana Alle ayaa ka farxinaya. Qof kasta oo u gargaara qof xanuunsanaya, Rabbi ayaa isna ka fudaydinaya xanuunka. Qof walba oo walaalkii ka tirtira illinta, isagana Alle ayaa ka tirtiraya. ***"Ma jirto cid ka ballan oofin badan Ilaahay! Qofka samaha samaynayaana, naftiisa ayaa uu ka ilaalinayaa xumaanta."***

﴿وَكُلُّهُمْ ءَاتِيهِ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فَرْدًا﴾ مريم: 95

*"Dhammaantood isaga (Ilaahay) ayay u imanayaan qiyaamaha yaga oo keli keli ah."*

Qiyaamaha waxa aad imanaysaa adiga oo ka faramadhan hantidii aad urursatay, kursigii ku mashquuliyay iyo qoyskii ballaadhnaa ee aad ilaalin jirtay, waxaana isku soo hadhaya adiga, camalkaaga iyo Ilaahay. Markii uu xanuunka geeridu soo ritay boqor Saleebaan Al-Qaanuuni[24] waxa uu ku yidhi dadkii ku hareeraysnaa: *"amminta aan xijaabto iga saara sanduuqa; si ay dadku u ogaadaan xataa boqorku in uu dunidan ka ambabaxay isaga oo faramadhan."*

***"Ma xuma in uu qofku u shaqaysto adduunyadiisa, balse waxa khasaare ah in uu hilmaamo aakhiradiisa. Balo ma jirto haddii uu qofku qurxiyo gurigiisa, laakiin waa in aanu ilduufin qabrigiisa."***

---

[24]**Saleenaan Al-Qaanuuni (1494-1566M):** waxa uu ahaa suldaankii 7aad ee Cusmaaniyiinta iyo khaliifkii 80aad ee Muslimiinta. Muddadii uu hoggaanka u hayay Cusmaaniyiinta, dawladdii Muslimiintu waxa ay noqotay tii ugu awoodda badnayd caalamka, reer galbeedkuna waxa ay u bixiyeen "Saleebaankii weynaa".

﴿قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ﴾ الملك: 23

*"In aad u yar ayaad mahadnaqaysaan"*

Nin ka mid ahaa dadkii wanaagsanaa ayay iskugu biireen: *bidaar, baras, indho la'aan iyo laxaad la'aani.* Isaga oo ku jira xaaladdan ayuu haddana odhan jiray: *"mahad oo idil waxa iska leh Eebbaha iga bogsiiyay xanuunnada uu ku riday badi addoomihiisa.*

Nin ayaa soo maray oo ku yidhi: *"indho la'aan, baras, bidaar iyo laxaad la'aan ayaa iskugu kaa biiray ee waa maxay balada kaa maqani?"* Ninkii waxa uu yidhi: *"waar hooge, Ilaahay waxa uu i siiyay carrab wardiya, qalbi mahadnaqa iyo jidh ku samra xanuunka haya."* Nasiib xumo, dad badani liibaanta waxa ay u haystaa hanti la helo, isla markaana waxa ay hilmaameen nimcooyinka kala ah: aragga, gacmaha iyo lugaha oo adduunka dhexdiisa waa ay ku indho, gacmo iyo lugaba la' yihiin. Ilaahay baa iska leh mahad oo dhan.

﴿لَتَرْكَبُنَّ طَبَقًا عَن طَبَقٍ﴾ الإنشقاق: 19

*"Waxa aydun maridoontaan, marxalado kala duwan"*

Aayaddan macneheedu waxa uu yahay; xaaladihiinnu waa ay isbedbeddelayaan oo dhibka dheef baa xigaysa, cudurka caafimaad baa ka dambaynaya, murugada farxad baa beddelaysa, kala taggana midnimo iyo wadajir baa xigaya. Tani waa adduunyo oo waligeed xaalad keliya kuma waarto, dadkuna waxa ay u dhexeeyaan: *baahi iyo badhaadhe, cudur iyo caafimaad, leeleel iyo ladnaan iyo kulan iyo kala tag.* Liibaanuhu waa qofka mar kasta magansada Ilaahay (swt).

﴿قَالَ سَـَٔاوِىٓ إِلَىٰ جَبَلٍ يَعْصِمُنِى مِنَ ٱلْمَآءِ﴾ هود: 43

*"Waxa uu yidhi: waxa aan magangelayaa buur iga celinaysa biyahan"*

Wiilkii ku soo barbaaray guri Nebi ayaa duufaankii ku dhintay, kii ku hanaqaaday gurigii Fircoonna badda ayaa uu laba u kala dhambalay. ***Bilowgu muhiim maaha, balse sirtu waa dhammaadka.***

﴿وَجَعَلَنِي مُبَارَكًا أَيْنَ مَا كُنتُ﴾ مريم: 31

*"Eebbow, iga yeel mid ku barakaysan halkii uu joogaba"*

Muhiim maaha halka aad ku sugan tahay, laakiin waxa muhiim ah Meesha aad ku dambaynayso, macdanta asalka ahna ma dooriyaan maalmuhu. Qofka gobta ahi hantida, mansabka iyo shahaadooyinku uma kordhiyaan waxa aan ka ahayn isdhul-dhig, qofka xumina waa uu qof xun haba ahaado kaba caseeye ama wasiir e. Yuusuf, isaga oo xabsiga ku jira ayaa lagu yidhi: *"waxa aannu aragnaa in aad ka mid tahay samafalayaasha."* Mar kale isaga oo boqor ah haddana waxa lagu yidhi isla hadalkii hore oo kale.

***"Gobtu waa uun gob, goob kasta oo ay joogtaba."***

﴿فَصَكَّتْ وَجْهَهَا وَقَالَتْ عَجُوزٌ عَقِيمٌ﴾ الذاريات: 29

*"Inta ay dhirbaaxday foolkeeda ayay tidhi: tani waa habar madhalays ah."*

Tani waa Saara oo ay Malaa'igtu ugu bishaaraysay Isxaaq. Shanta inta ay dhabanka saarta ayay tidhi: *"tani waa habar madhalays ah! Gabadha yaraanta ku dhashaa weynida kuma dhasho, ee bal ka warran tii aan hore u dhalinna!"* Waxa suuraggal ah in aad hadda fiirinayso xaaladdaada adiga oo leh: *"Eebbow, qaabkee ayaa aan ku hirgeliyaa yoolashayda?"*

*"Ku qab kalsooni buuxda in marka uu Ilaahay kula doono wanaag uu kaaga soo qaadayo xataa haddii uu saaran yahay dhabarka cadowgaaga."*

﴿وَٱللَّهُ فَضَّلَ بَعۡضَكُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖ فِي ٱلرِّزۡقِۚ﴾ النحل: 71

*"Alle ayaa badhkiinba badhka kale ka dheeraad siiyay quudka"*

Ilaahay (swt) ka xumaanta samaynaya uma siiyo hantida taamrdarro xaggiisa ka ahaatay, ka addeecaya uguma diido baahi xaggiisa ka ahaatay, laakiin adduunku waa daar imtixaan. Alle (swt) deeqdiisa iyo diidmadiisu waxay ku salaysan yihiin xikmad, wixii uu kuu qoray waa ay ku soo gaadhayaan xataa haddii ay dunida oo dhami kaa horistaagto, wixii uu kuu diidayna heli maysid xataa haddii ay dunidu isku kaashato sidii aad u heli lahayd.

***"Qalimmada waa la koryeelay, warqaduhuna waa ay qallaleen."***

﴿يَٰيَحۡيَىٰ خُذِ ٱلۡكِتَٰبَ بِقُوَّةٖ﴾ مريم: 12

*"Yaxyow, kitaabka ku qaad awood"*

Awoodda la siiyay Yaxye ma ahayn mid jidheed, balse waxa ay ahayd mid qalbi iyo mid aamminaadeed ee adiguna sidiisa oo kale, kitaabka ku hano awood. Ahow qof ku dheggan iimaankiisa iyo aamminaadiisa, dadka oo dhami haba dheelliyaane. Dadku marka ay dhabarka wada jeediyaan, ha noqo dameeri dhaanraacday ee ku dheg mabda'aaga. Adiga oo keliya ayaa khasaaraya marka uu safarku kaa tago.

﴿ٱلۡمَالُ وَٱلۡبَنُونَ زِينَةُ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۖ﴾ **الكهف: 46**

*"Cuudka iyo carruurtu waa quruxda adduunyada"*

Dunidu cuudka ayay ku fududdahay, carruurtana waa ay ku macaan tahay, laakiin u fiirso waa qurux ee maaha qiime. Insaanku waxa qiimaha u yeelaa waa aqoontiisa ee maaha hayntiisa iyo hantidiisa. Waxa qiimaha u yeelaa waa waxa ku jira qalbigiisa, ee maaha jeebkiisa. Waxa qiimaha yeelaa waa naxariistiisa, ee maaha awooddiisa. Waa u tudhistiisa, ee maaha taagtiisa. Ha noqon sidii kuwii Qaaruun u quudhi waayay hantida, markii isaga iyo hantidiisii dhulka lala jarayna xaqiiqada ku baraarugay. "*Noqo qof dhugmo leh.*"

﴿لَا تَحۡسَبُوهُ شَرّٗا لَّكُمۖ بَلۡ هُوَ خَيۡرٞ لَّكُمۡۚ﴾ النور: 11

*"Ha u malaynina in uu shar idiin yahay, laakiin khayr ayaa uu idiin yahay"*

Arrimaha Alle (swt) waxa ay soconayaan innaga oo aan ka warqabin. Dhibka kasta oo inna soo gaadha, gadaal ayaynu ka ogaannaa wanaaggiisa iyo in ay innoogu jirtay dani. Doonta lagu xusay suuradda Al-Kahfi, haddii aan la daloolin lahayn, boqorkii ayaa khasab ku qaadan lahaa, danyartiina waxa ay waayi lahaayeen ishoodii dhaqaale. Wiilkii haddii aan la dili lahayn, naftiisa iyo ta waalidkiiba waa uu hoojin lahaa. Xataa gidaarkii haddii aan la toosin lahayn, hantidii agoonta ayaa limi lahayd.

***"Ku kalsoonaad Ilaahay (swt), waxa suuraggal ah in ay isdhalaan wanaagyaduye."***

﴿يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ إِلَى ٱلۡأَرۡضِ﴾ السجدة: 5

*"Ilaahay, isaga ayaa maamulaya cirka iyo dhulkaba"*

Ilaahay (swt) isaga ayaa maamula arrimaha ee maxa aad la murugoonaysaa? Kalsooni dhab ah ku qab Ilaahay (swt). Cudurka ku haya isaga ayaa haya dawadiisa, daynta ku daalisay isaga ayaa kaa gudaya, welwelka iyo walaaca ku cusleeyay isaga ayaa ka qaadaya, cidhiidhiga ku hayana isaga ayaa kaa faydaya ee irriddihiisa magangal goor kasta. *"Deeqsiga ayaa guda baahiya insaanka, ee maxaa aad u malaynaysaa Ilaahayna?!"*

﴿هَٰذَا مَا تُوعَدُونَ لِكُلِّ أَوَّابٍ حَفِيظٍ﴾ ق: 42

*"Kani waa wixii la idiin yaboohay, waxaana iska leh mid kasta oo towbad keen badan, isla markaana dhawra wixii dhawr la yidhi"*

Ereyga "الأواب": af ahaan waa ku talaxtag, qaamuuskuna waxa uu ku macneeyay qofka mar kasta Alle u soo laabta. Macnaha aayadda sare waa sidan: *"qofku haddii aanu dambi badane ahayn, towbad keen badanana ma noqonayo."*

Ka digtoonow dambigu in uu kaala weynaado naxariista Ilaahay (swt), sidoo kalena xumaantaadu yaanay kula yaraan marka la barbardhigo ciqaabtiisa. Ku noolow filasho iyo firdhasho dhexdooda. Naxariista Alle filo, ciqaabtiisana ka firdho. Shaydaanku yaanu kugu qalqaallin dambigaaga ayaa badan ee Rabbigaa waxba ha u towbad keenin. Sababta uu Alle (swt) iskugu bixiyay dambidhaaf badane, waxa ay tahay; innaga ayaa mar walba dambaabna, isna waa uu innoo dhaafaa.

***"Maalinka haddii aad sibirixooto kun jeer, kun kale Ilaahay dambidhaaf waydiiso."***

***"QOFKA KU XIDHA QALBIGIISA SABABAHA, ALLE ISAGA IYO SABABAHA AYUU ISKU DAAYAA, BALSE KA QALBIGIISA KU XIDHA ISAGA, SABABAHA AYUU U SAHLAA"***

﴿ذِكْرُ رَحْمَتِ رَبِّكَ عَبْدَهُۥ زَكَرِيَّآ﴾ مريم: 2

*"Kani waa xuska naxariista uu Rabbigaa siiyay addoonkiisa Sakariye"*

Sakariye, dadka agtooda waxa uu ka ahaa nijaar, laakiin Ilaahay (swt) agtiisa waxa uu ka ahaa Nebi uu soo dirsaday. Qofnimadaada iyo qiimahaagu kuma xidhna shaqadaada iyo shahaadadaada, balse waxa ay ku xidhan yihiin hadba heerka aad ka taagan tahay Alle agtiisa. Xadiis ayuu Nebigu (NNKH) ku yidhi: *"Nebi kastaa adhi ayuu soo raacay. Waxa la weydiiyay adigu ma soo raacday? Waxa uu ugu warceliyay: haa, oo reer Qureysheed ayaa aan ugu raaci jiray woxogaa mushqaayad ah"*

***"Haka khashaafin shaqadaada iyo xilka aad hayso, mar haddii aad xalaal quudanaysana, fadlan ku faan naftaada."***

﴿ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُ فِي سَاعَةِ ٱلْعُسْرَةِ﴾ التوبة: 117

*"Kuwii raacay saacaddii adkayd."*

Aayaddan sare waxa ay ku soo degtay saxaabadii ka qayb gashay duullaankii Tabuuk[25] oo ahaa dagaalkii ugu adkaa, uguna fogaa ee uu galay Nebigu (NNKH). Wakhtigu waxa uu ahaa xagaa ay cimiladu aad u kululayd, lama degaankuna waa uu holcayay. Ciidaankii ka qayb galay dagaalkii Tabuuk waxa loo bixiyay ciidankii adkaa maxaa yeelay; Muslimiintu ma ay haysan hanti ay ku diyaariyaan ciidan, Allena waxa uu u bixiyay saacaddii adkayd. Milaygu waa uu soconayaa, maalmuhuna waxa ay isku gedgediyayaan sida dabaysha oo kale. Wanaagga kama soo hadho wax aan ka ahayn raadkiisu, xumaantana kama soo hadho wax aan ka ahayn dambigeedu. Dadkii wanaagsanaa wakhtiyada adag waxa ay isku dardaarmi jireen: ***"waa maalmo tegaya, ballankeenuna waa jannada"***

---

[25] **Duullaankii Tabuuk:** dagaalkani waxa uu dhacay bishii Rajab ee sanadkii 9aad ee hijrada Rasuulka. Wakhtigii uu dhacay dagaalkani aad ayuu u kululaa, midhuhuna isla markaa ayay bislaadeen.

﴿مَنْ عَمِلَ صَٰلِحًا مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُۥ حَيَوٰةً طَيِّبَةً ۖ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ﴾ النحل: 97

*"Qofka sameeya camal suubban ee ah; lab ama dhedig isaga oo Mu'min ah, waxa aannu noolaynaynaa nolol wanaagsan, sidoo kalena waxa aannu ku abaal marinaynaa wixii uu shaqaystay ka ugu wanaagsan"*

Siciid binu Jubayr waxa uu yidhi: *"nolosha wanaagsani waa in aan Alle kuu baahin dadka."* Waa tafsiir tolmoon, laakiin aayaddan macnayaal kale oo badan ayaa ku jira. Nolosha wanaagsani maaha in aanad bukoon, ama baahan, nolosha wanaagsani maaha in aad hesho magac iyo maamuus, laakiin waa in aad ku qanacdo qorshaha Eebbe waayo; qorshihiisa oo aad saluugto waxa laga dhaxlaa baahi, rafaad iyo daal. Marka uu Alle ku siiyay qanaaco aad ku qaabisho qorshayaashiisa, waxa uu kaa dhigay qof ku mahadnaqa galladdiisa, dulna u yeelasha wakhtiyada adag, sidoo kalena nolol wanaagsan ayuu kugu nooleeyay.

﴿لَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلۡإِنسَٰنَ فِيٓ أَحۡسَنِ تَقۡوِيمٖ﴾ التين: 4

*"Dhab ahaantii, dadka waxa aannu u abuurnay qaabka ugu toosnaanta badan"*

Abuurka ugu wanaagsan maaha in aad qurux badan tahay, balse jidhkaaga iyo habka uu u shaqeeyo mucjisooyin ayaa ku duugan. Quruxdu waa sida quudka oo kale, Alle ayaana u qaybiyay addoomihiisa. Luqmaankii xikmadda badnaa waxa uu ahaa addoon u dhashay degaanka Nuwiya, sidoo kale Bilaal binu Rabaax waxa uu ahaa addoon madow, waxbana kama dhimin. Quruxda iyo qaab wacnaantu waxba uma tarayso dambiilayaasha ay naartu cunidoonto, ee qofna haku yasin muuqiisa waayo; adigu isma aad abuurin, dadka haddii aad ixtiraami weydana, xushmee Allaha abuuray. Qofna haku dhalin in uu quudhsado qaabkiisa maxaa yeelay; waxa aad doonaysaa in lagu qoslo oo la qashqasho. ***"Afku wuxuu la xoog yahay, magliga xawda kaa jara e."***

﴿خُلِقَ ٱلۡإِنسَٰنُ مِنۡ عَجَلٖۚ﴾ الأنبياء: 37

*"Dadka waxa lag abuuray degdeg"*

Degdeg baa la innaga abuuray oo dulqaad ma lihin. Xataa inteenna waayeelka ahi, waxa aynu u dhaqannaa sida dhallaanka oo kale marka aynu wax u ballan qaadno ee ay daqiiqad walba inna weydiiyaan. Degdegga ku dabra dulqaadka waayo; waxa jira arrimo aan lagu gaadhin degdegga. Imaamu Dahabi[26] waxa uu ku wariyay kitaabkiisa Siyaru Al-Aclaam Al-Nubala[27] Jacfar binu Cusmaan ayaa yidhi: *"annaga oo la fadhina Yaxye binu Muciin ayuu na soo maray nin degdegayaa, sheekha ayaanu ku yidhi: (Sakariye aabbihiiyow, iiga warran shay aan kugu soo xusuusto.)"*

Sheekhii ugu jawaabay: *"igu soo xusuuso in aad wax i waydiisay oo aan kaa aamusay."* Sheekhu waxa uu doonay in uu ku yidhaahdo: *"aqoonta lama siiyo qof degdegaya."*

---

[26] **Imaamu Dahabi (673-748H):** Muxammad binu Cusmaan binu Axmed waxa uu ahaa imaam, xaafid, qoraa iyo taariikhyahan.
[27] **Siyaru Al-Aclaam Al-Nubala:** waa kitaab lagu ururiyay sooyaalka haldoorii iyo hormuudkii Muslimiinta.

﴿وَمَآ ءَامَنَ مَعَهُۥٓ إِلَّا قَلِيلٞ﴾ هود: 40

*"Dad aad u yar ayaa rumeeyay Nuux"*

Nuux (cs) waa duqa rususha, kun sannadood oo konton la'a ayuu u baaqaay tolkii, mana rumayn wax aan ka ahayn shakshiyo koobani. Innagu waxa aynu mas'uul ka nahay dڷdaalka, balse midhuhu maaha hawl innoo taalla. Jidka aynu maraynno innaga ayaa mas'uul ka ah, balse gaadhistu waa shuqul kale, xadiiskana waxa ku xusan: *"waxa imanaya Nebi aan qofna raacin oo rumayn."*

Maalinka qiyaamaha, Nebi kastaa waxa uu la imanayaa intii raacday ee rumaysay, waxaana jira Nebiyo aan qofna rumayn. Al-Awsaaci waxa uu yidhi: *"Cadaa binu Abii Rabaax*[28] *oo ahaa qofkii ugu aqoonta badnaa dhulka ayaa dhintay, fadhigiisana kama soo qaybgeli jirin sagaal qof wax ka badanI."*

[28]**Cadaa binu Abii Rabaax (27-114H):** waxa uu ahaa faqiih iyo caalim ku takhasusay cilmiga xadiiska.

﴿ٱدۡعُ إِلَىٰ سَبِيلِ رَبِّكَ بِٱلۡحِكۡمَةِ وَٱلۡمَوۡعِظَةِ ٱلۡحَسَنَةِۖ﴾ النحل: 140

*"Jidka Rabbigaa, ugu baaq dadka hab iyo hannaan ay ku dheehan yihiin xikmad iyo waano wanaagsani"*

Si kasta oo aad u saxan tahay, qofka kalana u khaldan yahay, si walba oo aad u hanuunsan tahay, qofka kalana u lunsan yahay, dhaqanka suubban baa wax kasta ka horreeya. Tuug ayaa habeen u soo dhacay guriga Maalik binu Dinaar, nasiib xumo kama helin waxa uu qaato, laakiin Maalik ayaa u dhawaaqay oo ku yidhi: *"kama aad helin shay adduunyada wax kuu tara ee ma u baahan tahay wax aakhiradaada anfaca?"* Tuuggii ayaa yidhi: Haa. Maalik ayaa ku yidhi: *"soo weysayso oo tuko laba rakcadood."* Tuuggii sidii ayuu sameeyay, waxyar ayuu sii fadhiyay, kadibna masjidka ayuu tegay. Maalik oo la waydiiyay ninkani waa kuma ayaa yidhi: *"si uu noo xado ayuu u yimid, balse annagaa xadnay."*

﴿عَرَّفَ بَعْضَهُۥ وَأَعْرَضَ عَنۢ بَعْضٍ﴾ التحريم: 3

*"Warkii badh ayuu ogaysiiyay, inna waa uu qarsaday"*

Wakhtiyada qaar aamuska ayaa hobboon maxaa yeelay; arrimaha qaar aan qiimo lahayn ayaa qiimo ku yeesha hadal haynta iyo buunbuuninta ee ku dhaqan xeerkan: *"arag maqal, afkana dhawr."*

Hoggaamiyihii Muslimiinta ee Al-Mahdi ayuu soo galay nin sita beer kabo ah, waxaanu ku yidhi: *"waa kabihii Nebi Muxammad."* Hoggaamihii inta uu ka qaaday oo dhunkaday, ayuu ninkii siiyay toban kun oo dirham. Markii uu baxay ninkii ayuu yidhi: *"waxa aan ka warqabaa suubbanuhu in aanu arag oo xidhan kabahan, balse haddii aynu ku odhan lahayn: beenaale, dadka ayaa uu ku odhan lahaa: (khaliifka Muslimiinta ayaan u geeyay kabihii Rasuulka oo waa uu diiday"*

﴿إِن تَمْسَسْكُمْ حَسَنَةٌ تَسُؤْهُمْ وَإِن تُصِبْكُمْ سَيِّئَةٌ يَفْرَحُوا بِهَا﴾

**آل عمران: 140**

*"Haddii uu wanaag idin taabto, waa uu dhibayaa, haddii ay xumaani idin taabatana waa ay ku farxayaan"*

Ku wiirsiga jabka dadku waxa uu ka mid yahay dhaqannada aan habboonayn ee munaafiqiinta. Dadka la jeclaada wanaagga, xumaantana u diida. Sarri Al-Saqdi oo ah ninkii ugu aqoonta badnaa wakhtigiisii ayaa yidhi: *"soddon sannadood ayaan Alle cafis ka weydiisanayaa hadalkaygii ahaa (Alxamdulillaahi)"* Waxa lagu yidhi: *"oo maxaa dhacay?"* Waxa uu yidhi: *"Baqdaad waxa ka kacay dab xoogganі, waa aan baxay; si aan u soo fiiriyo tukaankaygii, kadib nin ayaa ila kulmay oo igu yidhi: tukaankaagii waa uu badbaaday, deedna alxamdullillaah ayaan idhi, ilaa maalinkaana waxa aan ka murugaysanahay naftayda oo keliya in aan la doonay wanaag."*

﴿وَمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا مَتَٰعُ ٱلْغُرُورِ﴾ آل عمران: 185

*"Nolosha adduunyo waa dhaldhalaal kado ah"*

Ifku waa dhaldhalaal tegaya, waana xaqiiqadiisa, waxa se fahmi kara qof garaad leh. Adduunyadu qofna lama ah saaxiib oo waa ay tegaysaa, qofka garaadka badanina waa ka ka taga inta aanay yadu ka tegin. Markii uu Cumar binu Khaddaab tegay dhulka Shaam ayuu ku yidhi Abu Cubayda: *"gurigaaga inna gee gurigaaga."* Abu Cubayda ayaa ugu warceliyay: *"maxaad iga ag qaban? Ma waxa aad doonaysaa in aad ka ilmayso xaalkayga?"* Cumar markii uu galay gurigii Abu Cubayda ayuu ku yidhi: *"guriga alaabi kuuma taallo miyaa waxba ma arkee?"* Abu Cubayda ayaa ku yidhi: *"intaa kuu muuqata wax aan ahayn ma haysanno."* Cumar baa ku yidhi: *"cunto ma haysataan miyaa?"* Abu Cubayda ayaa kacay oo weel ka soo saaray jab roodhi ah. Cumar oo ooyay ayaa ku idhi: *"Abu Cubayda, adduunyaa na aafaysay adiga mooyaane."* Wakhtigan Abu Cubayda waxa uu ahaa badhasaabkii Muslimiinta ee dhulka Shaam.

﴿فَدَعَا رَبَّهُۥٓ أَنِّى مَغْلُوبٌ فَٱنتَصِرْ﴾ القمر: 10

*"Nuux, Rabbigii buu baryay isaga oo leh: (waa la iga guulaystay ee ii hiili)"*

Iska jir habaarka kuwa aan lahayn cid aan Alle ahayn. Shaqaalaha baahan ee aad mushaharkiisa cuntay, xaaskaaga taagtadaran ee aad quudhsatay, walaalkaaga aad dhaxalkiisa dhacday iyo deriska aad ku xadgudubtay, waxa maangal ah in aad adigu iska seexato, balse yagu ay kacaan saqda dhexe oo weysaystaan, kuna ducaystay baryadii uu Alle ka aqbalay Nuux, taas oo uu faray Malaa'ígtiisa in ay u soo aaraan addoonkiisa. Jacfar Al-Barmaki ayaa aabbihii oo ay wada xidhnaayeen weydiiyay: *"aabbe amar ku taaglayn iyo hanti urursi kadib, halkan miyaa inna hurranayd?"*

Odaygii ayaa ugu warceliyay: ***"wiilkaygiyow, habaarkii dulmanayaasha ee aynu hilmaamnay ayaa innagu habsaday."***

﴿وَقُولُواْ لِلنَّاسِ حُسۡنٗا﴾ البقرة: 83

*"Dadka ku dhaha hadal wanaagsan"*

Hadalka wanaagsani waa sadaqo maxaa yeelay; waxa uu furaa irridaha, nafta ayuu dhisaa, qalbiyada jabayna waa uu kabaa. *"Midkiinnee ayaa ururin kara xadiisyada saxiixa ah."* Hadalkan waxa yidhi Isxaaq Binu Raahwiya[29] oo fadhiya xalqaddiisii. Bukhaari[30] ayaa guddoomay hadalkan, kadibna innoo soo ururiyay kitaabkiisa saxiixa ah. *"Fartaadu waxa ay u eg tahay ta muxaddisiinta."* Hadalkan Al-Barsi ayaa ku yidhi ardaygiisii Al-Dahabi. Ilaahay (swt) baa jeclaysiiyay cilmiga xadiiska. *"Fiqhiga heerkee ayaa aad ka taagan tahay?"* Weedhan qoraa Muscab Al-Subayri ayaa ku yidhi Shaafici oo suugaanta ku mamanaa. Shaafici waxa uu noqday ninka aynu maanta naqaanno ee uu imaamu Axmed ka yidhi: *"Shaafici, dunida waxa uu u ahaa qorrax, dadkana waxa uu u ahaa caafimaad."*

---

[29] **Isxaaq binu Raahwiya (161-238H):** waxa uu ahaa imaam weyn, muxaddis, faqiih iyo aqoonyahan ka mid ahaa haldoorkii Muslimiinta.
[30] **Imaamu Bukhaari (194-256H):** Muxammad binu Ismaaciil Al-Bukhaari, waxa uu ahaa imaam iyo muxaddis weyn oo calanka u siday culimada ku takhasustay cilmiga xadiiska, sidoo kalena waa qoraha kitaabka ugu saxsan ee lagu soo ururiyay sunnada Nebiga (NNKH).

﴿فَأَثَٰبَهُمُ ٱللَّهُ بِمَا قَالُواْ﴾ و ﴿وَلُعِنُواْ بِمَا قَالُواْ﴾ المائدة: 85 & 46

*"Alle waxa uu ku abaalmariyay hadalkoodii"* Iyo *"Naxariista Alle waxa looga fogeeyay hadalkoodii"*

Waligaa ha dhayalsan weedhaha aad ku hadlayso, erey keliya ayaa kugu hoggaamin kara jannada, halka uu mid kalana ku gelin karo naarta. Rasuulka (SCW) oo carrabkiisa tilmaamaya ayaa ku yidhi Mucaad: *"kan ilaali."*

Mucaad: *"Rasuulkii Ilaahayow, mala noo qabsanayaa waxa aannu ku hadlayno?"* Suubbanaha ayaa ku yidhi: *"Mucaadow, hooyadaa goblantaye, dadka miyaa madax madax loogu gurayaa naarta wax aan ka ahayn wixii ay carrabadoodu u gooyeen."*

﴿قَالَ يَٰبُنَيَّ لَا تَقۡصُصۡ رُءۡيَاكَ عَلَىٰٓ إِخۡوَتِكَ فَيَكِيدُواْ لَكَ كَيۡدًاۖ﴾ يوسف: 5

*"Yacquub waxa uu yidhi: wiilkaygiyow, riyadaada ha uga warramin walaalahaa, waa ay ku shirqoolayaane"*

Wax walba oo uu Alle ku siiyay ha uga wada warramin dadka maxaa yeelay; badhkood baa buka, indhaha qaarna waa ay sumaysan yihiin. Nimcooyinka uu Rabbi ku siiyay ku ilaasho mahadnaq iyo qarin, ama ugu yaraan afka haku wada ballaadhin. Xaasidku waxa uu ku nafisaa ba'aaga, horena walaalihii waa kuwii ku xaasiday walaalkood riyadii, ee dadka ma waxa aad ka filaysaa in ay kuu badbaadinayaan: *shaqadaada, xaaskaaga, hantidaada iyo mansabkaaga?*

﴿يَوۡمَئِذٖ تُحَدِّثُ أَخۡبَارَهَا﴾ الزلزلة: 4

*"Maalinkaa, dhulku waxa uu ka warramidoonaa wararkiisii"*

Sida ay kuugu markhaati kacayso goob kasta oo aad Allaaha ku caabudday si la mid ah, waxa kuugu marag furaysa meel walba oo aad ku caasiday, ee maxaa ka badan markhaatiyada! Meel walba oo aad tagto ku sujuud, magaalo kasta oo aad buuqato sadaqo ku bixi, tuulo walba oo aad siyaaratana masjidkeeda ku khalaawee. Dhulku carro keliya maaha, laakiin waa markhaati ka mid ah markhaatiyada maxkamadda ugu caddaaladda badan.

﴿فَلَمَّا جَآءَ أَمۡرُنَا نَجَّيۡنَا صَٰلِحٗا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مَعَهُۥ بِرَحۡمَةٖ مِّنَّا﴾ هود: 66

*"Markii uu yimid arrinkayagu, Saalix iyo intii raacday waxaannu ku badbaadinnay naxariis ka ahaatay dhankayaga"*

Aad u dhuux weedhan: *"naxariis ka ahaatay dhankayaga."* Cidhiidhi kadib, marka aad hanato guul, xusuuso in ay tahay naxariis Alle. Cudur kadib, marka aad caafimaaddo, dhakhtar iyo dawo waxba kuuma hayaan, ee waa naxariis Alle. Shaqo la'aan dheer kadib, marka aad hesho shaqo, shahaadooyinkaaga iyo kartidaada midna kuma aad helin ee waa naxariis Alle. Quusasho iyo qalbijab kadib, haddii uu kuu dhasho ilme, dawo aad cuntay iyo raganimadaada kuma aad hanan ee waa naxariis Alle. Kuwani waa sababo, dhib iyo dheefna ma laha haddii aan Alle doonin. Badanaa inta qof dhakhtar ku jira ee aan wali bogsan. Badanaa inta qof shahaadooyin sita ee haddana bilaa shaqo ah. Badanaa inta xaasas ah ee aan haddana wali ubad dhalin.

***"Wanaag kasta oo aad haysataa waa naxariis Alle ee u qir wanaagyadiisa."***

﴿وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ مِنَّا فَضْلًا ۖ يَٰجِبَالُ أَوِّبِى مَعَهُۥ وَٱلطَّيْرَ ۖ وَأَلَنَّا لَهُ ٱلْحَدِيدَ﴾

سبا: 10

*"Dhab ahaantii, Daa'uud waxa aannu siinnay nebinimo iyo boqortinimo xaggayaga ka ahaaday, buuraha iyo shimbiraha ayaannu ku nidhi la jiibiya wardiga, sidoo kalena waxa aannu u jilcinnay birta xadiidka"*

Ilaahay la jir, isna waa uu kula jiriye. Ha weydiin: goorma? Sidee? Iyo halkee? Allaha Daa'uud u jilciyay birta xadiidka, kuma cusla adigana in uu kuu jilciyo qalbiyada dadka. Eebbaha ka yeelay buuraha iyo shimbiraha kuwo ku celceliya wardigiisa, kuma cusla in uu kaa dhigo mid ay dadku raalli ka wada yihiin. Adiga cibaadu ayuu ku faray, isna waafajinta ayuu kuu ballan qaaday.

***"U hormari Ilaahay waxa uu jecel yahay, isna waxa uu ku siin waxa aad jeceshahaye."***

﴿وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُۥ وَٱسْتَوَىٰٓ ءَاتَيْنَٰهُ حُكْمًا وَعِلْمًا﴾ القصص: 14

*"Markii uu hanaqaaday ee kaalin galay, ayaannu siinnay murtid iyo aqoon"*

Waxa jira arrimo u baahan in cagta loo dhigo oo ay habboon tahay in aan lagu degdegin waayo; haddii aad hore u qaadato, hore ayaa aad u lumin. Eebbihii Muslimiinta u hiiliyay maalinkii Beder, waa uu awoodayay in uu guusha siiyo maalimihii taagdarrada ee ay ku sugnaayeen Maka, balse guusha iyo gacan sarraynta waxa uu ugu dib-dhigay; si uu ugu horrayn u barbaariyo oo u bisleeyo, isla amrkaana ay u ogaadaan dhambaalka Islaamku in aanu ku koobnay Qureysh, ee uu yahay farriin caalami ah. Islaamku waa dhambaalka keliyaynta ee isaga dartii loo abuuray kownkan. Mudane, haddii aynu jebinno beedka inta aanu dillaacin waa uu dhimanayaa, haddii aynu beerta goyno yada oo aan bislaan medho ka goosan mayno, cuntada haddii aan si wanaagsan loo karinna qofna cuni maayo.

***"Shay kasta wakhti ayuu leeyahay ee ha degdegin."***

﴿إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ﴾ هود: 29

*"Mushqaayaddayda Ilaahay ayaan ku leeyahay"*

Nin Murtiile ah ayaa la weydiiyay: *"ma jiraa wax ka xun dhabcaalnimadu?"* Waxa uu yidhi: *"haa, oo waxa ka sii liita samafalaha ka sheekeeya wanaagiisa."* Wax kasta u bixi dar Ilaahay, adiga oo aan qofna ka sugayn abaal iyo ajartoona. Ha raadin sacabba-tumis iyo mahadnaq. Shaqa walba oo aad u samaysay dadka dartood, yagaa iska leh, mid kasta oo aad u fashay Ilaahay dartiina isagaa iskaa leh. Aad ayay u cabsi badan tahay weedhan Ibnu Qayim: ***"haddii aanad daacad ahayn, ha daalin naftaada."***

﴿وَمَا تَسْقُطُ مِن وَرَقَةٍ إِلَّا يَعْلَمُهَا﴾ الأنعام: 59

*"Caleenta soo dhacda waa uu og yahay"*

Alle (swt) miyaanu ogayn wanaagga ku jira qalbigaaga? Miyaanu ka warqabin jacaylka aad u hayso dadka? Ma oga miyaa ku farxiddaada guusha dadka kale? Alle (swt) ma dareensana miyaa xanuunka aad la wadaagayso walaalahaa? Saaxiibkayow, Alle korkeenna ma fiiriyo, ee halkeenna ayuu daalacdaa, ee fadlan suubbi halka uu fiirinayo boqorku.

***"Jidhka waxa ku jirta waslad, haddii ay hagaagto jidhka oo dhan ayaa hagaagaya, haddii ay xumaatana jidhka oo idil ayaa xumaanay, waana qalbiga"***

﴿يَقُولُ يَٰلَيۡتَنِي قَدَّمۡتُ لِحَيَاتِي﴾ الفجر: 24

*"Insaanku, waxa uu odhanayaa: (hooggayga ee miyaan wax-u-soo hormarsado noloshayda?)"*

Tani waa doonista keliya ee kuwa ku jira qabriyada. Ma ay odhan: "*noloshyadii hore miyaanu wax u hormarsanno*" maxaa yeelay; nolosha dhabta ah wali ma aynu gaadhin oo waxa ay ka bilaabantaa amminta la inna dhigo qabriga, laba mid ayaanu noqon: beer ka mid ah beeraha jannada, ama god ka mid ha kuwa naarta. Camalka suubbani haddii uu yahay yididiilada dadka qabriyada ku jira, adiga ayaa maanta fursaddan haysta ee shaqayso. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Xasan Al-Basri dul-is-taagay qabri, dadkii ku hareeraysnaa ayaanu ku yidhi: "*maanta, maxaa uu jeclaan lahaa maydkani?*" Waxa ay ugu warceliyeen: "*in la soo celiyo; si uu u shaqaysto camal suubban.*" Waxa uu ku yidhi: ***"fursaddan idinka ayaa maanta haysta, ee shaqaysta."***

﴿وَمَا تَدْرِي نَفْسٌ مَّاذَا تَكْسِبُ غَدًا﴾ لقمان: 34

*"Nafina garan mayso waxa ay barri shaqaysan"*

Haka murugoon timaaddada, una noolow raalligelinta Ilaahay oo ha tiiraanyoon waayo; timaaddadu gacantiisa oo keliya ayay ku jirtaa. Quudkaaga qofna kaa qaadan maayo, laakiin cibaadadaada cidna kuu samayn mayso. Ilaahay (swt) ayaa kuu dammaanad qaaday quudkaaga, adigana waxa uu kaa doonay shaqo.

***"Shay uu Alle kuu ballan qaaday, ha kaga mashquulin ka uu ku faray samayntiisa."***

﴿فَأَثَٰبَكُمۡ غَمَّۢا بِغَمّٖ﴾ آل عمران: 153

*"Alle, Waxa uu idinku abaalmariyay culaysyo isa-saaran"*

Alle(swt) waxa uu kugu imtixaamayaa waayid; si aad u ogaato cid aan isaga ahayn in aanay kuu soo hadhayn. Hoojin ayuu kugu jirrabayaa; si aad u garato isaga oo keliyii in uu ammaan ku siin karo, sidoo kalena guuldarro ayuu kugu imitaaxamayaa; si aad u fahanto cid aan isaga ahayn in aanay guul ku siin karin.

***"Badi musiibooyinku maaha aargudasho, balse waa edbin iyo dib-u-sixid lagu samayno wixii hore u qalloocsamay."***

﴿لَا يُكَلِّفُ ٱللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا﴾ البقرة: 286

*"Ilaahay, nafna ma saarayo wax aan taagteeda ahayn"*

Alle (swt) ma saarin midho laan aan qaadi karayn, mas'uuliyad walba oo uu ku saarayna adiga ayaa iska leh. Duullaan walba oo uu kaa doonay, waa waajib ku saaran, sidoo kalena furin kasta oo ku faray ilaalinteedu waa xil ku saaran ee gudo. Culays kasta oo kugu dhacay, waa mid aad xammil karto, musiibooyinka iyo culaysyaduna waa ay ku xoojinayaan ee ha is dhiibin.

﴿فَلَوۡلَآ أَنَّهُۥ كَانَ مِنَ ٱلۡمُسَبِّحِينَ ١٤٣ لَلَبِثَ فِي بَطۡنِهِۦٓ إِلَىٰ يَوۡمِ يُبۡعَثُونَ ١٤٤﴾

سورة الصافات

*"Yuunus, haddii aanu ka mid ahayn kuwa Ilaahay xusa, caloosha Nibiriga ayuu ku jiri lahaa inta laga gaadhayo maalinka isa-soo-saarka"*

Yuunus, Alle ayuu xusay ammintii uu barwaaqaysnaa, isna Alle ayaa xusay wakhtigii uu xaalku ku adkaa, mana jirto cid isaga ka ballan oofin badani. Ilaahay agtiisa ku kaydso camallo suubban waayo; xilliga ay kugu adkaadaan xaaladuhu ayuu ku xusuusan oo kugu badbaadin camalladii aad fashay wakhtigii barwaaqada.

﴿فَصَبْرٌ جَمِيلٌ﴾ يوسف: 18

*"Samir qurxoon"*

Saaxiibkayow, adkayso oo joogtee akhrinta Quraanka, salaadaha ilaali, xanuunkana ku raadi abaal iyo ajar waayo; waa qadar iyo qorshe Alle. Adduunku waa imtixaan dhammaanaya iyo xarun ugu dambaynta laga gudbo. Si dhab ah u aammin maalin maalmaha ka mid ah in aynu wada fadhiisandoonno hadhka geed ka mid ah kuwa jannada innaga oo ka sheekaysanayna dhibkii adduunka.

﴿وَجَزَىٰهُم بِمَا صَبَرُوا۟ جَنَّةً وَحَرِيرًا﴾ الإنسان:14

*"Adkaysigoodii aawadii, waxa lagu abaalmariyay janno iyo xariir"*

Salaadda subax waa ay culus tahay. Xajku waa adayg. Weedha xaqa ah waa halis. Shahwaddu waa ay inna gubaysaa. Hantidu waa qaali. Dhawrsoonaantu halgan baa ay u baahan tahay. Ammaanadu waa ay ka adag tahay khiyaanada, aragga oo la laabaana nafta waa ku dhib.

***"Naftu waa ay xumaan faris badan tahay, jidka jannadu waa kadeed, ka jahannamina waa fudayd."***

﴿مِنۡهَا خَلَقۡنَٰكُمۡ وَفِيهَا نُعِيدُكُمۡ﴾ طه: 55

*"Ciidda xaggeega ayaanu idinka abuurnay, dhexdeedana waa aannu idin ku celinaynaa"*

*Nolol buuxda: aqoon, shaqo, xaas, ubad iyo hanti urursi, kadib maxaa xiga?* Ciidda ayay innagu rogayaan, sidaas ayay innagaga tegayaan, halkaasna waxa ka bilaabmaya socdaal uu gunaanadkiisu yahay janno ama naar. Adduunyadu waa gaadiid aynu u raacayno aakhiro, ee xulo gaadiidkaaga.

﴿وَلَقَدْ نَعْلَمُ أَنَّكَ يَضِيقُ صَدْرُكَ بِمَا يَقُولُونَ﴾ الحجر: 97

*"Dhab ahaantii, waxa aannu og nahay, laabtaadu in ay dhibsanayso hadalkooga."*

Weedha xumi waa ay dhibaysay, laabtiisuna cidhiidhi ayay dareemaysay isaga oo Nebi ah, ee maxa aad u malaynaysaa qofka ka hooseeyana? Nabadgelyo korkooga ha ahaato kuwa hadalkood u xusha sida huga oo kale waayo; waxa ay og yihiin in uu yahay qurux.

﴿فَأَمَّا مَنۡ أَعۡطَىٰ وَٱتَّقَىٰ﴾ ﴿فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلۡيُسۡرَىٰ﴾ الليل: 5-7

*"Qofkii wax bixiya ee Allena ka baqda, waxa aannu u sahlidoonnaa ta fudaydka badan (jidadka khayrka)"*

***Sababtu waa:*** *"qofka waxa bixiya, Allena ka baqda"*, **warcelintuna waa:** *"waxa aannu u sahlidoonnaa ta ugu fudaydka badan."* Marka aad dareento cidhiidhi, hantidaada iyo qalbigaaga ka bixi sadaqo oo quudi qof baahan, mid lunsan hag, mid kufay kici, mid daymaysanna ka gud deynta sababta oo ah; wax bixintu hanti oo keliya kuma koobna. Kabidda, aamusiinta iyo niyad-dhisku waa sadaqo. Waxa ugu badan ee soo jiida murugada iyo tiiraanyadu waa xumaanta, sidoo kalena ladnaanta iyo raaxada waxa keena cibaadada. Amminta aad dareento cidhiidhi ee qalbigaagu mashquulo, fadlan dib ugu noqo cibaadadaada.

﴿فَأَسَرَّهَا يُوسُفُ فِي نَفْسِهِۦ وَلَمْ يُبْدِهَا لَهُمْ﴾ يوسف: 77

*"Yuusuf, uurkiisa ayuu ku qarsaday oo waxba uma muujin yaga"*

Waa sax oo canaantu qalbiyada ayay cugtaa, nabarrada waa ay nadiifisaa, dhaawaca inta aan la dhayinna waxa qurux badan in la nadiifiyo, balse mar kasta ma habboona canaantu. Wakhtiyada qaar, waa in aad dhegoolayso oo aad muujiso in aanad waxba la socon. Adiga oo wax walba arkaya, haddana is dhaafi haba aad ku khasaartide. Gobtu waxa ay og tahay hanashada qalbiyadu in ay ka horrayso ka faa'iidaysiga fursadaha, Yuusufna dareenkiisa ma qariyeen haddii aanu ka mid ahayn gobta. Imaamu Axmed waxa uu odhan jiray: *"%10 caafimaadku waxa uu ku jiraa ka dhicista"* Shaafici waxa uu yidhi: *"geesiga garaadka lihi, waa qofka maskaxda badan ee arrimaha ismoogaysiiya"* Aksam Binu Safiyi waxa laga hayaa: *"qofka qallafsani waa uu kala geeyaa dadka, ka dabacsanina waa uu isku soo ururiyaa, liibaantuna waxa ay ku jirtaa is-dhega-marinta."* Ibnu Qayim baa isna yidhi: *"gobonimada waxa ka mid ah; iska-dhaafka dhacdhaca dadka"*

﴿فَلَا يَحْزُنكَ قَوْلُهُمْ﴾ ياسين: 76

*"Yaanu ku murug gelin hadalkoogu"*

Wax aanad ahayn ayay kugu sheegi, ee dheg jalaq ha u siin waayo; dadkii kaa horreeyay, kaana wanaagga badnaa ayay eedayn jireen. Muxammad waxa lagu sheegay sixiroole, nin waalan iyo beenaale. Yuusuf waxa lagu tuhmay xatooyo, Maryantii dhawrsoonaydna waxa lagu shaambadeeyay gogoldhaaf. Xaqiiqadan aammin: *"si kasta oo aad u qumman tahay, ka badbaadi maysid carrabka dadka."* Kitaabka Xilayatu AL-awliyaa waxa ku xusan sheekadan: Muuse ayaa Ilaahay ku yidhi: *"Rabbiyow, waxa aan ku weydiistay in aan qofna xumaan iga sheegin"* Alle ayaa ugu warceliyay: *"Muusow, arrinkaa naftaydaba uma yeelin, ee ma adigaan kuu yeeli? Dadku waxa ay yidhaahdeen: Alle oori iyo ubad ayuu samaystay ee ma adigaa ka badbaadaya?!"*

﴿قُلْ هُوَ مِنْ عِندِ أَنفُسِكُمْ﴾ عمران: 165

*"Dhibka idin gaadhay nafihiina ayuu ka ahaaday"*

Marka ay kugu habsadaan murugoooyin iyo guuldarrooyin, naftaada uun xisaabi. Waxa dhab ah in uu Ilaahay kuu imtixaamayo; si uu kuugu suubbiyo arrin aan imtixaan la'aantii hagaagayn. Taariikhyahannadu waxa ay soo wariyaan: roob la'aan baa dhacday wakhtigii Saleebaan, deedna dadkii ayuu soo saaray; si ay u tukadaan roob doon. Waxa uu arkay qudhaanjo gacmaha kor u taagaysa oo leh: *"Allahayow, waxa aad ogtahay balaayo in aanay soo degin dambi la'aantii, sidoo kalena aan la qaadin towbad la'aanteed, annagu waxa aannu ka mid nahay noolayaashadaa iyo addoomahaaga, ee ha nagu baabi'in dambiyada ilma Aadan"* Saleebaan ayaa dadkii ku yidhi: *"iska laabta, waxa la idiin aqbalay baryada qudhaanjadan e."*

﴿رَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَا فِي نُفُوسِكُمْ﴾ الإسراء: 25

*"Rabbigiin baa u aqoon badan waxa ku dhex sugan nafihiinna"*

Marka ay kugu sheegaan wax aanad ahayn, xumaan kaa malaystaan, been kugu tuhmaan, ama ay ku xantaan, waxba kaa qaadi maayaan maxaa yeelay; Ilaahay oo keliya ayaa og waxa ku jira uurkaaga. Xilliga ay kuu miisaan kilooyo ammaan ah, kugu tiriyaan dadka wanaagsan, ama ay kuu xidhaan huga kuwa Alle ka baqda, waxba kugu kordhin maayaan waayo; Ilaahay ayaa ka warqaba waxa ku jira qalbigaaga. Xusuusnaada, Alle ma fiiriyo foolasha, ee waxa uu daalacdaa qalbiyada.

***"Fadlan, waxa aad hagaajisaa halka uu Alle daalacanayo, kadibna hawshaada qabso."***

﴿قَالَ إِنَّمَآ أَشۡكُواْ بَثِّي وَحُزۡنِيٓ إِلَى ٱللَّهِ﴾ يوسف: 86

*"Waxa uu yidhi: murugada iyo tiiraanyada i haya, Alle ayaan uga ashtakoonayaa"*

U ashtakoodka dadka waxa laga dhaxlaa dhibrin, halka u ashtakood Eebbena laga helo naxariis. Qofka baahani uma ashtakoodo isaga oo kale waayo; dadku waa ay wada baahan yihiin, ka caydha ahina uma cawdo filkii maxaa yeelay; laba qaawani isma qaataan. Qofka tamarta darani waxa uu magan galaa qofka uu is leeyahay wax buu kugu dhaamaa, balse Alle ayaa ka awood badan. Qofka baahani waxa uu hoos galaa ka hantida haysta, laakiin Ilaahay ayaa ka hodansan. U bandhigo Ilaahay taagdarradaada, isaga u ilmee, u ashtakoo, isku dhuldhig, waxna waydiiso. Dadka waxba ha waydiisan, baahidaadana ha u bandhigan.

***"Qof kula mid ah in aad gacmaha hoos hoorsataa waa dhaawac, in aad tala saarataana waa laangadhanimo kale."***

﴿فَٱذۡكُرُونِيٓ أَذۡكُرۡكُمۡ﴾ البقرة: 152

*"I xusa, aan idin xusee"*

Kala garan maysid midka aad ku farxayso sababta, mise natiijada? Sababtu waa: *"i xusa"*, midhuhuna waa: *"aan idin xusee."*

Alle laguma caasiyo ka rayn, lagumana caabudo ka baqasho. Waxa ugu quruxda badan ee ku jira cibaadadu waa in aad ogaato in uu Rabbi ku maamuusay, qalbigaaga fiiriyay oo ku jeclaaday, kadibna kugu hagay xuskiisa. Maxaa ka qaalisan oo ka qiimo badan! Mar kale, ku raaxayso midhaha: *"aan idin xusee."* Dhuux humaaggan, carrabkaaga iyo xubnaha lafahaaga ayaa aad xumaanta kaga hufaysaa, boqorka boqorrada iyo ka iska leh cirarka iyo dhulkuna waa uu ku xusayaa. Haddii lagu odhan lahaa: *"madaxweyne, ama boqor ayaa ku hadal hayay, farxad darteed ayaa aad duuli lahayd, ama ma aad seexateen ee ka warran ka ku xusayaa marka uu yahay Allaha wax walba haya!"*

﴿وَلَا تَا۟يْـَٔسُوا۟ مِن رَّوْحِ ٱللَّهِ ۖ إِنَّهُۥ لَا يَا۟يْـَٔسُ مِن رَّوْحِ ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلْكَـٰفِرُونَ﴾ يوسف: 87

*"Haka quusanina naxariista Alle waayo; naxariistiisa kama qustaan cid aan ahayn gaaladu"*

Waxa la yidhi: *"cibaado waxa ugu wanaagsan filashada gusha, aamminaadda waxyaabaha kugu hareeraysan in ay kuu sheegayaan arrin in uu yahay ka Alle, wixii ka soo hadhayna ay keliya yihiin sababo."*

*"Ha quusanina"*, hadalkan ma odhan Yacquub wakhti barwaaqo ah, balse waxa uu ku tiraabay markii uu waayay labadiisii wiil ee Bani Yaamiin iyo Yuusuf. Maalmo kooban gudohood ayuu Yacquub uriyay dhididkii Yuusuf, waxyar kadibna waa kii laabta geliyay.

***"Xilli kasta ku kalsoonow Ilaahay (swt)"***

﴿لَّا يَضِلُّ رَبِّي وَلَا يَنسَى﴾ طه: 52

*"Rabbigay ma lumo, mana hilmaamo"*

Alle, hilmaami maayo qalbiga aad kabtay, illin aad tirtay iyo murugada aad baabi'isay. Kaa illaawi maayo illinta kaa qubata marka aad si dhab ah u baryayso. Kaa hilmaami maayo xumaanta aad qarsatay adiga oo aargudan kara. Kaa hilmaami maayo in aad faraha ka qaadday dullaan lagu hooban lahaa. Kaa hilmaami maayo adkaysigaaga wakhtiga culuska, sidoo kalena kaa hilmaami maayo mahadnaqa aad la timid wakhtiyada barwaaqada.

***"Hubaal, waa aad arkidoontaa waxa uu ku siiyo Alle."***

*"DADKU HADDII AY KU SHEELAAN, HA QUUSAN WAAYO; SHARAF WAXA KUUGU FILAN IN UU ILAAHAY OG YAHAY CIDD AAD TAHAY"*

﴿قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ﴾ الملك: 23

*"In aad u yar ayaad mahadnaqaysaan"*

Ilaahay ayaa innoo nimceeyay ilaa aynu u malaynay in aynu xaq u leenahay oo mahadnaqiisiina hilmaamnay. Waxa aynu doonno ayaynu soo iibsannaa, kadib waxa aynu hilmaamnaa cidda hantida inna siisay. Waa aynu guurnaa oo haddana galab carrownaa, haddana waxa aynu illownaa cidda ina siisay caafimaadka. Xarumaha caafimaadka ayaynu marnaa, kadibna waxa aynu illownaa Allaha inna bogsiiyay. Xabsiyada ayaynu og marnaa, haddana ma xusno Allaha inna siiyay xoriyadda. Geerida iyo guryaha dumay ayaynu ka daawannaa telefishannada, kadibna waxa aynu illownaa Rabbiga inna siiyay amniga. Xanuunka ugu halista badan ee ku dhaca insaanku, waa la qabsiga nimcada iyo in aanu u arag deeq Alle. Guriga aad gashaa waa nimco ee fiiri darbi jiifka. Xaaskaagu waa nimco ee fiiri iskaabullada. ilmahaaga kugu soo orda marka aad guriga gasho waa gallad ee fiiri madhalayska. Alle ayaa inna siiya nimcooyin badan, balse waxa aynu ka gaabinnay mahadnaqiisa. Ku celceliya mar kasta: ***"Allahayow, mahadsanid waayo; mahadnaqu waa dabarka nimcada"***

﴿إِنَّ ٱلۡحَسَنَٰتِ يُذۡهِبۡنَ ٱلسَّيِّـَٔاتِۚ﴾ هود: 114

*"Wanaagyadu xumaanaha ayay baabi'iyaan"*

Isle'egtu waa ay fududdahay: haddii aanad joojin karayn xumaan, fadlan ku go'doomi wanaagyo. Haddii aad fiiriso xaaraan, weysayso oo tuko. Haddii aad cid xamato, sadaqo bixi. Haddii uu Shaydaanku kaa guulaystay mar keliya, waxa jira kumanaan cibaado oo aad kaga guulaysan karto. Taaha kuwa towbad keenaya ayuu Alle ka jecel yahay ducada kuwa addeecaya. Qofka Alle adeecaya waxa suuraggal ah in uu ka quustay Shaydaanku, bale dambiiluhu waxa uu ku jiraa dagaal, xumaanta ayaa dhaawac soo gaadhsiinaysa, kadibna wanaag ayuu ku kaabayaa. Waa uu dambaabaya oo haddana soo laabanayaa.

***"Inta aad dambaabayso adiga oo ka xun, Allena u soo laabanayso adiga oo ka xishoonaya, niyadda khayr u sheeg, wanaag baa aad ku sugan tahaye."***

﴿فَسَقَىٰ لَهُمَا ثُمَّ تَوَلَّىٰٓ إِلَى ٱلظِّلِّ﴾ القصص: 24

*"Labadii hablood ayuu u waraabiyay adhigii, kadibna waa uu hadhgalay"*

Wanaagga aad samayso haku raadin abaal, shaqada aad qabatana haku doonin ammaan ee u noolow hor Ilaahay iyo habeen aakhiro. Kaalmee ka baahan, ka gargaar u baahan garab sii, barbar istaag ka liita, ka taagta daran u hiili, samafalkuna hakuu noqdo summad. Amminta aad wax bixiso, ha sii daymoon; si aanad u niyadjabin qofka baahan. Maxaa ka wanaagsan Muuse xilligii uu samaha sameeyay ee bannaankaa ka baxay, kadibna Alle ku maamuusay wax ka qiimo badan mahadsanid.

***"Xusuusnow xilli kasta in aad la dhaqmayso Ilaah deeqsi ah."***

﴿قَالَ لَا تَثْرِيبَ عَلَيْكُمُ ٱلْيَوْمَ يَغْفِرُ ٱللَّهُ لَكُمْ﴾ يوسف: 92

*"Yuusuf waxa uu yidhi: maanta, korkiinna ma ahaan canaani ee Ilaahay ha idiin dambidhaafo"*

Dilkiisa ayay qorsheeyeen oo waxa ay go'aamiyeen in ay ku falaan laba kala daran, deedna ceel guntii ayay ku rideen. Sida addoomaha loogu kala gato suuqa, si la mid ayaa loo kala iibsaday. Laakiin markii ay u yimaaddeen yaga oo u cudurdaaranaya ayuu xooray xusuusihii hore, sidanna waxa samayn kara gobta oo keliya. Mascuud AL-Hamadaani oo ahaa nin cafis badan, ayaa marka uu u yimaaddo qof u cudurdaaranaya ku odhan jiray: "*wax tegay tiigsimaad ma leh*" Ammintii uu dhintay baa lagu riyooday oo la weydiiyay: maxaa uu Alle kugu falay? Waxa uu yidhi: "*hortiisa ayuu i istaajiyay, kadibna waxa uu igu yidhi: Mascuudow, wax tegay tiigsimaad ma laha, Malaa'ig yahay geeya jannada*"

﴿وَلَا تَنسَوُا۟ ٱلْفَضْلَ بَيْنَكُمْ﴾ البقرة: 237

*"Ha hilmaamina wanaagga dhexdiinaya yaalla"*

Waligay kula doodi maayo, qof aan jeclaadayna gacan u qaadi maayo. Si xun ula dhaqmi maayo, wanaagga na dhex yaallana ma ilduufayo. Balse marka ay arrimuhu adkaadaan, kalsoonidii iyo wanaaggiina dhintaan, inta aan weysaysto ayaa tukan laba rakcadood, kadibna waxa aan odhan: *"Allahayow, qalbiyadayada sug, mid kastana sii beddel khayr qaba"* Intaa kadib, waan salaamanaqsan, gadaalna soo fiirin maayo.

﴿قَالَ أَخَرَقْتَهَا لِتُغْرِقَ أَهْلَهَا لَقَدْ جِئْتَ شَيْـًٔا إِمْرًا﴾ الكهف: 71

*"Waxa uu yidhi: doonta ma waxa aad u dillaacisay; si ay ula degto dadka saaran, dhab ahaantii waxa aad la timid arrin weyn"*

Khadir oo keliyii ma ahayn geesiga ku jira sheekadan, laakiin Muusena geesi kale ayuu ahaa. Ammintii uu khadir ka diiday dillaacinta doonta, arrinkani waxa uu u muuqday gardarro. Xilligii uu ka dhiidhiyay dilkii wiilka, falkani gaboodfal ayuu u muuqday. Wakhtigan, Muuse waxa uu noqday qof leh mabda' sare oo aan afka ka haysan waxa uu u arko gef iyo gardarro, khadirna uma aabayayeelin, in kasta oo uu uga yimid meel dheer; si uu wax uga barto.

﴿قَالَ كَلَّآ إِنَّ مَعِيَ رَبِّي سَيَهۡدِينِ﴾ الشعراء: 62

*"Waxa uu yidhi: maya, Rabbigay ayaa ila jira oo i hagidoona"*

Eebbow, waxa aan kaa tuugayaa kalsooni la mid ah tii Muuse. Markii uu arkay baddii oo ah hortiisa, Fircoon oo gadaashiisa taagan iyo tolkii oo ku leh: Muusoow la inna qabay; si kalsooni ku dheehan tahay ayuu ugu warceliyay: *"maya, Rabbigay ayaa ila jira oo i hagidoona."*

Mar kale, Allahayow waxa aan ku weydiistay kalsoonidii NEbi Muxammad markii uu Abu Bakar ku yidhi: *"midkood haddii uu fiiriyo lugihiisa waa uu inna arkayaa"*, kadibna uu ugu warceliyay: *"Abu Bakarow, maxaa aad u malayn laba uu Alle seddex ku yahay"*

﴿وَأَصْبَحَ فُؤَادُ أُمِّ مُوسَىٰ فَارِغًا إِن كَادَتْ لَتُبْدِي بِهِۦ لَوْلَآ أَن رَّبَطْنَا عَلَىٰ قَلْبِهَا﴾

القصص: 10

*"Qalbiga Muuse hooyadii waxa uu noqday mid ka madhan wax aan ahayn wiilkeeda, sidoo kale waxa ay ku sigtay in ay muujiso in uu yahay ilmeheedii haddii aannaan sugin qalbigeeda."*

Eebbow, waxa aan kaa baryayaa kalsoonidii aad ugu deeqday Muuse hooyadii markii ay wiilkeeda ku tuuraysay badweynta.

﴿قَالَ قَدْ أُوتِيتَ سُؤْلَكَ يَٰمُوسَىٰ﴾ طه: 36

*"Muusow, dhab aantii waa lagu siiyay weydiintaadii"*

Eebbow, noo rumee reyooyinkayaga, noogana war hay sidii aad uga war haysay Muuse ammintii uu ka qarsoomay indhaha dadka, balse adigu aad ogayd.

﴿ تَوَفَّنِي مُسْلِمًا وَأَلْحِقْنِي بِالصَّالِحِينَ ﴾ يوسف: 101

*"Allahayow, i dil aniga oo Muslin ah, ina haleeshii kuwa wanaagsan"*

Eebbow, guuldarraannu kaa magan galnay. Allahayow, waxa aan kaa tuugaynaa in aannaan cid dhibin oo dhaawicin, sidoo kalena aannaan cid yasin. Eebbow, arrimaha noo sahal oo aannaan cid u horseedin guuldarro iyo hoogtoona.

﴿يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ إِلَى ٱلْأَرْضِ﴾ السجدة: 5

*"Ilaahay isaga ayaa maamulka cirka iyo dhulka"*

Halkan ayuu qalbigu ku xasilaa oo is dhiibaa. Sida uu Ilaahay arrimaha u maamulo oo kale yaa u maamuli kara?

﴿فَأَرَادَ رَبُّكَ أَن يَبۡلُغَآ أَشُدَّهُمَا وَيَسۡتَخۡرِجَا كَنزَهُمَا﴾ الكهف: 82

*"Rabbigaa waxa uu doonay in ay kaalin galaan, kadibna la soo baxaan kaydadkooga"*

Siinta uu Alle kaa hakiyay xikmad ayuu ka leeyaha, ta uu kuu diidayna waa naxariistiisa. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa aad ogaandoontaa in uu Alle kula doonay wanaag iyo badhaadhe.

﴿إِنِّيٓ أَخَافُ ٱللَّهَ﴾ المائدة: 28

*"Anigu Ilaahay ayaan ka baqanayaa"*

Cudurdaarkii ugu qurxoonaa sooyaalka insaanku, waa hadalkii uu Haabiil ku yidhi walaalkii Qaabiil: *"haka yeelin in ay kugu dirqiyaan ka tanaasulka diintaada, wax kasta haddii ay kugu qaadanayso"*. Haa, qofku waa uu noolaan karaa diin la'aan, balse ma iswaydiisay sidee ayuu u noolaanayaa? Waxa uu uu noolaanayaa sida mayeedhaanka oo kale. Adiga Alle ayaa ku maamuusay. Insaanku waxa uu raadiyaa raaxada ugu qaalisan iyo nolosha ugu dheer, balse ugu dambaynta wad baa ay is hurran yihiin.

﴿يَٰٓأَبَتِ ٱسۡتَـٔۡجِرۡهُۖ إِنَّ خَيۡرَ مَنِ ٱسۡتَـٔۡجَرۡتَ ٱلۡقَوِيُّ ٱلۡأَمِينُ﴾ القصص: 26

*"Aabbe, ninkan shaqaalaysii waayo; qof hawl loo dirto waxa ugu wanaagsan ka isku darsaday awood iyo ammaano"*

## Tiirarka Xumaanta

1- **Isa-sarraysiin:** Ibliis waxa uu yidhi: ***"aniga ayaa ka wanaagsan Aadan"***

2- **Isla-weyni:** reer Caad ayaa ku tiraabay: ***"yaa naga awood badan"***

3- **Amar ku taaglayn:** Fircoon ayaa yidhi: ***"talaba waa tayda uun"***

4- **Ismahadin:** Qaaruun ayaa yidhi: ***"nimcadan waxa la igu siiyay aqoon tay ah"***

﴿أَلَآ إِنَّ أَوۡلِيَآءَ ٱللَّهِ لَا خَوۡفٌ عَلَيۡهِمۡ وَلَا هُمۡ يَحۡزَنُونَ﴾ يونس: 62

*"Awliyada Alle, cabsi iyo murugotoona korkooga ma ahaan"*

Safarkii iskama iman, kii u sahaminayayna iskii uma tuurin waadaanta ee isaga (Ilaahay) ayaa u dooray. Boqorkii Masar ma iibsadeen ee isaga ayaa doonay, arrinkuna waxa uu ku dhan yahay aayadda sare.

﴿فَلَمَّا جَآءَهُۥ وَقَصَّ عَلَيۡهِ ٱلۡقَصَصَ قَالَ لَا تَخَفۡۖ﴾ القصص: 25

*"Muuse markii uu u yimid Shucayb, sheekadiisiina uga warramay ayuu ku yidhi: ha baqan"*

**"Waxa ugu wanaagsan ee aad qof siisaa waa niyaddhis."**

## Suuradda Al-Kahfi

Tani waa suuradda Al-Kahfi: doontii haddii aan la daloolin, waa la dhici lahaa, Eebbena wax yar ayuu kugu imtixaamaa; si uu kaaga badbaadiyo musiibo weyn. Wiilkii yaraa haddii aan la dilin, waalidkii ayaa uu halaagi lahaa, Eebbena shay u kaa qaaday ayaa siismo kale ah. Gidaarkii haddii aan la toosin, hantidii agoonta ayaa dayacmi lahayd. Eebbow, yaa kaa ballan oofin badan! Sidaa darteed, dhib walba waxa dhinac socota dheef ee ku celceli: *"Eebbow, nagu sin arrimaha aannan ogaan karin"*

﴿يُرِيدُونَ لِيُطْفِـُٔوا۟ نُورَ ٱللَّهِ بِأَفْوَٰهِهِمْ وَٱللَّهُ مُتِمُّ نُورِهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ﴾ الصف: 9

*"Waxa ay doonayaan iftiinka Alle in ay ku damiyaan afafkooda, Allena waa uu dhammaystirayaa iftiinkiisa, haba kahdaan gaaladuye"*

Quraanku qarsoomi maayo, xijaabka la xoori maayo, adaanka la aamusiin maayo, jihaadkuna joogsan maayo ee waa uu soconayaa. Safarka Islaamku waa uu soconayaa, qofkii raacaa dantiisa ayuu gaadhayaa, ka ka hadhaana waa uu dib-dhacay.

*"Arrinkani (Islaamku), waxa uu gaadhayaa halka ay gaadhaan habeenka iyo maalinku."*

Yuusuf kuwii dad ugu dhawaa ayaa yidhi: *"dila"*, kii ugu dheeraana waxa uu yidhi: *"hoygiisa maamuus."*

***"Jacaylku waa quud, adiguna kama warqabtid qalbiga lagugu arsaaqay."***

﴿أَحَطتُ بِمَا لَمۡ تُحِطۡ بِهِۦ وَجِئۡتُكَ مِن سَبَإِۭ بِنَبَإٖ يَقِينٍ﴾ النمل: 22

*"Shay aanad ogayn ayaan soo koobay, reer Sabana waxa aan kaaga sidaa war dhab ah"*

Mar haddii uu Hud-hud ogaaday shay ka qarsoomay Nebi, sheekadan waxa ku duugan cashar muhiim ah oo uu nuxurkiisu yahay; in aynu is-dhul-dhigno. Arrimo badan oo aynaan waxba ka ogayn ayaa inna dhaafa, Abu Nawaasna waa kii lahaa: *"aqoonta ka sheeganaya waxa aad ku tidhaahda: wax baad ogaatay, wax badanna waa ay kaa qarsoon yihiin."*

﴿فَلَمَّا ذَهَبُواْ بِهِۦ وَأَجۡمَعُوٓاْ أَن يَجۡعَلُوهُ فِي غَيَٰبَتِ ٱلۡجُبِّۚ﴾ **يوسف: 15**

*"Milaygii ay la tegeen Yuusuf, iskuna raaceen in ay ku ridaan ceelka guntiisa"*

Wiilkii ceelka guntiisa lagu riday, waadaanta qabsaday ee haddana lagu kala iibsaday shilimmada, ayaa loo diyaarinayay in uu Masar ka noqdo boqor.

***"Maalmaha adag ee ku soo marayaa, waxa ay hordhac u yihiin mustaqbal ifaya ee wanaaji kalsoonida aad ku qabto Ilaahay (swt)."***

﴿فَإِمۡسَاكُۢ بِمَعۡرُوفٍ أَوۡ تَسۡرِيحُۢ بِإِحۡسَٰنٖۗ﴾ البقرة: 229

*"Wada jir wanaagsan, ama kala tag tolmoon"*

Kama xumaado dhammaadka xidhiidhada maxaa yeelay; nolosha ayaa maalin uun dhammaanaysa, balse waxa aan dhibsadaa habka ay ku idlaadaan. Waxa aan jecelahay xidhiidhadayda in aan ku sagootiyo laabgelin, sidii oo aan madaarka ku sii sagootinayo qof igu qaali ah. Ma jecli in aan ku dhammeeyo sidii oo aan dagaal ku jiro.

﴿وَتَوَاصَوۡاْ بِٱلۡحَقِّ وَتَوَاصَوۡاْ بِٱلصَّبۡرِ﴾ العصر: 3

*"Waa kuwa isku dardaarma xaqa iyo adkaysiga"*

Marka aan kula talinayo kuma lihi: *"waa aan kaa wanaag badanahay, balse waxa aan ku leeyahay: wanaag ayaan kula doonayaa oo aan kula jecelahay"*

﴿يَوۡمَ نَحۡشُرُ ٱلۡمُتَّقِينَ إِلَى ٱلرَّحۡمَٰنِ وَفۡدٗا﴾ مريم: 85

*"Maalinka aannu soo ururinayno kuwa Ilaahay ka baqday yaga oo wafti ah"*

Waxba kuma jabna haddii ay kaa tagaan waftiyada u socda boqorradu, balse waxa muhiim ah in aanay kaa tagin kuwa u socda boqorka boqorradu (Ilaahay).

﴿وَأَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰٓ أُمِّ مُوسَىٰٓ أَنۡ أَرۡضِعِيهِۖ فَإِذَا خِفۡتِ عَلَيۡهِ فَأَلۡقِيهِ فِي ٱلۡيَمِّ وَلَا تَخَافِي وَلَا تَحۡزَنِيٓۖ إِنَّا رَآدُّوهُ إِلَيۡكِ وَجَاعِلُوهُ مِنَ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ۝﴾

**القصص: 7**

*"Muuse hooyadii waxa aannu u waxyoonnay: wiilkaaga naaska nuuji, marka aad u baqatana ku tuur badda, ha baqan, hana murugoon, annaga ayaa kuu soo celinayna, sidoo kalena waxa aannu ka dhigaynaa kuwa la soo diray"*

Allahayow, waxa aan ku weydiistay kalsooni la mid ah tii aad ku beertay qalbigii Muuse hooyadii xilligii ay badda ku tuuraysay wiilkeeda waayo; waxa ay ku kalsoonayd in aad u soo celinayso.

*"HEER KASTA OO UU INSAANKU KA GAADHO WANAAGGA, WAXA LAMA HURAAN AH IN UU JIRO MID NECEBI, XATAA NEBIYADA DADKU MA WADA JECLAYN"*

﴿ إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ لَشِرۡذِمَةٞ قَلِيلُونَ ﴾ الشعراء: 54

*"Tani waa koox yar oo fallaagowday"*

Hadalkan sare Fircoon baa ku yidhi Muuse iyo intii wehelinaysay, waana dhaqanka Fircoonnada meel kasta oo ay ku sugan yihiin waayo; waxa ay ku kadsoomaan tirada badan ee taageerayaashooda.

﴿وَتِلۡكَ ٱلۡأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا بَيۡنَ ٱلنَّاسِ﴾ عمران: 140

*"Maalmuhu waa meerto dadka dhexdooda"*

Yaa is lahaa Muusihii adhijirka ahaa ayaa noqonaya la hadlaha Ilaahay! Yaa filayay Muxammadkii madaxyaweynta Qureysheed adhiga ugu jiri jiray shilimmada ayaa sannado kadib noqonaya kii lagu soo afmeeray taxanaha nebiyada! Waxa suuraggal ah maalmihii wacnaa in ay kuu soo socdaan, sidaa darteed waxa aad u baahan tahay dedaal kooban iyo kalsooni buuxda oo aad Alle ku qabto. Waa hubaal maalmo wacan in aad is hurran tihiin.

﴿وَأَلۡقَيۡتُ عَلَيۡكَ مَحَبَّةٗ مِّنِّي﴾ طه: 39

*"Muusow, dushaada waxa aan yeelay kalgacayl xaggayga ka ahaaday"*

Nimcooyinka waaweyn ee uu Ilaahay addoonkiisa siiyo waxa ka mid ah; in uu dadka jeclaysiiyo. Ilaahay, Muuse waxa uu ku yidhi: *"dushaada waxa aan ku tuuray kalgacayl xaggayga ka ahaaday."* Ibnu Kasiir[31] ayaa yidhi: *"Muuse, qofkii la kulmaaba waa uu jeclaan jiray."* Ibnu Al-Mukandir ayaa ku yidhi Abii Xaasim: *"dadka ayaa ila kulma oo iigu duceeya wanaag, mana garanayo, wax wanaag ahna uma samayn"* Abu Xaasim ayaa ku yidhi: *"kaasi waa dheeraad Alle."*

***"Eebbaha naxariista badani waxa uu u yeelidoonaa addoomihiisa kalgacal"***

---

[31] **Ibnu Kasiir (701- 774H):** Ismaaciil binu Cumar binu Kasiir, waxa uu ahaa xaafid, mufasir iyo taariikhyahan mar la arag ah oo Muslimiinta uga tegay dhaxal iyo dhigaal cajiib ah oo uu ugu caansan yahay kitaabka tafsiirka ah **"tafsiir Al-Quraan Al-Cadiim"**

﴿أَن لَّآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنتَ سُبۡحَٰنَكَ إِنِّي كُنتُ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ﴾

**الأنبياء: 87**

*"Ilaah xaq lagu caabudo oo aan adiga ahayni ma jiro, Allahayow, adigaa xumaan ka hufan, aniguna waxa aan ka mid ahay dulmifalayaasha"*

Qofka ay ku adkaato noloshu ee uu Alle solonsiiyo baryadii Yuunus ee ahayd: " **لا إله إلا أنت سبحانك إنى كنت من الظالمين**", hilinka guusha ayaa la haleeshiiyay.

﴿قَالَ إِنَّمَآ أَشۡكُواْ بَثِّي وَحُزۡنِيٓ إِلَى ٱللَّهِ﴾ يوسف: 86

*"Waxa uu yidhi: murugada iyo tiiraanyada i haya waxa aan uga ashtakoonayaa Ilaahay"*

Hadalkan sare, Yacquub baa ku baryootamay ammintii uu waayay inankiisii iyo araggiisiiba, kadibna Alle ayaa u soo celiyay labadiiba. Qofka cabanayaa, Ilaahay oo keliya ha u cawdo.

﴿أَنِ ٱصۡنَعِ ٱلۡفُلۡكَ﴾ هود: 27

*"Samee doonta"*

Allahayow, waxa aan kuugu hoggaansamay sidii uu Nuux amarkaaga u qaatay markii aad ku tidhi: *"samee doonta."* Kuma waydiin: maxaa iska galay doon iyo lama degaan?

﴿لَأُعَذِّبَنَّهُۥ عَذَابًا شَدِيدًا﴾ النمل: 21

*"Cadaab daran ayaannu marin"*

Xikmadaha ugu quruda badan ee aan ka akhriyay kutubta tafsiirka ayuu ka mid tahay hadalka uu imaam Qushayri[32] ka yidhi tiraabtii uu Saleebaan ku yidhi Hud-hudkii: *"cadaab daran ayaannu marin."* Cadaabka darani waa in uu kala kexeeyay isaga iyo jacaylkiisii.

***"Qofka oo waaya jacaylkiisu, waxa ay ka dhigtaa sidii oo uu ka neefsanayo daloolka irbadda."***

[32] **Imaamu Qushayri (376-465H):** Cabdikariin binu Hawaasin binu Cabdimalik waxa uu ahaa hoggaamiyihii suufiyada iyo caalim aqoon badan u lahaa fiqhiga, tafsiirka, xadiiska iyo suugaanta.

﴿قَالَ كَلَّآۖ إِنَّ مَعِيَ رَبِّي سَيَهۡدِينِ﴾ الشعراء: 62

*"Waxa uu yidhi: maya, Rabbigay ayaa ila jira oo i hagidoona"*

Maalintii Caashura, Muuse ayaa soo gaadhay badda xeelligeeda. Meel uu u baxaa ma jirin oo hortiisu bad ayay ahayd, gadaal Fircoon baa ka taagnaa, tolkiina waxa ay ku lahaayeen: *"la inna qabay."* Muuse oo ku kalsoon Alle ayaa ku yidhi: *"Rabbigay ayaa ila jira oo i hagidoona."*

***"Allahayow, waxa aan ku weydiistay kalsoonidii Muuse iyo ballan oofintii aad u samaysay oo kale"***

﴿إِنِّيٓ أَخَافُ أَن يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِّنَ ٱلرَّحۡمَٰنِ﴾ مريم: 45

*"Waxa aan ka baqayaa in uu ku taabto cadaab ka ahaaday Allaha Raxmaanka ah"*

Humaagyada jacaylka waxa ugu qurxoon isku boorrinta wanaagga, qofka aan aakhiradaada ka talinna adduunkaaga waxba kama gelin. Marka aad aragto saaxiibkaa oo xumaanta walaaqanaya ka jooji, haddii kale jacaylka aad u haysaa waa uun danaysi iyo duunyo raadis. Ma waxa aad dhawraysaa dareenkiisa oo uga baqan maysid naar? Kuwa aad jeceshahay ku hag jannada, ka wanaag samaynaya ku boorri, ka xumaanta ku dhex jirana xagga Ilaahay u soo celi xataa haddii ay kugu qaadanayso in aad kalladhka soo jeeddo. Cumar binu Cabdicasiis ayaa ku yidhi saaxiibkii: *"marka aad i aragto aniga oo lunsan, kalladhka i soo qabo oo xoog ii soo jiid, deedna i dheh: Cumarow, Eebbahaa ka baqo, waa aad dhimanaysaaye."*

*"U yaaca xagga Ilaahay"*

Carar walba oo lagugu qasbaa waa fulaynimo, balse u cararka xagga Ilaahay waa geesinimo. Oradka aad Alle ugu tagtaa waa guul ee ma aha guuldarro. Waa go'aan qof weyn ee maaha go'aan qof taagdaran. Geesinimadu jaadad badan. Xumaanta oo aad faraha ka qaaddo adiga oo samayn karayaa waa geesinimo. dambi kasta oo aad ka soo laabato adiga oo ka murugaysani waa geesinimo. Bustaha oo aad tuurto; si aad ugu kacdo salaadda subax waa geesinimo kale. *Sidaa darteed, geesinimadu kuma koobna muruqyo waaweyn oo keliya.* Cabdullaahi binu Cabbaas (rc) ayaa fuulay geed, saxaabadii ayaa ku qoslay lugihiisii dhuudhuubnaa, kadibna Nebiga (NNKH) ayaa ku yidhi: *"waxa aan ku dhaartay Allaha ay naftaydu ku jirto gacantiisa e, labadiisa lugood miisaanka ayay kaga culus yihiin buurta Uxud"*

﴿وَلَٰكِن كَرِهَ ٱللَّهُ ٱنۢبِعَاثَهُمۡ﴾ التوبة: 45

*"laakiin, Ilaahay baa kahday bixitaankooda"*

Marka uu Ilaahay kuu adeegsado ka shaqaynta diintiisa, ogow qalbigaaga inta uu fiiriyay, ayaa uu raalli ka noqday. Dadku ma jecla in ay u adeegsadaan shaqadooda agab wasakhaysan ee maxaa aad u malaynaysaa Ilaahayna? Qof kasta oo karkaarka waydaartay, ogow Alle ayaa qalbigiisa daalacday, kadibna nacay. Haku xaasidin dadka caanka ahi arrimaha ay faraha kula jiraan maxaa yeelay; haddii uu Alle jecel yahay waxa uu u adeegsan lahaa diintiisa iyo daacaddiisa. Kuwa hantiilayaasha ah ee haddana qabanay shaqooyinka, ha ku xaasidin waayo; haddii uu Rabbi jeclaan lahaa kama uu maarmeen.

﴿فَلَا تَغُرَّنَّكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا﴾ لقمان: 34

*"Yaanay idin hodin noloshan liidataa"*

Adduunyadu si kasta oo ay kuugu muuqato mid dheer waa ay gaaban tahay. Nuux ayaa la weydiiyay: maxaad u dhisatay gurigan aale-sonkor ah? Waxa uu yidhi: *"lagu waari maayo."* Nuux oo noolaa in ka badan kun sannadood, ayaa u arkayay adduunyadan mid gaaban. Muxammad (SCW) waxa uu yidhi: *"maxaa iska kaaya galay aniga iyo adduunyo, waxa aannu isku nahay sida qof socoto ah oo geed hadhsaday, kadibna ka dhaqaajiyay."* Adduunyadu waa ay yar tahay, haba kula waynaato e. Alle agtiisa haddii ay ka leekaan lahayd garab kaneeco, Gaal kama kabbadeen kabbasho biyo ah. Si walba oo aad u filayso in ay sii jirayso, waa ay tegaysaa. Hoggaamiyihii Muslimiinta ee Mansuur baa ku yidhi Rabiic: *"Geeri la'aanteed, nolosha maxaa ka macaanaan lahaa!"* Rabiic ayaa ugu jawaabay *"adduunku qiimo ma laha dhimasho la'aanteed"* Mansuur ayaa ku yidhi: "sidee?" Rabiic ayaa ugu jawaabay: *"haddii aan la dhimanayn, madaxwayne ma aad noqoteen"*

﴿فَوَيۡلٞ لِّلۡقَٰسِيَةِ قُلُوبُهُم مِّن ذِكۡرِ ٱللَّهِۚ﴾ الزمر: 22

*"Hoog ayaa u sugnaaday kuwa ay qalbiyadoodu ka qallaleen xuska Ilaahay"*

Waxa aad arkaysaa qof isla-weyn, samaynaya xumaan, awooddiisana la dhacsan oo haddana isweydiinaya: *"Ilaahay maxaa uu ii ciqaabi waayay?"* Jaahilyohow, cuqubadee baa ka daran xaaladda aad ku dhex sugan tahay maanta! Meyd baa lagula soo maraa, waxba kuma qaadatid. Aayad ka hadlaysa dhimashada ayaa aad maqashaa, kumana waano qaadatid. miskiin baa aad aragtaa, uma diir naxdid, walina waxa aad la soo taagan tahay: *"maxaa la ii ciqaabi la'yahay?"* Waa maxay ciqaabta ka xun in qalbiga qofku noqdo qabri? Ibnu Qayim waxa uu yidhi: *"addoonka lama mariyo ciqaab ka daran, qalbi qallaylka"*

﴿وَكَأَيِّن مِّن دَآبَّةٍ لَّا تَحْمِلُ رِزْقَهَا ٱللَّهُ يَرْزُقُهَا وَإِيَّاكُمْ﴾ العنكبوت: 52

*"Badanaa daabbad aan qaadan karayn quudkeeda, yada iyo idinkaba Ilaahay ayaa quudinaya."*

U fiirso xayawaannada kugu hareeraysan: *shimbiraha, kalluunnada, raha, masaska, bakteriyada iyo guud ahaan xayawaannada.* Ma xidhna hu' leh jeebab, ma laha bangiyo ay hanti ku kaydsadaan, ma haystaan caymis caafimaad, mushahar bille ahna ma qaataan, laakiin arooraha hore ayay kallahaan yaga oo ku kalsoon quudka Alle, lamana soo helayo gaajo u dhintay macaluul. Arrimahaaga u dhiibo Ilaahay. Taariikhyahannadu ayaa soo wariyay: *"Saleebaan baa qudhaanjo weydiiyay: imisa xabbo oo midho ah ayaa aad cuntaa sanadkii?"* Qudhaanjadii: *"laba xabbo."* Saleebaan, qudhaanjadii iyo laba xabbo oo midho ah ayuu ku wada riday sanduuq, sanad kadib ayuu ku soo laabtay, waxaanu la kulmay yada oo cuntay xabbad keliya. Waxa uu weydiiyay sababta ay sidan u samaysay? Waxa ay ku tidhi: *"markii aan xorta ahaa, arrinkaygu Ilaahay ayuu gacanta ugu jiray, oo waxa aan ogsoonahay in aanu i hilmaamayn, laakiin ammintii aan gacantaada galay, waxa aan ka baqay in aad i hilmaamto."*

﴿رَبَّنَا لَا تُزِغْ قُلُوبَنَا بَعْدَ إِذْ هَدَيْتَنَا﴾ آل عمران: 8

*"Allahayow, hanuun kadib, ha leexin qalbiyadayada"*

Maxaa ka qurux badan ducadan! Qofka dhadhamiya macaanka u dhawaanshaha Alle (swt), ma cidloodo ee isaga weydiista in aanu idinka qadin wanaaggan. Badanaa inta qof u dhawaatay Alle, ee haddana dabajeedisyay. Badanaa inta qof Ilaahay ajiibtay, ee haddana ka fogaatay. Kuwaasi waxa ay maleeyeen sugnaashuhu in uu ku jiro gacmohooda, balse Alle ayaa irridihiisa ka leexiyay.

***"Addoonka wanaagsani waxa uu ka baqaa in uu ka tago wanaagiisa in ka badan inta uu ka xumaanta samaynayaa ka baqo xumaantiisa."***

﴿إِنَّ ٱلَّذِينَ يَخۡشَوۡنَ رَبَّهُم بِٱلۡغَيۡبِ لَهُم مَّغۡفِرَةٞ وَأَجۡرٞ كَبِيرٞ﴾ الملك: 12

*"Kuwa Ilaahay kaga baqaya maqnaashuhu, waxa ay leeyihiin dambidhaaf iyo abaalweyn."*

Indhaha insaanka ayay ka qarsoomeen, balse waxa ay og yihiin in uu Ilaahay arkayo. Xumaantii ayay ka tegeen yaga oo karaya. Baahidii nafta ayay garba-duub-u-xidheen yaga oo samayn karaya, xumaantiina faraha ayay ka qaadeen yada oo taalla hortooda. Ka tegista xumaanta laguma qasbin, cunista xaaraantana ugama ay tegin cabsi, balse dar Ilaahay ayay uga dhaqaaqeen. Eegmada Ilaahay ayay isdareensiiyeen, kadib waa ay ka xishoodeen, kanina waa macnaha baqashada maqnaashiyaha.

***"Xumaanta oo la iska daayo yada oo laga baqo ammaan darro, fadeexadda ayay ka mid tahay!"***

﴿قِيلَ لَهَا ٱدۡخُلِي ٱلصَّرۡحَۖ فَلَمَّا رَأَتۡهُ حَسِبَتۡهُ لُجَّةٗ وَكَشَفَتۡ عَن سَاقَيۡهَاۚ﴾

**النمل: 44**

*"Waxa lagu yidhi: gal dhismahan, ammintii ay aragtayna, biyo ayay u malaysay oo waa ay faydfaydatay"*

Balqiis, dhismihii sinnaa ee quraaradda ka samaysnaa ayay u malaysay biyo, kadibna maryaha ayay urursatay; si ay uga gudubto. Ilaa heerkaa ayuu dheeraa hugeegu, sooyaalkii insaankana asturtaantu waxa ay ahayd hogii boqoradaha, halka ay qaawanaanta iyo ismuujintuna ka ahaayeen astaantii dumarka xumaanta ku caanbaxay, kuwaas oo isku muujin jiray; si ay ragga ugu ridaan xumaanta.

***"Fiiri Hugaaga oo isweydii: kooxda Balqiis miyaan ka mid ahay, mise kooxaha kale?"***

﴿وَرَبَطْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ﴾ الكهف: 14

*"Qalbiyadooda ayaannu sugnay"*

Qalbiyadu waa ay leexdaan, suguhuna waa Ilaahay. Heer kasta oo uu gaadho iimaankaagu, weydiiso Alle in uu kuu sugo, ducadii Nebiga (NNKH) ee ugu badnaydan waxa ay ahayd: *"Eebbaha qalbiyada gadgadiyow, qalbigayga ku sug diintaada"*

Isaga oo ah Nebi iyo qofkii ugu wanaagsanaa makhluuqa ayuu sidan u ducaysanayay. Alle (swt) haddii aanu sugayn qalbiyada addoomihiisa, Shaydaanka ayaa ku dheeli lahaa oo qofna ma fuliyeen amarradiisa. Dhalinyartii godku diin xaq ah ayay haysteen, halka ay tolkoodna ka caabudayeen sanamyo. Xilligii uu Ilaahay (swt) sugay qalbiyadooda, ayuu wax kastaa u fududaaday. Muuse hooyadii markii ay ku tuuraysay badda, haddii aan Rabbi sugin qalbigeeda, kuma ay tuurteen.

***"Goor walba waydiiso Alle in uu qalbiga kuu xidho."***

﴿وَوَجَدُواْ مَا عَمِلُواْ حَاضِرٗاۗ وَلَا يَظۡلِمُ رَبُّكَ أَحَدٗا﴾ الكهف: 49

*"Waxa ay heleen camalladoodii oo diyaarsan, Rabbigaana qofna kuma gardarroonayo"*

Noloshaadu waa buug aad Alle hortiisa ku akhridoonto qiyaamaha ee ka digtoonow in aad noqoto qoraa xun. Maanta sii qoro shay aanad barri dhibsan akhrintiisa. Buuggaagu wali kacantaada ayuu ku jiraa, isla markaana waxa aad haysataa iskiisadda dambidhaafka ee ku tirtir xumaanaha kaa dhacaya. Gacantaada waxa ku jira bogag cad, ee ku qoro wanaagyo. Qoro bogag sadaqo ah, kuwo samafal ah, kuwo salaad ah iyo qaar kale oo ah soon sunne ah. Waa sax in aanu qofna camalladiisa suubban ku gelayn janno oo xataa Nebigu naxariista Rabbi ayuu ku gelayaa, balse waxa ay soo jiidaan naxariista Ilaahay (swt).

﴿وَهُزِّيٓ إِلَيۡكِ بِجِذۡعِ ٱلنَّخۡلَةِ﴾ مريم: 25

*"Xaggaaga u soo lul jiridda timirta"*

Alle (swt) waxa uu ogyahay nin xoog weyni in aanu ruxi karayn geed timir ah, ee maxaa aad u malaynaysaa gabadh umul ahna? Alle marka uu leeyahay: "*lul*", waxa uu innaga doonayaa in aynu qaadanno sababaha, sidoo kalena waxa uu inna barayaa mudnaanta ay leedahay shaqadu. Ilaahay (swt) dirxiga iyo xabadda qamandiga ah ayuu u abuuray shimbirta, laakiin buulkeeda uma dhigin ee waa in ay raadsataa. Eebbaha Maryan ku siiyay wiil oday la'aan, waa uu awooday in uu midhaha timirtana siiyo hawl la'aan, balse waxa uu innaga doonayaa in aynu bixinno dedaal iyo tamar. ***"Dhanka kale, waa in aynu u ogaannaa dedaalku in uu yahay sabab aan dhib iyo dheeftoona keenayn."***

﴿يَٰلَيۡتَنِي مِتُّ قَبۡلَ هَٰذَا وَكُنتُ نَسۡيٗا مَّنسِيّٗا﴾ مريم: 23

*"Hooggayga ee miyaan hore iskaga dhinto oo noqdo mid la hilmaamay"*

Insaanka waxa soo mara maalmo sillan oo uu nolosha naco. Waxa uu dareemaa dunida oo dhami in ay ku soo dumayso, iimaan la'aanna kama aha ee waa adayga nolosha. Maryan waxa ay lahayd iimaan buuraha oo kale ah, kalsooni buuxdana Alle ayay ku qabtay, laakiin markan xaaladdu waa ay adag tahay, dhacdadanina waa dhif iyo naadir. Ilme bilaa aabbe ah ayay la dhex tegaysaa duul qalbigu qallalay oo ay adduunyadu cidhiidhi ku noqotay. Wakhtiga ayaa innagu adkaada, waxaana inna soo mara maalmo adag oo aynaan qaadi karayn.

***"Noolow adiga oo taagdaran ama awood leh, laakiin xaalad kasta Ilaahay la jir waa uu kula jiriye."***

﴿فَنَادَىٰهَا مِن تَحْتِهَآ أَلَّا تَحْزَنِى قَدْ جَعَلَ رَبُّكِ تَحْتَكِ سَرِيًّا﴾ مريم: 24

*"Hoosteeda ayuu ka dhawaaqay isaga oo leh: ha murugoon, Rabbigaa hoostaada waxa uu ka yeelay il durdur ahe"*

Haddii uu qof ka maarmayo wakhtiyada adag niyad-dhiska, Maryantii uu iimaankeedu xoogganaa ayaa ka maarmi lahayd. Laakiin ugu dambayn insaan ayaynu nahay oo kama maaranno. Marka aad aragto qof dhibban, u dhis niyadda oo dareenkiisa dhawr; si uu mar kale u soo hinqado. Abu Bakar waxa uu ahaa ninkii dadka ugu fadliga badnaa marka laga tago Nebiyada, laakiin Nebiga ayaa niyadda u dhisay xilligii ay ku jireen godka, waana kii ku lahaa: *"maxaa aad u malayn laba uu Ilaahay seddex ku yahay?! Abu Bakarow, ha murugoon, Eebbaa innala jira e."*

Nebigu (NNKH) xilligii uu waayay xaaskiisii Khadiija iyo adeerkii Abu Daalib oo ahaa labadiisii garab, Alle waxa uu ogaaday xaaladda adag ee uu ku jiro, deedna waa kii dheelmiyay; si uu ugu soo tacsiyadeeyo.

***"Mararka qaar ayay arrimuhu adkaadaan, ilaa aynu quus istaagno."***

﴿إِنِّي جَزَيْتُهُمُ ٱلْيَوْمَ بِمَا صَبَرُوٓا۟ أَنَّهُمْ هُمُ ٱلْفَآئِزُونَ﴾ المؤمنون: 111

*"Anigu, maanta waxa aan ku abaalmarinayaa adkaysigoodii, waanay guulaysteen."*

Dar Alle oo loo samraa waa cibaado. Xumaanta oo laga dhawrsado iyo cibaadooyinka oo lagu mitidaana waa cibaadooyin kale. Xumaanta oo aad joojiso adiga oo samayn kara, araggaaga oo aad laabato adiga oo wax eegi karaya iyo laaluushka oo aad iska diiddo adiga oo qaadan karayaa waa xumaantii oo aad iska moostay, abaalkaagana Ilaahay ayaa aad ka helaysaa. In aad wax bixiso adiga oo hantida jecel, in aad salaadda subax u kacdo adiga hurdo macaan ku jira iyo in aad u samafasho waalidka adiga oo la daalaa-dhacaya duruufaha noloshu, waa cibaadadii oo aad ku mitiday, abaalkaaguna Alle agtiisa waa uu ku weyn yahay

﴿قَالَ رَبِّ ٱغۡفِرۡ لِي وَهَبۡ لِي مُلۡكٗا لَّا يَنۢبَغِي لِأَحَدٖ مِّنۢ بَعۡدِيٓۖ﴾ ص: 34

*"Waxa uu yidhi: Allahayow, ii dambidhaaf oo ii hibee boqortinimo aan u qalmin qof iga dambeeya"*

Saleebaan baryadiisa waxa uu ku ballaysimay towbad iyo dambidhaaf, waana fahanka iyo fiqhiga Nebiyada waayo; shayga ugu badan ee hor-istaaga aqbalaadda baryadu waa dambiga. Waxa suuraggal ah addoonku in uu Rabbigii wax waydiisto, balse aan laga aqbalin maxaa yeelay; waxa uu sameeyay dambi weyn. Haddii ay ducadaadu dib u dhacdo, naftaada gadaal ugu laabo, sidoo kalena baadh dambiyada aad fashay ee hortaagaan ducadaada. Ha aamminin in aan waxba lagu siin waayo; in badan ayaad Alle bariday, isna waxba kuma adka. Kani waa Saleebaan oo Rabbigii weydiistay in uu u sakhiro: *jinka, dabaylaha iyo afka shimbiraha.* Alle, dalabkii Saleebaan waa uu wada aqblay, balse ugu horrayn waxa uu faray towbad keen.

"HANTIDA AAD QAADDO KIBIRKU WAA CAYDH, SHAHAADADA KUGU DHALISA ISLA WEYNIDU WAA AQOON LA'AAN, SIDOO KALENA MANSABKA KUGU ABUURA QABKU WAA HOOBASHO"

﴿قَالُوا۟ سَمِعْنَا فَتًى يَذْكُرُهُمْ يُقَالُ لَهُۥٓ إِبْرَٰهِيمُ﴾ الأنبياء: 60

*"Waxa ay yidhaahdeen: waxa aannu maqalnay wiil hadal haya sanamyada oo lagu magacaabo Ibraahin"*

Ibraahin, agtooda waxa uu ka ahaa wiil yar, balse Ilaahay agtiisa waxa uu ka ahaa qaran dhan. Isaga dartii ayuu u dooriyay xeerarkii kownka. Dab baa lagu tuuray, balse waxa uu uga dhigay qabow iyo badbaado. Xaaskiisii Saara ayaa noqotay da', Alle ayaa u suubiyay oo waa tii u dhashay wiilkiisii Isxaaq. Ammintii uu Fircoon doonay in uu Saara la hadho, Alle ayaa ka fayday daahii u dhexeeyay, arrimaha oo dhanna waa uu la socday; si uu u xasilo.

***"Haka raadin dadka sharaf iyo maamuus, qiimahaaguna waxa uu ku xidhan yahay hadba heerka aad ka taagan tahay Ilaahay agtiisa."***

﴿فَصَبۡرٞ جَمِيلٞۖ وَٱللَّهُ ٱلۡمُسۡتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ﴾ يوسف: 18

*"Samir qurxoon baa ila taag ah, waxa aad ku sheegteenna Ilaahay ayaan u kaashanayaa"*

Nabadgelyo korkooga ha ahaato kuwa aan wax kasta isku daalin kuwa aan ilmayn marka ay kufaan, kuwa aan dhuuxin hadal walba, sidoo kalena dambiyada ay galaan aan ku nabin dadka kale. Nabadgelyo korkooga ha ahaato kuwa og adduunku in uu yahay mindi laba af leh oo ay sharka iyo khayrkuna ka mid yihiin. Nabadgelyo korkooga ha ahaato kuwa aamminsan dunidu in ay tahay biriij laga gudbayo, kalsoonida Eebbena ay tahay waxa ugu mudan ee lagu badbaado.

﴿وَٱللَّهُ أَحَقُّ أَن تَخۡشَىٰهُ﴾ الأحزاب: 38

*"Ilaahay ayaa mudan in laga baqo"*

Cibaadadaa ka horraysa caadada. Xaaraanta ayaa ka horraysa ceebta. Sharciga ayaa ka mudan waaqaca. Sunnada ayaa ka horraysa waxa lala qabsaday, sidoo kalena Alle ayaa ka horreeya dadka ee nabadgelyo. Yuusuf milaygii uu boqorka la joogay, dambi ayuu samayn karayay, balse waxa uu yidhi: *"magan Alle"*. Wakhtigii uu boqorka ahaa waa uu aargudan karayay, laakiin waxa uu yidhi: *"Ilaahay ha idiin dambidhaafo."*

***"Xilliyada qaar, gobonimadu waxa ay ku jirtaa arrimo aynaan samayn."***

Allahayow, adiga ayaa arkayay qalbigii Yacquub markii uu yidhi: *"Ilaahay ayaan u ashtakoonayaa."* Allahayow, xanuunkii Yacquub oo kale ayaan dareemayaa, ee waxa aan ku weydiistay farxaddiisii mid la mid ah. Baryadaada ayaa dib u dhacda waayo; qorshaha Alle waxa aad ku leedahay meel aanad wali gaadhin, qalbigaagana waxa ku jirta qallafsanaan u baahan in la jilciyo. Baryadaada ayaa habsaanta; si lagaaga saaro isu-bogidda qalbiga kaaga jirta iyo liididda aad ku samaysay walaalkaa, halkii aad uga naxariisan lahayd, muddo kadib ayaana lagaa aqbalaa. Eebbow, waxa aan kaa magangalay in aan simbiririxoodo sugnaasho kadib, inaan la imaado waxa aan dadka u diido, in aan isla qummanaado, in aan liido dambiilayaasha, halkii aan ugu naxariisan lahaa, in aan ku qooqo nimcada iyo musiibo igu keenta in aan ka cadhoodo qadarkaaga iyo qorshahaaga. Eebbow, adaan ku magangelayaa, xaggaagana waa aan u soo cararayaa. Muuse hooyadii waxa lagu yidhi: *"ku tuur badda oo ha baqan."* Hooyadiisii labaad waxa ay tidhi: *"ha dilina."* Walaashii waxa laga yidhi: *"ammintii ay socotay walaashaa."* xaaskiisu waxa ay ka tidhi: *"aabbow, shaqalaysii."*

***"Nin kasta oo weyn naag baa ka dambaysa."***

﴿إِذۡ يَقُولُ لِصَٰحِبِهِۦ لَا تَحۡزَنۡ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَنَاۖ﴾ التوبة: 40

*"Markii uu saaxiibkii ku yidhi: ha murugoon, Alle ayaa innala jira e."*

Waxa jira hadal u dhigma laabgelinta. Xilliyada qaar waxa aynu dareennaa cidhiidhi, kadibna waxa inna soo gaadha weedho naxariis ah oo innaga fayda dhibkii inna ragaadiyay. Wakhtiyada qaar, qalbijab ayaa innagu dhaca, kadibna waxa inna soo gaadha weedh kabniin innoo noqota. Mar kale, murugo ayaynu dareennaa, hadal togan ayaa innooga yimaadda qof ehelka ah, kadibna waa aynu faraxnaa.

***"Dunida marti ayaynu ku nahay, waxaana waajib ah in aynu is kaashanno."***

﴿وَحَرَّمْنَا عَلَيْهِ ٱلْمَرَاضِعَ مِن قَبْلُ﴾ القصص: 12

*"Muuse, hore ayaannu ugu diidnay dumarka carruurta naas-nuujiya"*

Muuse ayaa gaajooday, qasrigii Fircoonna waxa qabsatay oohintiisii. Dadkii oo dhan ayaa u diirnaxay, balse Allihii u diiday naasaha haweenka ayaa uga naxariis badnaa, waxaanu doonay in uu u soo celiyo hooyadii. Wax kasta oo uu Alle innoo diiday, haddii aynu dareemi lahayn naxariista innoogu jirta, nolol deggan ayaynu ku noolaan lahayn.

﴿فَٱنطَلَقَا حَتَّىٰٓ إِذَآ أَتَيَآ أَهۡلَ قَرۡيَةٍ ٱسۡتَطۡعَمَآ أَهۡلَهَا فَأَبَوۡاْ أَن يُضَيِّفُوهُمَا﴾

الكهف: 77

*"Waa ay socdeen ilaa ay gadheen tuulo ay ka codsadeen dadkii deganaa quudin, laakiin waa ay diideen martigelintoodii"*

Marka ay garan waayaan qiimahaaga, fadlan xusuuso: Muuse iyo Khadir ma helin cid marti gelisa, sidoo kalena ma helin cid quudisa. Adigu adiga ahow, haba ku dafiraane. Isla-weyno oo damiirkaaga ilaasho, haba ku tuhmaane.

﴿رَبِّ إِنِّي لِمَآ أَنزَلۡتَ إِلَيَّ مِنۡ خَيۡرٖ فَقِيرٞ﴾ القصص: 24

*"Rabbigayow, wixii aad ii soo dejiso ee wanaag ah, waa aan u baahanahay"*

Nebi Muuse markii uu gaadhay Madyan, ma haysan guri, shaqo iyo xaastoona. Laakiin inta uu falay wanaag ayuu geed hadhkii jiifsaday, gacmahana sare ayuu u taagay isaga oo leh: *"Eebbow, wixii aad i siiso ee wanaag ah, waa aan u baahanahay."* Isla maalinkii, qorraxda oo aan dhicin ayuu isla helay: *guri, gabadh iyo shaqo is barkan.* Mar kasta oo aad khayr samaysaan, tijaabiya ducadan. Mar walba oo uu waayuhu jiq kugu noqdo, xusuuso sidii uu Nuux uga badbaaday doontii, sidii uu Ibraahin uga badbaaday dabkii, sidii uu Yuunus uga badbaaday calooshii Nibiriga iyo sidii Muuse badda loogu kala jeexay.

Guusha Alle, waxa ugu qurux badan ta timaadda xaaladda quusashada ee uu addoonku keligii aamino. Duco keliya ayuu Ilaahay ugu hiiliyay Nuux, xaaskii Sakariye ku suubbiyay, Yuunusna kaga badbaadiyay Nibirigii. Sidoo kale, baryo ayay Maki ku noqotay meel ay dadku wada jecel yihiin. Ku kalsoonw ducadu in ay suubbiso wixii xumaaday. Allahayow, waxa aan ku weydiistay adkaysigii Haajara. Ibraahin baa kaga tegay yada iyo wiilkeeda doox aan lahayn wehel iyo biyotoona. Arrimahan oo dhan ma ay fiirin, ee waxa ay ku tidhi: *"Ibraahinow, sidan Alle miyaa ku faray?"*

Markii uu ku yidhi: "haa", ayay ugu warcelisay: *"iska tag, Alle na dayici maayee."* Eebbow, waxa aan ku weydiistay qalbi, iimaan, kalsooni iyo adkaysi la mid ah kuwii Haajara.

Ilbidhiqsi gudihii ayuu carshigii Balqiisa kaga soo qaaday Yemen, kuna geeyay Qudus, haddana waxa uu yidhi: *"kani waa dheeraadkii Rabbigay."*

Dulqarnayn ayaa dhalaaliyay xadiid, kana dhigay dab holcaya, gidaar weyn ayuu ka dhisay halkii ay ka soo bixi jireen Ya'juuj iyo Ma'juuj, haddana waxa uu yidhi: *"tani waa naxariis ka ahaatay xagga Rabbigay."*

Dhaqanka gobta waxa ka mid ah; fadliga in ay u celiyaan Alle (swt). Baahi kasta oo aad weydiisato Alle, adiga oo ka dhawrsanaya dadka, rajo walba oo aad isaga ku aammintay oo aad illowday iyo illin walba oo isaga dartii kaaga timid, ma illaawin ee waa uu kuu oofinayaa. Adiga oo Ilaahay ku kalsoon dheh: *"Ilaahay ayaa keeni, waana naxariis badane khabiir ah."*

Hubkii ugu horreeyay ee dilaa ah ee uu adeegsaday dadku, waxa uu ahaa baryo, gaar ahaanna Nebi Nuux ayaa adeegsaday maalinkii uu gacmaha kor u taagay isaga oo leh: *"Eebbow, gaalada madhi oo midh haka reebin."*

***"Iska jir dadka aan lahayn hiil aan Ilaahay (swt) ahayn, hubkoodun uu yahay baryada."***

﴿ ٱقۡرَأۡ بِٱسۡمِ رَبِّكَ ٱلَّذِي خَلَقَ ﴾ العلق، الآية: 1

*"Akhri adiga oo kaashanaya magaca Rabbigaaga abuuraha ah"*

Dunidan qof kor joogay kuma seexan caawa waxa ballansan cirka iyo dhulku. Qofna ma malaynayn god madow oo Maka ku dhex yaalla ayuu ka soo bixi ilays ifin doona dunida oo idil. Dhulku waxa uu u boholyoobay cirka waayo; Jibriil muddo ku siman shan boqol oo sannadood lama soo degin hanuunkii uu ka keeni jiray samada. Dhulku waxa uu sii iftiinsanayay hadhaagii kutubtii hore ee la leexiyay, badi dadku waxa ay sii caabudayeen dhagaxaan la qoray, ilaahyada timirta ahna dib baa loo cunayay. Waxa la gaadhay ilbidhiqsigii uu Alle (swt) doonay in uu isbeddel ka sameeyo dunidan. Qof aan waxba qorin, waxna akhrin ayuu ku soo degay amarkan: "*akhri.*" Shakhsigan ayaa hab isku mid ah, wax u baraya aqoonyahanka iyo waxma garatada.

Agoonkii hore u waayay labadiisi waalid ayaa hagaya aabbayaasha, isla markaana waxa uu hagaajinayaa nolosha hooyooyinka. Xoolajirkii shilimmada yar Qureysh adhiga ugu jiri jiray ayaa caawa dusha laga saaray mas'uuliyadda caalamka oo dhan. Ninkii maamuli jiray hantida Khadiija, ayaa maanta hagaya oo hagaajinaya dhaqaalaha caalamka oo dhan. Runlowgii aamminka ahaa ayaa caawa la wareegaya ammaanadiisa. Godku waa mugdi, isna waxa uu ku mashquulsan yahay ka fekerka cirka ifaya iyo saxaraha

haawanaya, naftiisana waxa ku soo dhacaysa arrimahani waa ay ka weyn yihiin in uu sameeyay sanam uu qoray addoon xabashi ah oo ay caabudaan madaxda Qureysheed. Kani waa Jibriil oo hortaagaan, gogoldhig la'aan ayuu ku yidhi: akhri. Waxa uu ugu warceliyay: anigu waxba ma akhriyo. Mar kale ayuu ku celiyay: akhri, isna waxa uu ugu warceliyay: waxba ma akhriyo. Mar seddexaad buu ku celiyay: akhri, isna waxa uu ugu warceliyay: waxba ma akhriyo. Si xoggan inta uu u soo jiiday ayuu ku yidhi: ﴿ٱقۡرَأۡ بِٱسۡمِ رَبِّكَ ٱلَّذِي خَلَقَ﴾

## Maxaynu ka baranaynaa sheekadan?

1- Ereygii ugu horreeyay Quraanku waa akhri, balse ma ahayn salaad, ama soon, sababtuna waa in uu cilmigu ka horreeyo cibaadada. Salaad aan wadan cilmi iyo caqiido, waxa ay noqon jimicsi iyo jidh-dhis. Soon aanay ka horrayn cilmi iyo caqiido, waa cunto joojin iyo caafimaad raadin. Dawaaf ka madhan cilmi iyo caqiido, waa jimicsi lagu dhimayo miisaanka jidhka. Alle (swt) ma odhan jihaad waayo; jihaadka aan ku dhisnayn aqoon iyo aamminaad, dagaalyahannada ayuu ka dhigaa jirri jidadka fadhiista. Ilaahay, ma odhan ganacso maxaa yeelay; ganacsiga aan ku dhisnayn aqoon iyo ammaano, xaaraanta iyo xalaasha ayuu isku badhxa. Rabbi (swt) laguma caabudo aqoon-darro, kitaabkiisa lagu ballaysimay akhrina suuraggal maaha in ay noqdaan raacayaashiisu waxma garato iyo hawo raac.

2- Milaygii uu Jibriil ku soo degay Nebiga, waxa uu ahaa mid cabsoonaya oo uu dhidid ka da'ayo. Uma tegin adeerkii Xamse oo ahaa libaaxii Qureysheed; si uu u ilaaliyo. Uma tegin Abu Bakar oo ahaa saaxiibkiisii ugu qaalisanaa; si uu ugu dhiso niyadda. Ma tegin daaru Nadwa oo ay markaa fadhiyeen madaxdii Qureysheed; si ay u soo dhoweeyaan. Balse, waxa uu u tegay Khadiija waayo; yada ayaa u ahayd adeer, saaxiib iyo xigtaba. Hantideeda oo dhan ayay farta ka saartay sababta oo ah; waxa ay ogayd labada isqabaa ee ku kulma gogoshu in aanay isku diidin shilimmo yar. Khadiija, Muxammad waxa ay u ahayd aabbihihiisii aanu arag, hooyadiisii uu waayay isaga oo yar, awoowgiisii mas'uulka ka ahaa iyo walaalihiisii aan dhalan, isna daacad ayuu u ahaa oo intii ay noolayd ma guursan gabadh kale. Khadiija, Caa'isha ayaa ka hinaasi jirtay tiiyoo waa hore dhimatay, waxa aanay odhan jirtay: *"wali ma hadal haysaa yada oo Alle kuugu beddelay wax ka khayr badan."* Nebigu waxa uu ku yidhi: *"Ilaah baan ku dhaartaye, Alle ima siin gabadh ka wanaagsan khadiija."* Waxaas baa ballan oofin ah. Qalbiga nooli ma hoojiyo qof dhintay oo abaal u galay, kaas oo dunida u iftiimiyay. Xilligii uu Nebigu lixdan jirsaday ayuu arkay saaxibadihii Khadiija oo da'da siddeetanka afka saaray, go'iisii ayaanu siibay; si ay ugu fadhiistaan, dadkii ku hareeraysnaa oo aad u yaabanna waxa uu ku yidhi: *"kuwani waa saaxibadihii Khadiija."*

﴿وَشَرَوْهُ بِثَمَنٍ بَخْسٍ دَرَاهِمَ مَعْدُودَةٍ وَكَانُوا فِيهِ مِنَ الزَّاهِدِينَ﴾

يوسف: 20

*"Waxa ay ku iibiyeen shilimmo yar, waxa aanay ahaayeen kuwa diidanaa"*

Waa duni la iibiyay Yuusuf, la beeniyay Nuux, dab lagu dhex tuuray Ibraahin, lagu tuhmay Muuse sixiroole, Muxammadna dhagaxaan lagu shiiday. Markaa adigu ma waxa aad ka filaysaa in ay kugu soo dhoweeyaan gacmo furan iyo laab xaadhan? Dunidu waa dhib socda, naxariista Eebbena waxa ka mid ah in uu ka dhigay goob beerasho, balse aanu ka yeelin goob goosasho. Dunida, maanta ku beero waxa aad ku faraxdo barri, hana isku hawlin dadka. Inanta dhowrsooni waa xagjir, ka diinta ku dhegani waa argagixiye, ka wax bixiyaa hantidiisa ayuu ku ciyaarayaa, ka masjidka tagaa waa bilaa shaqo, ka wax akhriyaana waa maangaab in kasta oo ay umaddani tahay tii akhriska.

***"Adigu in aad ahaato adiga, agtoodana ku liidato ayaa kun jeer ka qiimo badan in aad iska dhigto wax aanad ahayn."***

﴿قُلْنَا لَا تَخَفْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْأَعْلَىٰ﴾ طه: 68

*"Waxaannu ku nidhi: ha baqan, adiga ayaa sarrayn badane"*

Baadilku dagaal buu huriyaa, balse xaqa ayaa guulaysta. Namruud ayaa dagaal huriyay, balse Ibraahin ayay guushu raacday. Fircoon ayaa dagaal huriyay, laakiin Muuse ayaa guulaystay, Nabi Muxammad ayaa magaalaada Maka habeen madow dhuumasho kaga baxay, balse ugu dambayn maalin cad ayuu soo galay yada oo ay furan yihiin afarteeda irridoodba. Haku dagmin baadilka waayo; waxa uu kiciyaa dagaallo, hana diidin xaqa maxaa yeelay; waligii dagaal ma ballaysimo. Eebbe, Gaalka ayuu u seeta dheereeyaa sababta oo ah; waxa uu doonayaa in u lumo, xaqana waa uu gadaal dhigaa waayo; waxa uu doonayaa in uu hufo.

Baadilku marka uu gaadho figta ugu sarraysa, waxa ay ka dhigan tahay guushii xaquna in ay kaabiga innagu hayso. Sunnada Ilaahay waxa ka mid ah; shaygu marka uu dhamaystirmo in uu bilaabo dhinnaan iyo dib-u-gurasho. **"*Maanka ku hay, saacadaha ugu madow habeenku, waa kuwa soo xiga waaberiga.*"**

﴿فَنَادَىٰ فِي ٱلظُّلُمَٰتِ أَن لَّآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنتَ سُبۡحَٰنَكَ إِنِّي كُنتُ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ﴾ الأنبياء، الآية: 87

*"Mugdiyo ayuu ka dhex dhawaaqay isaga oo leh: Ilaah xaq lagu caabudo oo aan adiga ahayn ma jiro, aniguna waxa aan ka mid ahay dulmifalayaasha."*

Arrinku xillina kuma xidhnayn shamaca, faynuuska iyo tiriigga, laakiin waxa uu ku xidhnaa qalbiyada. Kuma dhibayso haddii ay dunida oo dhami dam tidhaahdo, balse uu ifayo qalbigaagu. Ilayska qorraxda iyo iftiinka dayaxu haddii ay istaagaan garbahaaga, balse uu qalbigaagu madow yahay, waxba kuu tari maayaan. U fiirso Yuunus, waxa ku kulmay mugdiyo seddex ah: *mugdiga habeenka, ka badda iyo ka caloosha Nibiriga*, waxna uma ay dhimin. Mugdi walba oo aan qalbiga ahayn waa laga baxaa. Bal hadda dhuux: Nebi la soo diray oo laga ilaaliyay been, xumaan iyo istusnimo oo cadhooday ayuu Alle ka cadhooday, isla markii uu caloosha Nibiriga galayna waxa uu ku dhawaaqay: *"Ilaah xaq lagu caabudo oo aan adiga ahayn ma jiro, Eebbow, adaa xumaan ka hufan, aniguna waxa aan ka mid ahay dulmifalayaasha"*. Yuunus (cs) hadalkan waxa uu ku hadlay isaga oo laga dhowray gefka, ee maxaa ka wanaagsan sida uu ula dhaqmay Ilaahay! Maxaa ka qaalisan baryadiisan! Alle ayuu ugu dhowaanayaa gaabis xaggiisa ka yimid, kumana faanin cibaadadiisa, innaguna marka aynu laba rakcadood

tukanno, waxa aad mooddaa jannadaba in ay innnaga xigta dhimashada oo keliyii.

*"Dib ugu noqda qalbiyadiinna waayo; dunidan ifaysaa waxba u tari mayso qalbi madow. Xilli kasta xusuusnaada, dhib walba oo aan ahayn qalbiga, waa laga soo kabtaa."*

﴿فَلَمَّا وَضَعَتْهَا قَالَتْ رَبِّ إِنِّي وَضَعْتُهَا أُنثَىٰ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا وَضَعَتْ وَلَيْسَ الذَّكَرُ كَالْأُنثَىٰ ۖ وَإِنِّي سَمَّيْتُهَا مَرْيَمَ وَإِنِّي أُعِيذُهَا بِكَ وَذُرِّيَّتَهَا مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ﴾

آل عمران: 37

*"Markii ay umushay ayay tidhi: Allahayow, waxa aan umulay dheddig -Alle ayaa u aqoon badan waxa ay umushaye-, labkuna dhedigga oo kale maaha, waxa aanan u bixiyay Maryan, sidoo kalena yada iyo tafiirteeda waxa aan kaaga magan gelayaa Shaydaanka laga fugeeyay naxariista."*

Hadalkan sare waxa ku tiraabtay xaaskii Cimraan. Inanta yar ee ay aayaddu ka hadashay waa Maryan, sheekada oo koobanna sidan ayay u dhacday: xaaskii Cimraan ee Xanna ayaa hore u dhali weyday, kadib Ilaahay ayay kula nadartay[33] haddii uu wiil siiyo in ay u gacan bannayn doonto cibaadada iyo ka shaqaynta Bayt Al-Maqdis. Ilmihii waxa uu noqday dhedig, dhaqankana kama mid aha in ay habluhu u go'aan cibaadada, laakiin Maryan waa ay soo dhaweeyeen waayo; Cimraan ayay xushmad badan u hayeen. Nin kastaa waxa uu ku dooday aniga ayaa xannaanaynaya, ugu dambayntiina waa ay qori-tuurteen, sidanna waa uu u dhacay: qalimmo ayaa lagu dhextuuray biyo, qofkii uu qalinkiisu istaago ayaana guulaysanayay. Qori-tuurkii seddex jeer ayay ku celiyeen, mar kastana waxa helayay Sakariye oo ahaa xaaskii

[33] **Nadar:** waa in uu qofku naftiisa ku waajibiyo wax aan lagu lahayn.

Maryan habaryarteed. Ujeeddada aynu uga soconno sheekadani waa: *"labku ma ha dhedigga oo kale."*

Dad badan ayaa aaminsan aayaddani in ay hoos u dhigtay qiimaha dhedigga, isla markaana ay labka siisay dheeraad, balse waa fahan gurracan. Haddii ay aayaddu tahay: *"dhediggu la mid maaha labka"*, macnuhu waxa uu noqon lahaa: labka ayaa wax dheer dhedigga. Xarafka "kaaf" waa isku eekaysin, dhedigguna waa loo eekeeye. Naskani waxa uu sugay kala soocnaan ee ma xusin dhinnaan, hadalkanna macnihiisu waa: *"jinsi kastaa meelo ayuu kaga wanaagsan yahay kale, balse aamminaadda odhanaysa: ragga ayaa dhinac walba kaga horreeya dumarku waa gef cad iyo hadal aan geerna haysan."* Alle marka uu xusayo dumarku in ay ragga kaga duwan yihiin dhinacyada jidhka iyo nafta, waa uu ka soocay, waana sharaf ee maaha sheelin. Kuwa ku dooda sinnaanta labada jinsi, dumarka ayay yasaan -ha doonaan ama ha diidaane-, hadalkanina waxa uu ka dhigan yahay; gabadhu ninka waxa ay kaga duwan tahay keliya in ay tahay warshad wax-soo-saarta.

Muran kama taagna insaanku in uu ka siman yahay maamuuska, waana waxa uu Islaamku u taagan yahay ee uu difaacayo. Jinsi kastaa sidiisa ayuu u madax-bannaan yahay, waxa aanu leeyahay qaab u gaar ah iyo shaqo ku habboon qaab-samaysanka jidhkiisa. Tusaale: Islaamku marka uu gabadha u diidayo jihaadka, ma tusayso dhinnaan iyo dhaawac, balse waa muunadayn iyo milgayn dusha laga

huwinayo. Islaamku waxa uu ku tiriyaa dumarka noole dabacsan, sidaa aawadeed waxa uu siiyay shaqooyin ku habboon abuurkooga iyo itaalkooda.

Weedha ugu qallafsan ee lagu yidhaahdo gabadhi waa: *"ragga ayaa aad la mid tahay."* Gabadhu waa ay diidaysaa oo raalli kama aha hadalkan, macnihiisu maaha in uu ninku xun yahay, balse waxa ay og tahay shayga ugu qaalisan ee ay haysato in uu yahay gabadhnimada. Haa, labka iyo dhediggu isku mid maah, waana ammaan ee maaha eedayn.

Dumarow, qaab ahaan idinka ayaa ka qurux badan ragga, dareen ahaanna idinka ayaa ka naxariis roon. Idinka ayaa ka jacayl daran oo ka adkaysan og, isla markaana ka dulqaad iyo dadnimo fiican. Waxa aan ku dhaaranayaa raggu haddii ay dhali lahaayeen, ma dhaleen wax ka badan ilme keliya. Laakiin gabadha maamuuska badan, dhalmadu kaga daran dhimasho, haddana dareenka hooyanimo ayaa ku dhaliya in ay mar kale dhasho oo ay dunidan ku soo kordhiso ubaxyo ifaya. Annaga, waxa la naga abuuray ciid, waanu shaqaynaaa, daalnaa, dhibaatoonnaa oo wax-soo-saarnaa. Laakiin idinka waxa la idinka abuuray feedh u dhow qalbiga. Waxa aad u nugushihiin jacaylka oo si daran ayaa aad wax u caashaqdaan. *Gabadhu nin keliya ayay ka dhigataa adduunkeega oo dhan, balse ninka kuma filna dumarka adduunka oo dhami.* Kuwa ku dooda sinnaanta labada jinsi haka yeelina waayo; kala soocnaantu waa idiin sharaf.

Waxa aad astaan u tihiin dhinacyada: *dabacsanaanta, macaanka iyo quruxda nolosha, duniduna uma baahna rag badan maxaa yeelay; waxa ay haysataa dagaalyahanno, ganacsato, shaqaale iyo farsamo yaqaanno, balse waxa ka dhiman jacaylka oo ah aasaaska awooddiinna. "Haka ogalaanina ragga in ay dhedignimadiinna ku xadaan magaca sinnaanta.*

***"Ku faan dumarnimadiinna, sida ay raggu u difaacaan raganimada, si la mid ah ugu halgama ilaalinteeda."***

﴿وَلَقَدۡ هَمَّتۡ بِهِۦۖ وَهَمَّ بِهَا لَوۡلَآ أَن رَّءَا بُرۡهَٰنَ رَبِّهِۦۚ كَذَٰلِكَ لِنَصۡرِفَ عَنۡهُ ٱلسُّوٓءَ وَٱلۡفَحۡشَآءَۚ إِنَّهُۥ مِنۡ عِبَادِنَا ٱلۡمُخۡلَصِينَ﴾ يوسف: 24

*"Dhab haantii, Suleekhi waa ay hunguraysay, isna waa uu hungureeyay haddii aanu arki lahayn burhaanka rabbigii, sidaas ayaanu Yuusuf xaggiisa uga leexinnay xumaanta, waxaanu ka mid yahay addoomahayaga aannu xulannay"*

Aayaddani waxa ay ka mid tahay -haddii aanay ahaynba- aayadaha mufasiriinta ka dhex dhaliyay muranka xooggan. Mufasiriintu macnaha aayaddan ayay isku khilaafeeen, haba ka midaysnaadaan Yuusuf in aanu xumaan samayn. Laakiin waxa ay isku maandhaafeen macnaha "الهم" Mufasiriinta badankoodu waxa ay isku raacseen Yuusuf in uu ku hammiyay samaynta falkan, laakiin markii uu arkay burhaanka rabbigii oo ah taswiirtii aabbihii Yacquub, ayuu argagaxay. Haddaba, hammiga macnihiisu waa maxay?

Hammigu, sida ku xusan qaamuuska: lisaanu Carab waa sheekada nafta inta aan loo rogin fal, waana macne Carab dhexdeeda caan ka ah. Sidoo kale, waxa aynu u daliishanaynaa xadiiskii Nebiga (NNKH):

"من هم بحسنة ولم يفعلها، كتبت له حسنة"

*"Qofka wanaag ku hammiya ee aan samayn, waxa loo qoraa wanaag."* Xadiiska macnihihiisu waxa uu yahay: *"qofka ay naftiisu wanaag ugu sheekayso ee go'aansada in uu sameey waa*

*loo qoraa. U fiirso, wali waa fekrad ee ma noqon fal."* Haddaba, haddii falkan laga wado in ay is damceen, waxa ka dhalanaysa qofka hore ayaa hungureeyay, ka danbana laba mid ayaa la gudboonayd: in uu yeelo, iyo in uu iska diido. Rabitaankii Suleekhi hannaanka fekerka wuu ka gudbay, waxaana laga fahmayaa hab-dhaca aayadda iyo kuwa ka sii dambeeya. Suleekhi waxa ay tidhi: *"aniga ayaa hungureeyay naftiisa."* Haddaba, maxaa laga wadaa hammiga Yuusuf?

Alle (swt), haddii uu yidhaahdo: *"dhab ahaantii, waa ay ishungureeyeen"* oo uu hadalku uu intaa ku koobnaan lahaa, samaynta falkan waa ay ka sinnaan lahaayeen, balse waxa uu yidhi: *"dhab ahaantii, waa ay hammiday, isna waa uu hammiyay, haddii aanu arki lahayn burhaanka rabbigii."* Halkan ayaa u baahan dhuuxid iyo dhugasho. Aayaddan waxa ku dhex sugan kala horraysiin iyo kala dambaysiin dad badan hoos martay, hadalkuna waxa uu ku saxan yahay: *"dhab ahaantii, waa ay hunguraysay, haddii aanu arkin burhaanka rabbigiina waa uu hungurayn lahaa."*

Xarafka "لولا": waxa uu diidayaa jiritaan, waaba adiga oo yidhi: "لولا غلاء السعر لاشتريت الثوب، فإذا لم أشتر" *"Haddii aanu sicir barar jiri lahayn, waxa aan iibsan lahaa dharka, balse ma iibsan."* Sidaa darteed, Yuusuf ma hungurayn Suleekha.

Qof baa isweydiin kara: Alle (swt) maxaa uu u odhan waayay: *"Suleekha ayaa damacday ee isagu ma uu damcin? Sidani miyaanay ka caddayn, kana fududayn hadalka hore?"*

Warcelintu waa maya waayo; haddii uu odhan lahaa: *"Suleekha ayaa damacday ee isagu ma uu damcin?"*, samaynta falka ayaa meesha ka baxaysa, balse wixii ku bixiyay ayaa sii jiraya oo waxa suuraggal ah in uu ka shikiyay, ama uu ka baqay in uu odaygii reerku ku qabto. Hab-dhaca aayaddu, Yuusuf ayuu hiil u yahay ee ma diidayo tuhmada.

Aynu ku noqonno hab-dhaca aayadda. Alle waxa uu yidhi: *"sidaa ayaannu Yuusuf xaggiisa uga leexinnay xumaanta iyo sinada"* U fiirso macnahan: *"Yuusuf xaggiisa ayaannu ka leexinnay."* Yuusuf haddii uu ku hammiyi lahaa xumaanta, waxa ay noqon lahayd in uu Rabbi ka leexiyay xumaanta waayo; halis ayuu ku jiray. Laakiin waxa uu yidhi: *"xaggiisa ayaannu ka leexinnay xumaanta."* Xumaanta ayaa dabagashay Yuusuf ee arrinku si kale ma ahayn. Ilaahay, aayadda waxa uu ku soo afmeeray tilmaanta Yuusuf:

﴿إِنَّهُۥ مِنۡ عِبَادِنَا ٱلۡمُخۡلَصِينَ﴾

*"Yuusuf, waxa uu ka mid yahay addoomahayaga aannu xulannay."*

Farqi weyn ayaa u dhexeeya labada erey: "ٱلۡمُخۡلَصِينَ" iyo "ٱلۡمُخۡلِصِينَ", Kala fahanka macnayaasha labadan ereyna aad iyo aad ayuu muhiim u yahay.

Ereyga *"Mukhlis"*: waa qofka Alle u keliyeelaa cibaadada ee aan cid kale waxba la wadaajin, waxaana soo hoos gelaya Muslimiinta uu khayrkoodu ka batay xumaantooda.

Ereyga *"Mukhlas"*: waa qofka uu Alle xushay, waxaana waajib ah in la oo ilaaliyay sida Nebiyada oo kale. Alle (swt) markii uu tilmaamayay Muuse, waxa uu ku sheegay isla sifan oo kale, waxaanu yidhi: **"إنه كان مخلصا وكان رسولا نبيا"**.

*(Muuse waxa uu ahaa daacad iyo Rasuul Nebi ah)*

Halkan waxa ka cad, Yusuuf iyo Suleekha in aanay sinaba iskugu dhowayn. Sheekada aynu ku soo xidhno hadalkan Suleekha: *"dhab ahaantii, aniga ayaa naftiisa doonay, waanu diiday."* Sidee ayay isku hungureeyeen isaga oo diiday? Haddii uu sax yahay ra'yiga ay qabaan badi mufasiriintu ee ah: Yuusuf, waa uu hungureeyay, laakiin markii uu arkay burhaanka rabbigii ayuu ka joogsaday, waxa ka dhalanaysa in aanu Alle (swt) ilaalin Yuusuf.

﴿وَقُلْنَا يَٰٓـَٔادَمُ ٱسْكُنْ أَنتَ وَزَوْجُكَ ٱلْجَنَّةَ وَكُلَا مِنْهَا رَغَدًا حَيْثُ شِئْتُمَا وَلَا تَقْرَبَا هَٰذِهِ ٱلشَّجَرَةَ فَتَكُونَا مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ﴾ سورة البقرة، الآية: 35

*"Waxa aannu ku nidhi: Aadanow, adiga iyo xaaskaagu dega jannada, xaggeega ka cuna quud ballaadan, meeshaad doontaan ka qadhaabta, ha u dhawaanina geedkan, haddii aad sidaa samaysaan oo aad u dhawaataan geedkan, waxa aad ka mid tihiin dulmifalayaasha."*

Jannada oo ah hoyga waaritaanku, kama badbaadin imtixaan, ee maxa aad u malaynaysaa dhulka oo ah biriij laga gudbayo! U fiirso naxariista Eebbe, ammintii uu Aadan u diiday geed keliya, waxa uu u ogolaaday dhammaan dhirtii jannada, balse shaqada Ibliis waa in uu dadka u qurxiyo xaaraanta. In kasta oo aanu geedkani waxba kaga duwanayn dhirta kale, haddana Ibliis waxa uu karay in uu Aadan jar ka tuuro oo ugu sheego ka waaritaanka. Ibliis sidan ayuu ku sameeyay jannada dhexdeeda, Eebbena Aadan waxa uu u ballan qaaday in aanu jannada ku dhex dareemayn: *gaajo, qaawanaan, harraad iyo kulayltoona.* Maxa aad u malaynaysaa adduunyada oo ah hoyga hawsha iyo halganka, hoyga cudurka iyo caafimaadka iyo goobta guusha iyo guuldarrada? Sheekada hore waxa aynu kala soo dhex baxaynaa xalaasha iyo xaaraantu in ay isu yihiin bad iyo irbad, laakiin Ibliis waxa uu ka shaqeeyaa sidii uu irridaha xalaasha u soo koobi lahaa, kuwa xaaraantana u ballaadhin

lahaa. Markii uu Alle xaaraan ka dhigay dulsaarka, jidadka xalaashana badiyay, Ibliis dadka waxa uu ku qanciyay ribadu in ay tahay hilinka ugu fudud ee hanti lagu urursan karo in kasta oo ay barakada ka qaaddo. Markii uu Alle xaaraan ka dhigay hilibka doofaarka, hilbo badanna xalaaleeyay, Ibliis dadka waxa uu u sheegay in ay xaaraantu macaan tahay. Xilligii uu Alle xaaraan ka dhigay sinada, guurkana banneeyay, Ibliis dadka waxa uu u qurxiyay gogoldhaafka.

***"Haddii aynu kaga soo baxnay jannada khasab, hadda ayaynu ku nagi nahay daar laga soconayo oo laga raacayo laba tareen: ka jannada iyo ka naarta, ee idinku doorta midka aad raacaysaan."***

﴿وَمَا مِن دَآبَّةٍ فِي ٱلۡأَرۡضِ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ رِزۡقُهَا وَيَعۡلَمُ مُسۡتَقَرَّهَا وَمُسۡتَوۡدَعَهَاۚ كُلّٞ فِي كِتَٰبٖ مُّبِينٖ﴾ سورة هود: 6

*"Ma jiro wax dul tukabaya dhulka, haddii uu jirana Alle ayaa quudinaya, ogna halka uu ku sugan yahay iyo halka uu ku dambaynayo, wax walbaana waxa uu ku qoran yihiin kitaab cad"*

Waxa ugu weyn ee ay dadku u halgamaan waa quudka, helina maayaan wax aan ka ahayn inta loo qoray. Waxa ugu badan ee ay dadku ka cararaan waa geerida, noolaanna maayaan wakhti ka badan inta loo qoray. Intii aynaan ifka iman, ayaa la sii qoray quudkeenna iyo cimrigeenna. Martidu waxay quudataa waxa loo garto, dadkuna noolaan maayaan ammin ka badan inta uu u qoray boqorka dunidu ee iska naso. Xabbadda qamandiga ah dhul baa laga beeraa, meel baa lagu cunaa, waxaana suuraggal ah in aad cunto waayo; adiga ayaa laguu qoray. Haa, kumanaan qof ayaa ka shaqaynaya si ay kuu soo gaadhsiiyaan quudkaaga, adiga iyo kumanaan kalana waxa aad ku hawlantihiin sidii aad u gaadhsiin lahaydeen dad kale maxaa yeelay; hore ayaa loogu qoray. Insaanku haddii uu quudkiisa uga baxsan lahaa sida uu uga cararo wadka, quudku waxa uu u raadsan lahaa sida uu u raadsado wadku.

Ereyga "الدابة": Carabtu waxa ay u taqaannaa wax walba oo dul tukuba dhulka, sida uu shay kasta oo dhulka ka

sareeyaa u yahay cir. Quudka dadku waa in yar oo ka mid ah quudweynaha uu Alle qoray. Tusaale: haddaynu nahay todoba bilyan oo qof, waxa aynu nahay noolayaasha ugu yar ee ku dhex nool dhulkan marka la inna barbardhigo qudhaanjada oo ay halkii qofba ku soo hagaagayso kun xabbo. Guud ahaan kuwa isku sheega deeq bixiyayaashu waxba ma hayaan ee woxogaa uu innoo qoray deeq bixiyaha dhabta ahi ayay qaybiyaan. Malaa'igta roobka waddaa, dhibic biyo ah kuma sii dayso bar aan la farin, sadaqada aad miskiinka siisaa waa quud laguugu dhiibay, wax walbana mar hore ayaa loo qoray hab iyo hannaan xeeldheer ee iska nasta.

﴿وَكَانَ عِندَ ٱللَّهِ وَجِيهٗا﴾ الأحزاب: 69

*"Waxa uu ahaa mid Ilaahay agtiisa sharaf ku leh"*

Kani waa halbeegga Alle, ee maaha ka dadka. Nuux waa la beeniyay, Ibraahin dab baa lagu dhex tuuray, Muuse waa la shirqoolay, Saalix waa ay dhibeen, Shucayb waa ay ku dhega adkaadeen, Yaxye waa ay dileen, Ciisena waxa ay isku dayeen in ay deldelaan. Muxammad, waxa beeniyay gaaladii Maka, Daa'if ayay ku dhagxiyeen, hoygiisii ayay isku weegaareen; si ay u dilaan, markii uu sii qaxayay ayay ka daba yimaaddeen, Beder iyo Uxud ayay kula dagaallameen, duullaankii godka waa ay hareereeyeen, ugu dambayntiina garab ayay ugu dareen sun; si uu u dhinto, ee adigu maxa aad ka filaysaa? Marka aad wax siiso itus baad tahay, haddii aad u diidana gacantii go'day baa aad tahay. Haddii aad la taliso waaa aad cayday, haddii aad ka aamustana fulay baad tahay. Marka aad ganacsato, lacag doon baad tahay, haddii aad iska fadhiisatan ma shaqayste ayaa aad tahay. Haddii aad dhaliisho ceebihiisa ayaa aad dabaguraysaa, haddii aad ka aamustana dan kama lihid. Kuwani waa dad uun, waxa ay iskugu jiraan gun iyo gob, balse gunta ayaa badan ee adigu adiga ahow. Waa sax qofka dadka dabagalaa in uu u dhinto murugo, balse waxa ka sii daran ka noloshiisa ku xidha. Raalligelinta dadku waa yool aan la gaadhin, ee mar kasta xusuusnow: *"waxa uu ahaa mid Ilaahay agtiisa sharaf ku leh."*

*"DADKA HA ISKU SII WADA DAYNE, WAXA UUN ISKULA HADH"*

﴿إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلتَّوَّٰبِينَ وَيُحِبُّ ٱلْمُتَطَهِّرِينَ﴾ البقرة: 222

*"Alle, waxa uu jecel yahay kuwa towbad keenka badan, ee isdaahiriya"*

Ereyga "التوابون": waa ku talaxtag, halkanna waxa uu ka faa'iidaynayaa in mar walba heegan loogu jiro shaqadan. Yacnii mar kasta waa ay towbadkeenaan. Maadaama oo ay mar walba soo noqdaan, waxa ka dhalanaysa in ay dambi badan yihiin. U fiirso naxariista Ilaahay (swt). Ma odhan kuwa towbad keena ayaa aan ka aqbalaa, mana odhan waxa aan u dambidhaafaa kuwa towbad keenka badan, balse waxa uu yidhi: *"waxa aan jecelahay kuwa towbad keenka badan."* Haa, waxa uu jecel yahay kuwa dambaabaya ee haddana soo laabanaya. Waxa uu jecel yahay kuwa maalinkii gefa ee habeenkii u noqda.

Ilaahay (swt) innooguma sheegin jacaylka uu u yahay kuwa towbadkeena; si aynu u dambaabno, laakiin waxa uu doonayaa in aanu Ibliis cidlo innagu xidhan. Dambigu si kasta oo u weyn yahay, waxa ka ballaadhan naxariistiis Alle. ***"Rabbi waxa uu innoo sheegayaa si walba oo aynu u dambi badannahay, in aanu isagu ka daalayn cafinteenna innaga oo daalna mooyaane."***

﴿فَلَا تَغُرَّنَّكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا وَلَا يَغُرَّنَّكُم بِٱللَّهِ ٱلْغَرُورُ﴾ لقمان: 33

*"Nolosha adduun ee liidata iyo Shaydaanku yaanay idin seejin Ilaahay (swt)"*

Nuux (cs) haddii aad wax ka weydiin lahayd kunkii sano ee uu noolaa, waxa uu kuu sheegi lahaa adduunyadu in ay gaaban tahay. Saleebaan oo gacanta ku hayay qorrax-ka-soo-baxa iyo qorrax-ka-dhaca inta u dhexaysa, isla markaana loo sahlay jinka, insiga iyo noolayaasha kale oo dhan, haddii aad wax ka weydiin lahayd hodantinimada, waxa uu kuu sheegi lahaa insaaku si kasta oo uu u haysto hanti in uu yahay baahane. Daa'uud oo birta xadiidka loo jilciyay, haddii aad wax ka weydiin lahayd awoodda, waxa uu kaaga warrami lahaa tamardarrada insaanka si kasta oo uu wax u haysto. Fircoonkii badda lagu awday haddii aad wax ka weydiin lahayd macaankii kursiga iyo boqortinimada, waxa uu kuu sheegi lahaa dhanankii baddu in uu illowsiiyay macaankii iyo macnihii kursiga. Namruudkii kaneecadu maskaxda ka gashay, haddii aad ka warsato boqortinimada, waxa uu kuu sheegi lahaa in liidato. Kuwa qooqay iyo xumaan falayaasha haddii aad weydiiso casharka ugu mudan ee ay ka barteen nolosha, waxa ay ku odhan: ***"ha isku hallayn adduunyada."***

﴿ٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِٱلْغَيْبِ وَيُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ﴾ البقرة: 3

*"Waa kuwa rumaynaya qaybka, salaaddana oogaya"*

Maangal maaha Sayniska saxda ah iy diintu in ay iska hor yimaaddaan. Saynisku kumanaan mar ayuu isbeddelay, balse kitaabkan inna dhexyaallaa muddo kun iyo afar boqol oo sannaddood ah ayuu wali sidiisii yahay. Xilli walba oo uu Saynisku horumar sameeyo, waxa uu ka markhaati kacaa runnimada iyo raandhiisnimada Quraanka kariimka ah -in kasta oo aanu u baahnahay aqoon iyo aqoonyahantoona-. Kuwa uu warkoogu ku soo ururay i tus oo i taabsii, waa masaakiin, waxaana ka sii liita kuwa aammina arrimaha Sayniska ee maqan, isla markaana dafira kuwa diinta ee dahsoon. Waxa ay diidaan Eebbe waayo; waa uu maqan yahay, balse waa ay rumaysan yihiin fallaadhaha qorraxda ee aan wali arag. Waxa ay dafiraan Malaa'igta maxaa yeelay; lama arag, laakiin waa ay aamminsan yihiin ququlka dabka oo ka sii qarsooni badan. Waxa ay diidaan xawaaraha onkodka, laakiin waxa ay aamminsan yihiin ka ilayska. Waxa ay illowsan yihiin Saynisku ammintii uu rumaysnaa dhulku in uu ku taagan yahay gees dibi, diintuna in ay tidhi: *"Meere kastaa waxa uu dabbaalanayaa meel ku habboon."*

Waxa ay illaaween Saynisku markii uu dhulka ku sheegay mid goglan, Quraankuna in uu yidhi: *"Intaa kadib, waxa uu goglay dhulka."* Xilligii ay Sayniska ka buuxeen khuraafaadka iyo sixirku, Quraanku waxa uu ka warramay uur-jiifta iyo

meelaha ay ka dhacaan xiddiguhu. Diintan Islaamka ee waajib ka dhigtay aqoontu, gar maaha in ay diiddo isla aqoonta ay ugu baaqayso dadka, balse Sayniska ayaa sidan ka duwan oo diiddan awoodda Alle, isla markaana waxa uu xusay kownku in uu iskii iskaga samaysmay. Sayniskụ ammintii uu ugu qummanaa waxa ay ahayd wakhtigii ay Muslimiintu gacanta ku hayeen waayo; waxa mataanoobay aqoonta iyo iimaanka.

***"Aqoon bilaa iimaan ah, waxa ka dhasha gaalnimo, iimaan bilaa aqoon ahna waxa ka dhasha khuraafaad."***

﴿وَقَالَتِ ٱمۡرَأَتُ فِرۡعَوۡنَ قُرَّتُ عَيۡنٖ لِّي وَلَكَۖ لَا تَقۡتُلُوهُ عَسَىٰٓ أَن يَنفَعَنَآ أَوۡ نَتَّخِذَهُۥ وَلَدٗا وَهُمۡ لَا يَشۡعُرُونَ﴾ القصص: 9

*"Waxa ay tidhi xaaskii Fircoon: ilqabowsi ayuu innoo yahay ee ha dilina, waxa laga yaabaa in uu wax inna taro, ama aynu ka dhiganno wiil, yaga oo aan dareensanayn."*

Aasiya waxa ay ka mid ahayd haldoorkii dumarka Musliminta ee soo maray sooyaalka insaanka. In kasta oo ay u dhaxday Gaalkii ugu weynaa sooyaalka, haddana waxa lagu tiriyaa dumarka kooban ee gaadhay dhammaystiranka sida uu Nebi Muxammad (NNKH) ku xusay xadiiskan: *"rag badan baa gaadhay dhamaystiranka, balse dumarka afar ayaa dhammaystirmay, waxa aanay kala yihiin: Maryan bintu Cimraan, Aasiya xaaski Fircoon, Khadiija bintu Khuweylid iyo Faadima bintu Rasuul."*

Aayaddan sare waxa ku jira laba ka mid aha saadaalihii ugu shaacsanaa sooyaalka insaanka. Labadaba dumar ayaa iska leh, qof keliya ayaa nasiib u helay, waana Muuse (cs).

1- Hadalkii Aasiya: *"waxa laga yaabaa in uu inna anfaco."* Muuse waxa uu u nqoday wiil iyo Nebi ay rumaysay, kaas oo ku hagay jannada oo ah waxtarka ugu weyni ee la helo.

2- Saadaashii inantii ninka wanaagsani ee tidhi: *"Aabbow, shaqaalaysii ninkan waayo; qof la shaqaalaysiiyo waxa ugu mudan ka isku darsaday awood iyo ammaano e."* Saadaashanna

Muuse ayaa iska leh oo waxa u noqday shakhsi isku darsaday awood iyo ammaano. Wixii uu Alle qoraY waa lama huraan. U fiirso sheekada Fircoon, kumanaan wiil ayuu gawracay ka hor dhalashadii Muuse waayo; faaliyayaashiisii ayaa u sheegay: *"boqortinimadaada waxa baabi'inaya Nebi reer banii Israa'iil ah."*

Dhanka kale, Muuse waxa u dabcay qalbigii Aasiya oo waxa uu ku barbaaray gurigii Fircoon. Kumanaan wiil ayuu gawracay, balse kii baabi'inayay markii uu yimid gurgiisa ayuu ku dhex barbaariyay. Qorashaha Alle ayaa soconaya, ifkuna waxa xarun shaqo.

***"Sababaha ayaynu qaadanaynaa, balse waxa dhacaya waxa uu Alle qoray. Sababaha ma aamminayno, balse waxa aynu aamminaynaa Allaha weyne ee keenay sababaha."***

﴿وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦٓ إِنَّ ٱللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تَذْبَحُوا۟ بَقَرَةً﴾ البقرة: 67

*"Xus markii uu Muuse ku yidhi tolkii: Ilaahay waxa uu idin farayaa in aad gawracdaan sac."*

Reer banii Israa'iil subax ayay ku soo tooseen meyd hor yaalla guri ka mid ah guryohoodii. Muran ayaa ka dhashay oo waxa la isku tuurtuuray cidda dishay, ugu dambayntiina waxa ay isla qaateen in ay iskula tagaan Muuse; si uu u kala saaro. Muuse waxa uu faray in ay loogaan sac, qayb ka mid ah hilbaha sacana ku dhuftaan meydka. Waa uu soo noolaanayaa, waxa uu sheegayaa kii dilay, kadibna waa uu dhimanayaa. U fiirso aayadda, waxa ay xustay sac, laakiin Yuhuudda oo dhaqan u leh hanti-ururursi ayaa Muuse u tegay; si ay waxa uga weydiiyaan astaamaha saca. Muuse ayaa ku yidhi: *"ma weyna, mana yara ee waa dhexdhexaad."* Muuse kuma adkayn, se yaga ayaa isku adkeeyay. Mar kale, ayay weydiiyeen midabka saca, waxaanu ugu warceliyay: *"waa huruud, indhaha soo jiidanaysa."* Haddana, mar kale ayay isku sii adkeeyeen oo sii warsateen, isna waxa uu ugu jawaabay: *"waa sac maamuusan oo aan loo adeegsan beer-falasho iyo waraabtoona."*

Reer banii Israa'iil waxa ay raadiyeen sac dhexdhexaad ah, midabkiisu huruud yahay oo maamuusan. Wax ay raadiyaanba, ugu dambayntii waxa ay ka heleen nin diiday in uu kaga iibiyo wax aan ka ahayn dhogortiisa oo dahab ah waayo; waxa uu ogaa baahida ay u qabeen siciisa.

Lacagtii ayay bixiyeen, kadibna inta ay gawraceen ayay ku dhufteen meydkii. Ninkii inta uu soo kacay ayuu farta ku fiiqay gacan-ku-dhiiglihii oo ah kii keli ahaa ee dhaxlayay, isla markaana uu dhalay walaalkii, kaas oo u dilay; si uu uga dhaxlo hantidiisa.

**Maxaynu ka baranaynaa sheekadan?**

1- Alle (swt) marka uu ka aamuso arrimo, hilmaam kama aha ee innaga ayuu innoo tudhayaa. Alle (swt) arrimaha badhkood ayuu faahfaahiyay, kuwana duuduub ayuu ku dhaafay ee idinku ha isku cidhiidhyina kuwa faahfaahsan.

2- Kuwani waa Yuhuud oo dadka ugu Nebiyo badan, isla markaana ugu iimaan yar. Muuse ayaa ka tallaabiyay badda, isla markii ay tallaabeen ee ay wali biyihii ka sii qoyan yihiin luguhooda, ayay soo mareen dad caabudaya sanamyo, kadibna Muuse ayay ku yidhaahdeen: *"noo samee Ilaahyo, sida ay kuwaniba u leeyihiin Ilaahyo."*

Alle ayaa ka dulqaaday buurtii dulsaarnayd, haddana waa ay diideen, roob dahab ah ayuu u shubay, haddana waa ay gaaloobeen, Daaluut ayuu u diray, waa ay isku maandhaafeen, kadib waxa loo soo diray taxane Nebiyo ah, waxa aanay ka dhigeen wax ay dileen iyo wax ay beeniyeen.

3- Si kasta oo aad u taagdaran tahay, waxa laguu qoray waa aad helaysaa, si walba oo aad u awood badan tahayna,

hanan maysid waxa aan laguu qorin. Maskaxda ayuu tuujiyay oo qorshe ayuu samaystay, adeerkiina waxa uu u dilay; si uu uga dhaxlo hantida, laakiin ma calfan.

4- Hantida ayaynu urursannaa innaga oo aan u eegin xalaal iyo xaaraan midka ay tahay, waynu ka dhimannaa oo waxa dhaxla kuwa innaga danbeeyaa, kadibna innaga ayaa la innaga xisaabinayaa aakhiro. Hantidu waxa ay ka mid tahay nimcooyinka adduunka ee maaha nolosha oo dhan. Alle (swt) wax kasta waxa uu u qaybiyay hab caddaalad ah, dad koobanna waxa uu siiyay nimcooyin dheeri ah. Waxa aynu aragnaa hantiile buka oo aan waxba cunayn iyo sabool waxa uu gaadhaba cunaya. Midka hore cuud baa la siiyay, ka labaadna caafimaad. Waxa aad arkaysaa qof bilaa ubad ah oo leh aqoon iyo mid ubad haysta oo ay ku xumaadeen. Tani waa adduunyo oo ma tobanawdo, basharkana waxa la tusay shayga ka maqan.

Qof baa amminsan in aan waxba gacmaha ugu jirin, se waxa uu hilmaamay adduunyadu in ay tahay goob shaqo, Eebbena aanu hilmaamin waxa uu innoo diiday. Ilaahay waxa uu inna weydiinayaa galladihiisa, sirta guushuna waa raalli ahaanshaha.

5- Ka baqashada baahidu waa baahi kale. Haddii aynu u fiirsan lahayn waxa aynu haysanno, uma aynu hanqal taagneen waxa innaga maqan, se nasiib xumo, inta aynu hilmaamno, ayaynu indhaha u taagnaa ta dadka kale.

6- Guryaha siraa ku duugan. Yaa ku yidhi: qofka hanti haysta ayaa nolol wanaagsan hantiyay? Yaa kuu sheegay ninka qalanjo qaba ayaa liibaanay?

***"Liibaantu kuma xidhna waxa aynu haysanno, balse waxa ay ku jirtaa hadba sida aynu u maamulanno, una adeegsanno."***

﴿فَأَوْجَسَ فِي نَفْسِهِۦ خِيفَةً مُّوسَىٰ ۝٦٧ قُلْنَا لَا تَخَفْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْأَعْلَىٰ ۝٦٨﴾ طه: 67-68

*"Muuse naftiisa ayuu ku qariyay cabsi. Waxa aannu ku nidhi: ha baqan, adiga ayaa sarrayn badane."*

Geesinimadu maaha in aanad baqan, balse waxa ay ku jirtaa in aad garato sida aad u qarinayso cabsidaada. Maanka ku hay, dadku heer kasta oo ay gaadhaan waa dad uun. Kani waa Muuse oo baqaya. Kani waa Nuux oo ka murugaysan wiilkiisii gaalka ahaa oo leh: *"Eebbow, waa jiidhkaygii."* Kani waa Ibraahin oo wiilkiisii uga warramaya riyadii uu arkay. Ibraahin, markii ay Malaa'igtii u timid yaga oo leh humaag dad, isla markaana aan cunayn sooryadii uu sameeyay waa uu cabsaday, balse waa ay u laab qaboojiyeen. Ammintii ay u sheegeen in ay soo rogayaan tuuladii Luud, waxa uu xusuustay ehelkiisii oo waa uu u naxariistay isaga oo ku leh: *"Luud baa ka mid ah dadka tuuladan ku nool."*

Kani waa Yacquub oo ka ladi la' maqnaashaha Yuusuf, waxa aanu yidhi: *"waxa i murug gelinaysa in aad cidlo kaga dhaqaaqdaan"* Kanna waa Muxammad oo ay ilmadu ka burqanayso maalinkii uu dhintay wiilkiisa Ibraahin, isla markaana waxa uu lahaa: *"qalbigu waa uu murugoonayaa, ishu waa ay ilmaynaysaa, maqnaashahaagu waa uu na murugelinayaa Ibraahinow, odhanna mayno waxa aan Alle raalli ka ahayn."*

Dadku heer kasta oo ay gaadhaan waa ay adkaystaan oo halgamaan, laakiin tani kama dhigna in aanay ahayn dad innala mid ah oo dareemaya: jacayl, nacayb, cadho iyo raalli ahaansho, kuwaas oo sidoo kalena leh baahiyo iyo riyooyin. Dawarsaduhu waxa uu ku farxaa hadalka suubban waayo; waa qof, gabadha shaqaalihii waxa ay ku tamarisaa hadalka togan waayo; waxa ay tebaysaa dadkeedii iyo dalkeedii. Shaqaalaha nadaafaddu waxa ay ku farxaan dhoolla-caddaynta waayo; waa dad. Sidoo kale, waxa suuraggal ah dhoollacaddayntaadu in ay wax weyn ka beddesho qof noloshii. Dadka, ka baahan iyo ka buuxa iyo labka iyo dheddiggu si kasta oo ay u kala duwan yihiin, haddana waa bashar. Kuwa wanaagsani maaha Maalaa'ig dhulka socota, shaqaalaha warshaduhuna maaha agab ka samaysan hilbo iyo dhiig, ee dadku waa ay wada siman yihiin.

﴿فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوۡمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓاْ أَخۡرِجُوٓاْ ءَالَ لُوطٖ مِّن قَرۡيَتِكُمۡۖ إِنَّهُمۡ أُنَاسٞ يَتَطَهَّرُونَ﴾ النمل: 56

*"Warcelintii tolkii waxa ay noqotay: tuuladiinna ka saara Luud iyo ehelkiis waayo; waa dad is daahirinaya"*

Kani waa dhaqanka bulshooyinka baaba'ay, qofkooga wanaagsan haddii ay u waayaan xumaan, wanaaggiisa ayay ku caayaan. Ehelkii Luud, faldambiyeedka ay sameeyeen waa in ay yihiin dad isdaahiriya. Waxyaabaha qaar isma dooriyaan, kuwa xumina wanaagga ayay dhibsadaan sababta oo ah; xumohooda ayuu xusuusiyaa. Sidaa darteed, gabadha xumi waxa ay jeceshahay dumarka oo dhami in ay wada sinaystaan, dhawrsoonaantana waxa ay u aragtaa dharbaaxo ku dhacaysa. Tuuggu waxa uu jecel yahay in la wada noqdo tuugo maxaa yeelay; ammaanadu dhib weyn ayay ku tahay. Laaluush qaatuhu waxa uu jecel yahay shaqaaluhu in ay wada noqdaan laaluush qaatayaal waayo; xalaashu waa ay dhibaysaa. Wiilka xumi waxa uu jecel yahay wiilasha oo dhami in ay wada xumaadaan, u samafalka waalidkuna xanuun ayuu ku yahay. Maadaama oo ay yagu nolosha ka dheceen, cidna lama jecla horumar iyo horusocod. Ha rumaysan marka ay gabadha xijaaban ku sheegayaan xagjir, run badanaha diradiraale, ka dhowrsoon fule, aamminkana doqon. ***"Wax kasta oo ay sameeyaan dadku, gorgortan ha gelinina mabda'iinna yaga ayaa idinku xushmayne."***

﴿أَنَا۠ أَكْثَرُ مِنكَ مَالًا وَأَعَزُّ نَفَرًا﴾ الكهف: 34

*"Aniga ayaa kaa adduun iyo ehelba badan"*

Alle (swt) hantida waxa uu siiyaa addoonka uu jecel yahay iyo ka uu neceb yahayba, balse diinta waxa uu siiyaa keliya ka uu jecel yahay. Hantida waxa uu siiyay Saleebaan iyo Dulqarnayn iyo Qaaruun iyo Namruud, haddii ay samaha halbeeg u ahaan lahaydna ma simeen Nebi iyo nin qooqay. Dadka waxa ugu saboolsan kuwa aan haysan wax aan hanti ahayn, kuwa aamminay in ay wax walba iibsan karaan xataa jannada, kuwa rumaysan sida ifka loogu kala hanti badan yahay in aakhirana loogu kala hodansan yahay. Hantidu nolosha ayay qayb ka tahay ee m aha noloshii oo dhan. Hantidu waa hilin ee maaha yool. Hantida marka la dhigo labada lugood hoostooda waa ay saramartaa, marka madax la saartana waa ay hoos martaa. Hantiile in aad noqoto diintaada dhib iyo dhaawactoona u gaysan mayso, arrinkan lidkiisana, hanti waxa ugu wanaagsan ta xalaasha ah ee ku jirta gacanta qofka wanaagsan.

Waxa muhiim ah hantidu in aanay ku hanan, balse ay gacantaada ku jirto. Hantidu nolosha waa ay bishaa, balse waxa ka sii bilicsan waxyaabaha aan yada lagu iibsan karin. Hantida waxa lagu gataa: *dawo, sariir, diiwaan ammaan ah, fannaanad, sheeko-faneed, goob lagu xannaaneeyo ubadka, maktabad, gaadhi, muraayad iyo guulwadayaal, laakiin laguma helo: caafimaad, hurdo, jacayl, xaas, farxad, ubad, aqoon, lugo,*

*indho iyo saaxiibbatoona.* Hantiilaha iyo saboolku waa isku hunguri, hu' iyo kabo, haba kala qaalisanaadaane. Hantidiinna u urursada; si ay idiinku adeegto, balse ha u urursanina; si aad ugu adeegtaan. Hantidiinna ka dhiga addoon iyo raace, laakiin haka dhiganina boqor iyo la caabude.

***"Hantida, noloshiinna ku haga, laakiin yaanay idin hoggaamin, ammin walbana maanka ku haya in aad haysataan wax badan oo aan la iibsan karin."***

﴿وَكَلۡبُهُم بَٰسِطٞ ذِرَاعَيۡهِ بِٱلۡوَصِيدِۚ﴾ الكهف: 18

*"Eygoodiina godka afkiisa ayuu fidiyay lugihiisa"*

Ey ayuu magaciisu ku waaray Quraanka waayo; waxa uu la socday saaxiibbo wanaagsan ee adiguna sida aad u xulato hugaaga, u dooro saaxiibkaana. Saaxiibku waa saameeye. Waa suuraggal qof aad wanaag u horseed is lahayd in uu karkaarka ku waydaariyo, haddii aanu ku beddelinna xumaan waxa kuugu filan in lagugu shaambadeeyo. Qofku waa saaxiibkii, Carabtuna waxa ay xulan jireen saaxiibka iyo deriska inta aanay socdaalin, ama degin. Saaxiibka wanaagsani waa nolol, waa ceel dheer oo aad ku aamminto sirahaaga, waa garaad bisil oo aad la tashato, waa garab adag oo aad gaashaan ka dhigato, waana gacan naxariis badan oo kaa tirtirta dhibka ku haysta. Ey ayaa sooyaalka ku waaray maxaa yeelay; saaxiibbo wanaagsan ayuu lahaa, Nibir baa Quraanka lagu xusay sababta oo ah; Yuunus (cs) ayuu xambaaray. Qudhaanjo ayaa ku caanbaxday dhoolla-caddayntii ay u samaysay Saleebaan, sidoo kalena Hud-hud ayaa Quraanka lagu soo tebiyay warkiisa waayo; dhambaal-side ayuu ahaa.

**"Waxaas oo dhan innaga ayaa ka mudan."**

﴿وَعَاشِرُوهُنَّ بِٱلۡمَعۡرُوفِۚ﴾ النساء: 19

*"Dumarkiinna kula dhaqma wanaag"*

Ereyga (same) waa uu macno ballaadhan yahay oo waxa soo gudagalaya wanaagga oo dhan. Xaaskaaga oo aad u muusooto, hadal wanaagsan oo aad ku dhahdo, laabta oo aad geliso, hadiyad aad siiso, cabashadeeda oo aad dhegaysato, caafimaadkeeda oo aad ka war hayso, ehelkeeda oo aad u ogolaato, fekerkeega oo aad xushmayso iyo doonisteeda oo aad ku garab siisaa waa wanaag iyo samafal. Hawlaha guriga oo aad ku kaalmayso, gefkeega oo aad u dul yeelato, in aad u tudho, in aad xanuunka la qaybsato iyo in aad fahanto dabeecadeheeda is-doorinnayaana waa samafal kale. Dhuux Quraanka, Alle waxa uu yidhi "wanaag kula dhaqma" ee ma odhan: "kula dhaqma dhaqankiinna" waayo; dhaqannada ummaduhu badi tuur ayay leeyihiin oo ma wada toosna. Naxariista ragga waxa disha isla-weynida, wanaag badan oo ay qaban lahaayeenna waxa dhaafisa ragannimadaada ilaasho. Dhaqankani, ninka waxa uu ka dhigaa mid qallafsan oo qoyskiisa ku maamula gacan bir ah. Qayb ka mid dhaqannadeennu waa xanuunno nafsi ah oo qofka ku ururay, kadibna dhexdeenna ka noqday wax iska caadi ah. Ragannimadu maaha hebelba sidaa ayuu sameeyay ee adna samee, laakiin waa in aad fasho sida saxda ah, xadiiskuna waa ka leh: *"midkiin yaanu noqon dameeri dhaan raacday, dadku haddii ay wanaagsanaadaan waa uu*

*wanaagsanaanayaa, haddii ay xumaadaanna waa uu xumaan."* Nebigii ragga ugu qiimaha badnaa ayaa xaasaskiisa la shaqayn jiray, gurigiisa marka uu joogo aad ayuu u dhoollacaddayn jiray, kama xishoon jirin in uu xuso jacaylka uu u hayo xaaskiisa, waana kii odhan jiray: *"tani waa gabadh jacaylkeeda la igu arsaaqay."* Sidoo kale, dardaarannadiisii ugu dambeeyay waxa ka mid ahaa: ***"dumarka wanaag u dardaarma"***

﴿وَبَدَأَ خَلْقَ ٱلْإِنسَٰنِ مِن طِينٍ﴾ السجدة: 7

*"Alle, abuurka insaanka waxa uu ka bilaabay dhoobo"*

Alle, Aadan waxa uu ka abuuray dhoobo, Xaawana feedha Aadan. Xaawa haddii ay ahayd qayb ka mid ah Aadan, isna waxa uu ahaa yada oo dhan. In kasta oo uu ninku jeclaado gabadh, waxa uu ka dhigtaa qayb ka mid ah noloshiisa maxaa yeelay; asalkiisii hore ayay qayb ka ahayd. Laakiin gabadhu marka ay jeclaato nin, waxa ay ka dhigataa nolosheeda oo dhan waayo; asalkeedii hore ayuu ahaa. Dumarka ayaa dareenka jacaylka kaga daacadsan ragga, arrinkanina labka dhaliil kuma aha, dhediggana ammaan uma aha, balse waa abuurtii asalka ahayd ee lagu abuuray; si ay u sii socoto noloshu. Asalku waa lama huraan oo Aadan waxa laga abuuray dhoobo, dhoobaduna waa meesha dhasha dhirta iyo geedaha. Sidaa darteed, ninku waxa uu qiimo ku leeyahay wax-soo-saarka.

Alle (swt) Xaawa waxa uu ka abuuray feedha Aadan ee qalbiga xigta, sidaa aawadeed xidhiidhka ka dhexeeya dumarka iyo wax-soo-saarku lama mid aha ka ragga sababta oo ah; gabadhu marka ay wax-soo-saarayso ma hirgelinayso laf ahaanteeda, ee waxa ay qabanaysaa qayb ka mid ah. Laakiin waa ay ku faraxdaa wax-soo-saarkeeda maxaa yeelay; waxa ay dherginaysaa qayb ka mid ah ciidda oo ay yaduna qayb ka sii tahay. Qabadhu, qiimeheeda waxa ay ogaataa

marka ay wax jeclaato waayo; waxa laga jaray qalbiga agtiisa. Gabadhu waxa ay is aragtaa yada oo ah: xaas dhibirsan iyo hooyo naxariis badan, sidaa darteed aabbanimada ninka waxa ka awood badan hooyanimada gabadha sababta oo ah; aabbanimadu waa qayb ka mid ah wax-soo-saarka labka ee badan, laakiin hooyanimadu waa heerka ugu sarreeya jacaylka, la'aanteedna gabadhu waxa ay dareentaa dhinnaan caadifi ah, Khalkhal ayaana ku abuurma shaqada ugu weyn ee loo abuuray.

Sidaa aawadeed, wax dhib ahi kuma jiro in ay gabadhu ninka ka kaalmayso hawlihiisa haddii aanay barabixinayn, balse waxa qalbi xanuun ah amminta uu ninku culays ku noqdo xaaskiisa, sababta oo ah; ninku waa noole ciid ah (wax-soo-saare). Laakiin gabadhu dhib uma aragto ninku in uu mas'uul ka noqdo nolosheeda oo uu siiyo waxa ay u baahan tahay waayo; dhinnaan ma dareento oo waa noole qalbi ah. Gabadha waxa waajib ku ah in ay xushmayso dedaalka saygeeda haba yaraada e waayo; waxa ay ku kaalmaynaysaa in uu guto xilka saran. Ninkana waxa laga doonayaa in uu u tudho oo u naxariisto xaaskiisa maxaa yeelay; waxa uu ku garabsiinayaa in ay gudato shaqadeeda qalbiga ah.

﴿تِلْكَ ٱلدَّارُ ٱلْـَٔاخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا ۚ وَٱلْعَٰقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ﴾ القصص: 83

*"Tani waa daarta aakhiro oo waxa iska leh kuwa aan dhulka la doonayn sarrayn iyo baabi'in, cidhibta dambena waxa ay u sugnaatay kuwa Alle ka baqda"*

Samada todobaad ayuu fantay, kadibna ka soo laabtay, haddana kabihiisa ayuu tolan jiray, laxdiisa ayuu lisan jiray, masaakiintana waa uu quudin jiray. Kani waa hanka dadka waaweyn, ammin kasta oo ay horumar sameeyaan, isdhul-dhig ayay ka dhaxlaan. Xertiisii oo gu'aansatay in ay qashaan lax ayuu ku soo baxay. Kii kowaad baa yidhi: *"aniga ayaa gawracaya."* Kii labaad baa yidhi: *"haragga ayaan ka saarayaa."* Kii seddexaad waxa uu yidhi: *"aniga ayaa hilbaha jarjaraya."* Nebiguna (NNKH) waxa uu yidhi: *"aniguna xaabada ayaan doonayaa."* Kani waa hanka dadka waaweyn oo mar kasta oo ay sameeyaan horumar, isdhul-dhig ayay ka dheefaan. Hanti badan ayuu bixiyay, sidii uu dadka u daryeelayay ayuu tiisii hilmaamay, waxaanu dhintay kiiyoo uu diriciisii u rahman yahay nin Yuhuudi ah. Kani waa hanka dadka waaweyn, waxa aan dhowrsoonaan ahaynna ma geyaan. Dadka ayuu tukiyay oo waa uu sujuudsanaa, kadib Xasan Binu Cali ayaa dhabarka ka fuulay, madaxana kor uma qaadin ilaa uu ka degayay. Mar kale, ayuu dadka tukiyay, waxa uu maqlay ilme yar oo ka ooyaya safka dumarka, salaaddii ayuu soo gaabiyay, akhriskiina waa uu soo koobay; si aanu cunugga yari u

mashquulin qalbiga hooyadii. Kani waa hanka dadka waaweyn, dunida waxa ay u joogaan sidii ay ugu naxariisan lahaayeen dadka. Saxaabadiisii ayuu u diiday in ay u istaagaan yaga oo weynaynaya, mar ayuu si kado ah u soo galay, waa ay istaageen, isna waa uu ka xumaaday. Xasaan binu Saabit[34] ayaa dareemay argagaxa ka muuqda wajigiisa, waxaanu ugu heesay:

U istaagga qaafadu[35]

Amar weeye la i faray

Faral laga il duufana

Isir umay lahayn gobi!

Waxse ila ah amakaag

Nin caqliyo dhugma lahoo

Arkay quruxdan oon kicin![36]

Nebigu waa uu dhoollacaddeeyay, kadibna raallin ayuu noqday. Kani waa hanka iyo dhaqanka dadka waaweyn, haddii loo cudurdaartana waa ay qaataan.

---

[34] **Xasaan binu Saabit**: waxa uu ahaa gabyaagii Rasuulka (SCW).
[35] **Qaafo**: inta talada maamulka haysa, madax, ama waayeel.
[36] Gabaygan oo Afcarabi ahaa, waxa bededelay Cabdijaliil Muhandis.

*"WAXBA KUMA JABNA QOFKU IN UU U SHAQAYSTO ADDUUNKIISA, BALSE YAANU ILLAAWIN AAKHIRADIISA. DHIB KUMA JIRO QOFKU IN UU QURXISTO GURIGIISA, LAAKIIN YAANU HILMAAMIN QABRIGIISA!"*

﴿مَن كَانَ يَرْجُوا۟ لِقَآءَ ٱللَّهِ فَإِنَّ أَجَلَ ٱللَّهِ لَءَاتٍ ۚ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ﴾ العنكبوت: 5

*"Qofka filaya la kulanka Alle, ballankiisu waa mid imanaya, Allena waa mid maqal iyo aqoon badan"*

Waxa uu dejinayaa qalbiyada kuwa jecel. Waxa uu ugu laab qaboojinayaa la kulankiisa. Niyadda ayuu u dhisayaa oo waxa uu u sahlayaa waxyaabaha baqdin geliya dadka, waxa aanad mooddaa in uu ku leeyahay *"wax aan geeri ahayn inna kala kaxayn maayo."* Hadalkan macnihiisu waxa uu yahay; insaanku Mu'min noqon maayo haddii aanu jeclaan dhimashada. Jacaylka noloshu waa baahi bashar, Gaalka iyo Mu'minkuna waa ay ka wada siman yihiin. Caa'isha ayaa weydiisay Nebiga hadalka uu Alle ku yidhi: *"waxa ay kahdeen la kulanka Ilaahay, isna waa uu kahday la kulankooda"*, waxa aanay ku tidhi: *(oo kaayagee ayaa geerida jecel?)*

Nebigu (NNKH) waxa uu ku yidhi: *"sida aad moodday maaha Caa'ishaay."* Waxa kale, oo uu uga warramay qofku in uu arko booska uu ku leeyahay naarta iyo jannadda inta aanay naftu ka bixin. Gaalku marka uu arko halka sugaysa ayuu kahdaa la kulanka Ilaahay, Allena isaga ayaa ka sii kahasho badan.

﴿فَكَيۡفَ إِذَا جِئۡنَا مِن كُلِّ أُمَّةِۭ بِشَهِيدٖ وَجِئۡنَا بِكَ عَلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ شَهِيدٗا﴾ النساء: 41

*"Xaalku sidee ayuu noqonayaa marka aannu u keenno ummad walba markhaatigeedii, adigana aannu ku keenno adiga oo ku markhaati furaya kuwan!"*

Markhaatiga ugu weyn, arrinka ugu culus, maxkamadda ugu sarraysa iyo garsooraha ugu caddaaladda badan. Kani waa arrinka jiraalka weyn oo ah in Ilaahay loo keli yeelo rabbinimada iyo cibaadada. Isla arrinkan dartii ayaa lo abuuray cirarka iyo dhulka. Isaga dirtii ayaa Rususha loo soo diray, kutubta loo soo dejiyay, loo taagay beegagga, loona diyaariyay xisaabta, waana sababta jiraalka Jinka iyo Insiga. Ilaahay waxa uu yidhi: *"Jinka iyo Insiga uma aan abuurin wax aan ka ahayn cibaado."*

Naxariista Alle, waxa ka mid ah in uu ka dhigay cibaado nolosha ku dhisan daacaddiisa. Quudka xalaashii waa cibaado, afgelinta uu ninku siiyo xaaskiisu waa cibaado, u samafalka derisku waa cibaado, jidka oo dhibka laga qaadaa waa sadaqo, walaalkaa oo aad u dhoolla-caddaysaa waa sadaqo, afadaada oo aad u galmootaana waa sadaqo. Saxaabada oo la yaabay qodobkan u dambeeya ayaa weydiiyay Nebiga: *"midkayo haddii uu baahidiisa guto, abaal ma ku leeyahay?"* Nebigu waxa uu ku yidhi: *"ka warramaha haddii uu ku gudan lahaa meel xaaraan ah, dambi ma loo qori*

*lahaa? Sidan waxa la mid ah marka uu ku guto meel habboon oo waxa uu ka helayaa abaal."*

## Markhaatiga ugu weyn!

Rasuulku (NNKH) waxa uu ku yidhi Ibnu Mascuud: "*korkayga ku akhri.*" Ibnu Mascuud baa ugu warceliyay: "*ergeygii Ilaahayow, ma adiga oo uu kugu soo degay ayaan kugu akhriyaa?*" Nebigu waxa uu ku yidhi: "*waxa aan jecelahay in aan ka maqlo cid aan aniga ahayn*" Ibnu Mascuud ayaa ku akhriyay suuradda Al-Nisaa, markii uu gaadhay aayadda sare ayay indhihii suubbanuhu ilmo burqadeen, waxaanu ku yidhi Ibnu Mascuud: "*bes*". Rasuul kastaa maxkamdda weyn waxa uu uu kaga markhaati kacayaa in uu dadka gaadhsiiyay farriintii loo soo dhiibay, markhaatiga ugu weynna waxa uu ka imanayaa makhluuqa ugu weyn, uguna qiimaha iyo qaayaha sarreeya oo odhanaya: "*Eebbow, waa ay gaadhsiiyeen,*" Maxaa ka weyn! Kani waa hadal sharafeed, balse dhaqankiisa suubban dartii, waxa uu u qaatay hadal-hawleed. Waxa uu dareemay weynida hadalkan, kadibna waa uu ooyay.

## Maxkamadda ugu sarraysa!

Halkan, jidhadhka ayaa ku hadlaya wixii ay dareemeen, indhaha ayaa ka sheegaya wixii ay arkeen, lugaha ayaa ka

markhaatiga kacaya wixii ay u socdeen, gacmuhuna waxa ay qiranayaan wixii ay taabteen. Halkan ayaa lagu kala qaadanayaa xuquuqaha. Ma jiro qareen wax is-daba-marin karayaa, mana jiro kiis racfaan laga qaadan karayaa. Halkan ayaa qof kasta lagu siinayaa waxa uu xaq u leeyahay, lagagana qaadayaa waxa xaq loogu leeyahay.

***"Maxkmaddu soo xidhmi mayso ilaa laxda seenyada ah looga xaqo ta geesaha leh."***

## Garsooraha ugu sarreeya!

Xisaabiyuhu waa abuuraha cirarka iyo dhulka. Ma jiro qof, haddii uu jirana Rabbigii ayay si toos ah u wada hadlayaan, waxaanu ku odhanayaa: *"akhriso kitaabkaaga, isaga ayaa maanta kuugu filan xisaabiye e."*

***"Maanta aynu sii qoranno dhigaal aynu ku faraxno barri marka aynu ka hor akhriyayno Ilaahay (swt)."***

﴿وَمَا يَعْلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَ﴾ المدثر، الآية: 31

*"Rabbigaa ciidamadiisa isaga uun baa og"*

Biyo ayuu ugu aarguday Nuux. Dab ayuu ku sugay runnimada Ibraahin. nibiri ayuu ku ilaaliyay Yuunus. Rah, injir iyo dhiig ayuu ku difaacay Muuse. Caaro ayuu ku qariyay Muxammad. Badda ayuu ku baabi'iyay Fircoon. Kaneeco ayuu ku dulleeyay Namruud. Jiir ayuu ku dumiyay biyo-xidheenkii Saba, sidoo kalena aboor aan la arkayn ayaa cunay heshiiskii ay Qureyshi ka soo laalaadisay kacbada dhexdeeda.

Irridaha Maka in uu galo waxa diiday Maroodigii xabashida, markii aanu jirin qof ciidankii Abraha ka ilaaliya xaramkana, Alle ayaa ilaashaday. Ciidankii Abraha iyo guriga Ilaahay ayaa la isku daayay. Cabdilmudalib meel fog ayuu istaagay, seeftiisii ayuu galka geliyay, waxaanu yidhi: *"Allahayow, addoonku isaga ayaa ilaashada gurigiisa ee adna kaaga ilaasho. Allahayow, yaanay kaa guulaysan Gaaladu, haddii aad u kala tegayso yaga iyo qibladayadana amar wixii kuu muuqda."* Ilaahay (swt) ayaa aqbalay baryadiisii, waxaanu u soo diray kooxo shimbiro ah. Xumaan waxa ka hufan Allaha dagaal galiya biyaha, dabka, kaneecada, ayaxa, injirta, raha, kalluunka, jiirka iyo shimbiraha koox kooxda ah.

***"Kownkan oo dhami waa ciidankiisa, wax walba oo ku dhex suganna waa askartiisa. Makhluuqa ugu liita ayuu ku jabiyaa cadowgiisa, kuwa isla weynna hal amar ayuu cagta mariyaa."***

﴿قَالَتْ فَذَٰلِكُنَّ ٱلَّذِى لُمْتُنَّنِى فِيهِ ۖ وَلَقَدْ رَٰوَدتُّهُۥ عَن نَّفْسِهِۦ فَٱسْتَعْصَمَ ۖ وَلَئِن لَّمْ يَفْعَلْ مَآ ءَامُرُهُۥ لَيُسْجَنَنَّ وَلَيَكُونًا مِّنَ ٱلصَّٰغِرِينَ﴾

يوسف: 32

*"Waxa ay tidhi: kani waa wixii aad igu eedaynayseen, dhab ahaantii aniga ayaa doonay oo waa uu is ilaaliyay, haddii aanu samayn waxa aan farayna waa la xidhi oo waxa uu ka mid noqon kuwa la dulleeyay"*

Laba dumar ah oo u dhashay Masar ayay guryohooda ku kala koreen laba Nebi. Gabadha hore waa Suleekha -xaaskii boqorkii Masar- waxa qasrigeeda ku koray Nebi Yuusuf, gabadha labaadna waa Aasiya -xaaskii Fircoon- qasrigeedana waxa ku barbaaray Nebi Muuse. Labadan dumarka ahi waxa ay wadaagaan magaca, mansabka iyo maamuuska, sidoo kalena waxa ay ku kala duwan yihiin Alle ka cabsiga, iimaanka iyo samafalka. Suleekha waxa ay ahayd xaaskii boqorkii Masar oo ahaa ninkii labaad ee dawladda ugu sarreeyay marka la fiiriyo nidaamkii Faraacinada, sidoo kalena Aasiya waxa ay ahayd marwadii qaranka iyo xaaskii Ilaaha marka la fiiriyo diintii Faraacinada. Halkaa waxa aynu ka fahmaynaa Aasiya ayaa ka xil sarraysay Suleekha haba noolaadaan laba wakhti oo kala foge waayo; Yuusuf iyo Muuse boqolaal sannadood ayaa u dhexeeyay.

Labadan Nebi waxa ay ku soo hanaqaadeen laba qasri, ilaa ay rag ka noqonayeenna halkaa ayay joogeen. Suleekha ninkeeda ayaa hadiyad ahaan u siiyay Yuusuf isaga oo aan gaadhin toban jir, Aasiyina Muuse ayay gacanta ku haysay laga soo bilaabo maalinkii uu dhashay ee Ilaahay faray in sanduuq lagu rido, kadibna lagu tuuro badda. Hooyanimadii Suleekha waxa madaxmartay baahidii

dumarnimo oo Yuusuf ayay u hunguraysay sida ninkeeda o kale. Aasiyana hooyaniamdii ayaa ka xoog badatay oo Muuse waxa ay ka yeeshay sidii hooyo ilmeheeda ka yeeli jirtay oo kale. Suleekha, Yuusuf xabsi ayay ku hubsatay, balse Aasiya Muuse waxa ay u diidday in la gawraco. Suleekha adduunyo ayay dooratay, laakiin Aasiya aakhiro ayay doorbidday. Suleekha, Yuusuf ayay rumaysay ammintii ay duqowday, indha beeshay, hantidii iyo boqortinimadiina wayday, laakiin Aasiya hore ayay ka rumaysay oo ka raacday Muuse. Suleekha iyo ninkeedii waxa kala irdheeyay baahi dumar, laakiin Aasiya iyo odaygeedii waxa kala kexeeyay iimaan.

Suleekha ninkeedii waxa uu dhintay isaga oo u cadhaysan, laakiin Aasiya waxa ay dhimatay isaga oo Rabbigeed raalli ka ah. Aasiya waxa ay aammisanayd guusha iyo sharaftu in ay ku jiraan aakhiro, sidaa darteed ayay ugu ducaysan jirtay: *"Allahayow, jannada iiga dhis guri."* Markii uu Fircoon ogaaday iimaankeeda ayuu deldelay, ifkana waxa ay sagootisay yada oo dhoolla-caddaynaysa waayo; waxa ay arkaysay hoygeeda jannada. Hantidu ma biiso insaanka, baahiduna ma suubbiso, muhiimadduna maaha ayuu la nool yahay, balse waa sidee ayuu u nool yahay. Gabadhii uu ninkeedu yidhi: *"waxa aan ahay Rabbigiinna ugu sarreeya"*, hadh iyo habeenba waa ay sujuudaysay yada oo leh: *"xumaan waxa ka hufan Rabbigayga sarreeya."*

***"Muhiim maaha halka uu insaanku ku nool yahay, balse waxa muhiim ah sida uu u nool yahay. Aasiya waxa ay ku nooladay qarsigii madaxtooyada, se qalbigeedu waxa uu ku xidhnaa gurigeeda jannada."***

﴿هُوَ ٱلَّذِى يُصَوِّرُكُمْ فِى ٱلْأَرْحَامِ كَيْفَ يَشَآءُ﴾ عمران: 6

*"Alle, waa ka uurka dhexdiisa idiinku qaabaynaya sida uu doono"*

Ilaahay, quruxda waxa uu u qaybiyay sida uu u qaybiyay quudka oo kale. Qofka uu qurux siiyay waa dheeraad xaggiisa ka ahaaday, ka aanu siinna uma waayin ee isaga ayaa sidaa u gartay. Wax kastaa qorshe iyo qayb ayay ku sargo'an yihiin, quruxduna waa sidan oo kale. Midka uu siiyay qurux waa qayb yar oo ka mid ah halabuurkiisa cajiibka ah, ka uu u diidayna kama aha tamardarro ee sidaa ayuu u qoray. Quruxdaadu haddii ay ku cajabisay, xusuuso maalin maalmaha ka mid ah in uu dhulka ku noolaa nin Ilaahay siiyay qurux oo idil ilaa ay dumarkii arkay faraha is jareen, Suleekha oo keliyii haddii ay is jari lahaydna, waxa ay noqon lahayd gabadh nin jeclaatay.

In kasta oo ay quruxdu tahay shay aan la isku raacsanayn, haddana hal nin la toosan ayaa mid kale tuur la leh, waxa aad adigu qurux u aragtana qof kale ayuu la foolxun yahay. Guud ahaan, dumarkii Yuusuf arkay faraha ayay is jareen yaga oo aan isdareensanayn, arrinkani waxa uu ka dhigan yahay in ay isku raaceen quruxdiisa. Yuusuf quruxlow ayuu ahaa ilaa su'aal la geliyay dadnimadiisa oo waa kuwii dumarku lahaa: *"Kani ma aha bashar!"* Waxa isweydiin mudan: Yuusuf quruxdii muxuu ku sameeyay? Yusuuf, Ilaahay waxa uu iskugu daray qurux qalbi iyo mid jidh. Isaga oo maxbuus ah ayaa laga codsaday in uu fasiro riyo waayo; waxa uu ka mid ahaa samafalayaasha, mar kalena isaga oo boqor ha ayaa la waydiistay sadaqo maxaa

yeelay; isma beddelin ee ammin kasta waxa uu ahaa samafale.

Maalmaha iyo mansabku ma doorin ee isaga oo boqor ah ayuu kormeerayay beeraha, dhisayayna kaydadka qamandiga; si uu dadka ugu kaydiyo wax-soo-saarka. Sidoo kale, waxa uu tunka u ritay quudinta ummad ay todoba sannadood ku habsatay abaar darani. Tani waa quruxda dhabta ah. Naxariista Ilaahay waxa ka mid ah in uu dadka siiyay dookhyo kala duwan, wax kasta oo foolxunna qof ayaa u arka qurux. Gabadh iska caadi ah, ayaa nin ugu muuqanaysa qalanjo aanu jirin wax loo dhigaa, sidoo kalena nin uu Alle iskugu haybad iyo qurux, ayay gabadhi quudhsanaysaa. Waxa jira arrin lagu magacaabo ka helid, kala duwanaashu haddii aanu jiri lahaynna, waxba lama kala gateen.

﴿وَلَقَدۡ نَعۡلَمُ أَنَّكَ يَضِيقُ صَدۡرُكَ بِمَا يَقُولُونَ﴾ الحجر: 97

*"Dhab ahaantii, waxa aanu ognahay in uu ku dhibayo hadalkoogu"*

Sida ay seeftu u xanuujiso qofka, si la mid ah waxa u damqa hadalka xun. Sidoo kale, sida uu qofku ugu farxo hadiyadda, si lamid ah ayuu ugu farxaa hadalka wanaagsan. Nebiga waxyi baa ku soo degay oo Jibriil ayaa u yimid, waxa uu ka qaaday Madiina oo geeyay Qudus; si uu halkaa ugu tukiyo Nebiyada, ulana wareego hoggaaminta caalamka. Intaa kadib, waxa uu tegay samada todobaad, waxa uu gaadhay Sidratu Muntaha, ugu dambayntiina waxa uu cago dhigtay meel aanay hore u gaadhin Nebi la soo diray iyo Malagtoona. Nebiga, Alle waxa uu siiyay wabiga Kawsar, magaciisana waxa uu ku xidhay magaciisa, haddana waa uu dhibsan jiray ereyga xun. Nebi Muxammad haddii uu sidan ahaa, maxaad u malaynaysaa dadka caadiga ahna?

Hadalku waxa uu ka kooban yahay laba dhinac: *nuxurka uu koobsanayo iyo hab-dhiciisa.* Hadalku nuxurka uu kooban yahay haddii uu sax yahay, adigu si sillan ha u odhan, mar kastana maanka ku hay kii yidhi: *"anigu waxa aan ahay Ilaahiinna ugu sarreeya"*, ayuu Alle u soo diray Nebi; si uu ugu yidhaahdo hadal dabacsan. Dhanka kale, haddii uu xun yahay hab-dhaca hadalku, laba xumaanood iskugu kaa iman maayaan: *nuxur xun iyo hab-dhac sillani.* Ka fiirso hadalkaaga inta aanad odhan. Haddii uu kula qummanaado, dadkana waa uu la samaan, haddii uu tuur kula yeeshana, dadkana waa uu la xumaan. Xumo oo dhami waxa uu ka dhashaa hadal xun, suuraggalna maaha arrimaha wanaagsan in lagu

gaadho hab liita. Si aad wanaag u hesho, fadlan hadalkaaga wanaaji. Ma jiro baaq ka weyn mid Nebi, haddana Alle waxa uu ku yidhi: *"haddii aad ahaan lahayd mid qalbi qallafsan, hareerahaaga waa ay ka tegi lahaayeen"*

﴿إِنَّ ٱلۡمُنَٰفِقِينَ فِي ٱلدَّرۡكِ ٱلۡأَسۡفَلِ مِنَ ٱلنَّارِ وَلَن تَجِدَ لَهُمۡ نَصِيرًا﴾ النساء: 145

*"Munaafiqiintu waxa ay gelayaan halka ugu hoosaysa naarta, una heli maysid cid u gargaarta."*

Gaalnimada cad ayaa ka wanaagsan iimaanka bugta ah, mid kastaana dhib ayuu leeyahay. Munaafaqnimadu haddii aanay ka dambi badnayn Gaalnimada cad, hoyga Munaafiqiinta Alle kama dhigeen meesha ugu hoosaysa naarta. Sida laga fahmayo hab-dhaca aayaddan, Carabtu dhaqan uma lahaan jirin munaafaqadda laba sababoodba:

1- Qureyshi waxa ay ahayd Carab dhalad ah oo ku caan baxday aftahamo, hadal qummanaan iyo abtirsiin sare. Carabtu dhaqanno badan oo xun waa ay lahaayeen, balse laguma aqoon fulaynimo. Dhaqanka laba wajiilayntu waxa uu ka soo shaacbaxay magaalada Madiina maxaa yeelay; waxa ku wada noolaa dadyow kala abtirsiin iyo diimo duwan. Waxa kale oo ku wada noolaa garabyo isku herdinayay hoggaaminta shacabka. Madiina waxa ay ahayd magaalo ay ku wada degan yihiin shucuub u halgamaysa jiritaankooda oo jecelayd ismuujinta. Waxa loollan adag ku wada jiray *Aws, Khasraj, Yuhuudda* iyo *Kiristaanka*, waxaana ka dhalatay in ay isku mari waayeen maamulka magaalada.
***"Siyaasaddu waa jaad ka mid ah laba wajiilaynta."***

2- Qureyshi arrinkan dhaqan uma lahayn oo waxa ay ku naaloonaysay deganaasho siyaasadeed, xilalkana waxa ay ku qaybsan jirtay hannaan qabali ah. Qodobkani aragtidayda kama fududa kii hore. Wakhtigii Maka, Islaamku waa uu taagdarraa oo cadaadis ba'an ayaa lagu hayay, awoodda iyo

hoggaankana Qureysh ayaa gacanta ku haysay, laakiin xilligii Madiina, wax badan baa isbeddelay oo hoggaanku waxa uu gacanta u galay Muslimiinta. Sidaa darteed, qabiilladii reer Madiina laba qodob ayaa la gudboonaa: in ay muujistaan Gaalnimada oo shacabka dhan ka raacaan, iyo in ay ku dhaqmaan dhaqanka liita ee laba wajiilaynta, waana sidii dhacday. In ay nidaamka ka hor yimaaddaan oo cagta la mariyo iyo in ay islaamnimo muujistaan oo Muslimiinta isaga dhex noolaadaan.

***"Insaanku ma qariyo waxa uu aammisan yahay, haddii aanu baqayn, asalkuna waa in ay dhacdooyinku muujiyaan aamminaadaha dadka."***

﴿وَإِذْ أَخَذَ رَبُّكَ مِنۢ بَنِىٓ ءَادَمَ مِن ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَأَشْهَدَهُمْ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْ ۖ قَالُوا۟ بَلَىٰ ۛ شَهِدْنَآ ۛ أَن تَقُولُوا۟ يَوْمَ ٱلْقِيَـٰمَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَـٰذَا غَـٰفِلِينَ﴾ الأعراف: 172

*"Xus markii uu Alle Aadan dhabrkiisa ka soo saaray tafiirtiisa, nafohoodana markhaati geliyay isaga oo ku leh: Rabbigiin miyaanan ahayn? Waxa ay yidhaahdeen: haa. Alle waxa uu yidhi: sidaa waxa aan u sameeyay; si aydaan maalinka qiyaamaha u odhan: warkaa ma aannu hayn."*

Akhris iyo dhegaysi badan oo aan sameeyay, waxa aan ogaaday dadku in ay marayaan heerar toban ah:

1- **Heerkii jiraal la'aanta:** heerkan waxa ka siman noolyaasha oo dhan, waxaana jirtay mar uu Alle keli ahaa.

2- **Heerkii abuurkii Aadan:** Alle (swt) dhoobada ayuu faray in ay noqoto insaan toosan, waanay ahaatay.

3- **Heerkii abuurka Xaawa:** Alle (swt) Xaawa ayuu ka abuuray feedha Aadan; si ay iskugu weheshadaan habkan cajiibka ah ee keensanaya sii jiritaanka insaanka.

4- **Heerkii heshiiska:** waa heerka ay ka hadlayso aayaddani. Alle ayaa masaxay dhabarka Aadan, waxa ka soo baxay ubadkiisa oo leh qaab qudhaanjo yar, kadib waxa uu markhaati geliyay kelinimadiisa, haddana sidoodii ayuu ku celiyay; si uu mid walba u dhasho wakhtigiisa.

5- **Heerkii nolosha jannada:** Aadan iyo Xaawa, Alle waxa uu siiyay nolol ta ugu wanaagsan. Waxa uu u banneeyay dhirtii jannada hale geed mooyaane. Ibliis baa waswaasiyay

oo geedkii ayay cuneen, waana sababta dhulka loo soo dejiyay.

**6- Heerkii hanashada dhulka:** heerkani waxa uu fidsan yahay laga bilaabo Aadan iyo Xaawa, ilaa marka la afuufayo siidhiga hore.

**7- Heerka nolosha qabriga:** waa nolosha ruuxda oo ka bilaabanta marka ay qofka naftu ka baxdo, ilaa uu Israafiil afuufo siidhiga labaad, dadkuna ay u kacayaan xisaabta.

**8- Heerka dhimashada guud:** heerkani waxa uu u dhexeeyaa labada siidhi, Eebbena dadka waa uu wada dilayaa inta uu doono.

**9- Heerka is-xisaabinta:** waa qiyaamaha, halbeegyada ayaa la taagayaa, maxkamadda ayaa la isa-saarayaa, dadkana waxa xisaabinaya garsooraha cirarka iyo dhulka.

**10- Heerka nolosha waaritaanka:** marxaladdan waxa lagu kala aroorayaa janno iyo naar.

**Maxaynu ka baranaynaa aayaddan?**

1- Tawxiidku waa arrinka ugu weyn kownkan. Waa isla arrinka loo abuuray Jinka iyo Insiga, loo soo diray Rusuha, loo soo dejiyay kutubta, halbeegyada loo taagayo, qoraallada loo faafinayo, sidoo kalena loo sameeyay janno iyo naar. Waa arrin uu Alle ka istaagay meel adag oo aan aqbalayn gorgortan. Isaga dartii ayaa dadka hal meel la iskugu keenay, kadibna ballan adag lagaga qaaday in uu isagu yahay: *keli, abuurohooda, quudiyohooda, nooleeyohooda iyo dilohoogaba.*

Intaa kadib, Alle ayaa soo ururinaya addoomaha; si uu u arko waxa ay faleen iyo sida ay uga soo bexeen ballankii.

2- Markii uu Alle soo ururiyay dadka, ugama warramin quud, ubad iyo ajashooda waayo; intaba isaga ayaa haya. Laakiin waxa uu kala hadlay keliyayntiisa oo ah shaqada laga doonayo dadka oo dhan.

3- Ruuxda insaanka oo dhan, hal mar ayuu Alle abuuray, agtiisa ayuu ku dhawray, amminta uu doono in uu bashar ka dhigana Malaga ayuu faraa oo ku afuufa jidh, kadibana waxa uu qoraa quudkiisa, ajashiisa iyo masiirkiisa danbe.

4- Alle (swt) jidh kasta waxa uu u abuuray ruux keliya oo uu weheshado inta u dhexaysa maalinka lagu afuufo ilaa maalinka uu dhimanayo.

5- Ruuxdu uma dhammaato sida jidhku oo kale, inta aan jidhka lagu afuufin caalam kale ayay ku ilaashanayd, geerida kadibna janno, ama naar ayay ku waaridoontaa. Aragtida soo laabashada ruuxdu waa khuraafaad iyo fahan gurracan. In la aamminaana waa gaalnimo cad oo ka hor imanaysa Quraanka, sunnada saxda ah iyo aamminadda Muslimiinta.

6- Ilxaadku waa moodo. Haa, waa habka ay u dhaqmaan kuwa doonaya in ay ka xoroobaan awood oo dhan xataa ta weyn ee jirsiisay. Naf kastaa maalin ayay qirtay jiraalka Alle iyo kelinimadiisa. Laakiin markii ay timid ifkan ayay ka baxday ballankii ay hore u gashay. Tawxiidku waa baahi bashar, naftan taagta daranna waxa ay qiraysaa in ay jirto awood ka weyn oo wadda kownka, isla markaana maamusha. Kuwa bukaan socodka ah, nafohoodu raalli kuma ay noqon qadarka oo waxa ay doorteen huga Alle-

diidka; si ay u muujiyaan xorriyaddooda, balse tawxiidku waa baahi bashar. Alle-diidnimadu waa baahiyo iskugu dhafan xanuun iyo habow. Kuwii caabuday sanamyadu, waxa ay u caabudeen; si ay u buuxiyaan baahida insaanka, Laakiin tubta toosan ayay baalmareen.

Kuwii inanta qalanjada ah ku tuuri jiray wabiga Niil marka uu istaago, waxa ay naxariis weydiisan jireen awood ay og yihiin in ay biyaha dhaqaajinayso, balse intii ay Alle baryi lahaayeen ayay sabab la yimaaddeen.

7- Guud ahaan, casharrada hore waxa aynu kala soo dhex baxaynaa in uu Alle ruuxda iyo jidhka mid kasta iskii u abuuray. Haddaba, suuraggal ma tahay in aanu xidhiidh ka dhaxayn labadooda. Warcelinta waa maya. Waxa jira xidhiidh kakan oo ka dhexeeya ruuxda iyo jidhka, waxaana saamayn ku leh hadba heerka uu marayo insaanku. Tusaale: heerkii heshiiska, ruuxda iyo jidhka xidhiidh kama dhaxayn waayo; in la xidhiidhiyo laba arrimood oo aan midkoodna jirin maangal maaha. Xidhiidhka ka dhexeeya ruuxda iyo jidhka inta aynu joogno ifku, waa mid iska cad oo aynu ka dareenno nolol maalmeedkeenna, dhibka iyo dheeftuna si isku mid ah ayay u taabtaan ruuxda iyo jidhka. Tusaale: marka aynu ku jirno jawi deggan, cunto macaan haysanno, sidoo kalena ay innala joogaan dadka inna jeceli, jidhka ayaa raaxaysta, ruuxduna nafis ayay ku jirtaa oo isaga ayay raace u tahay.

Dhanka kale, haddii aynu culays saarno qof oo aynu beerka u dhigno bataax kulul, jidhka ayaynu cadaabaynaa, ruuxduna waa ay la dareemaysaa waayo; waxa ay leeyihiin xidhiidh xooggan. Xidhiidhka ka dhexeeya ruuxda iyo

jidhka ee heerka qabrigu waa uu jiraa, laakiin waxa uu liddi ku yahay ka adduunyada sababta oo ah; dhibka iyo dheefta ay helayso ruuxdu ayuu jidhkuna la wadaagayaa. Xidhiidhka ka dhexeeya jidhka iyo ruuxda ee heerka aakhiro, waa uu is le'eg yahay, xaqiiqadana Alle ayaa u ogaansho badan.

﴿ٱتَّخَذُوٓاْ أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَٰنَهُمْ أَرْبَابًا مِّن دُونِ ٱللَّهِ وَٱلْمَسِيحَ ٱبْنَ مَرْيَمَ وَمَآ أُمِرُوٓاْ إِلَّا لِيَعْبُدُوٓاْ إِلَٰهًا وَٰحِدًا ۖ لَّآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ عَمَّا يُشْرِكُونَ﴾ التوبة: 31

*"Yuhuudda iyo Kiristaanku, culimadoodii iyo suufiyadoodii ayay ka dhigteen Ilaahyo. Masiix ina Maryamana Ilaah ayay ka dhigteen, lamana farin waxa aan ka ahayn in ay caabudaan Alle oo keliya. Xumaan oo idil Ilaahay ayaa ka hufan, sidoo kalena waxa uu ka dheer yahay waxa ay la wadaajinayaan"*

Cadiyi binu Xaatim Al-Daa'i waxa uu haystay diinta Kiristaanka. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu u yimid Nebiga isaga oo qoorta ku xidhnaa macatab lacag ah, kadibna waxa uu maqlay suubbanaha oo akhriyaya aayadda sare. Cadiyi, Nebiga ayuu ku yidhi: *"wadaaddada ma aanu caabud jirin."* Nebiga ayaa ku yidhi: *"xalaasha sow idinkama xaaraamayn jirin, sidoo kalena xaaraanta idiinma xalaalayn jirin?"* Cadiyi: *"haa."* Nebigu waxa uu ugu warceliyay: *"taasi waa cibaadadooda."*

Kani waa nas Quraan ah oo ballaadhinaya goobada wadaajinta (shirkiga) iyo tafsiir Nebi oo innooga warramaya shirkigu in uu ka gudaballaadhan yahay kii aynu hore u barannay ee ahaa in la samaysto sanamyo Alle lala wadaajinayo. Jaadkani waa qayb ka mid ah shirkiga, laakiin maaha shirkigii oo dhan, naskanina waa mid macno ballaadhan oo laga qaadanayo casharro door ah.

**Maxaynu ka baranaynaa aayaddan?**

1- Xaqa ayaa lagu bartaa ragga, ee ragga laguma barto xaqa, jidkuna sax ku noqon maayo in ay mareen kuwa aynu jecel nahay, se waa in uu waafaqo shareecada Islaamka.

2- Islaamku ma aqbalayo in lala wadaago sharciyaynta. Alle ammintii uu soo diray suubbanihiisa, waxa uu soo raaciyay diin kala hagaysa arrimaha adduunyada; si ay u hagaagto aakhiradu. Quraanku waa dastuur ee maaha aayado lagu akhriyo meytida; si looga barakaysto, ama keliya la khatimo ramadaanta, balse waa nidaam dhammaystiran oo kala hagaya nolosha oo dhan. Waa nidaam siyaasi ah oo madaynaya mas'uuliyadaha madaxweynaha, hannaanka lagu gaadho kursiga iyo arrimaha lagu waayo.

Quraanku waxa uu hagayaa xidhiidhka ka dhexeeya madaxda iyo shacabka iyo xidhiidhada guud ee dhex mara Muslimiinta iyo ummadaha kale maxaa yeelay; waxa uu og yahay Muslimiintu in aanay ku noolayn jasiirad geri go'an ah. Qur'aanku waa nidaam bulsho oo kala hagaya arrimaha qoyska, xidhiidhka deriska, xuquuqda jidka iyo xuquuqaha dhex yaalla dadka. Islaamku waa nidaam dhaqaale oo diidaya dulsaarka, banneeyay ganacsiga, qaybiyay dhaxalka, sidoo kalena tilmaamay xaqa uu hoggaamiyuhu ku leeyahay hantida ummadda iyo ka ay dadweynuhu ku leeyihiin. Islaamku waa nidaam wax ciqaaba, ugu horrayn waxa uu inna faray cafiska, waxa uu boorriyay dhaqanka suubban, waxa uu awday irridaha xumaanta, intaa kadibna cidda xumaan fasha waxa uu ku waajibiyay ciqaabo ay ka mid yihiin: *gacma-goyn, dhagxin iyo jeedalid.* Diinta Islaamku dambiilaha waxa ay ku waajibisay ciqaab; si ay u hagaagto

bulshadu, sooyaalkana laga soo bilaabo Aadan ilaa maanta lama arag bulsho hanaqaaday xeer lá'aan.

3- Sharcigu haddii uu xaaraan xalaaleeyo waa xaaraan, haddii uu xalaal xaaraantimeeyana waa xalaal. Islaamka lalama wadaago sharciyaynta, qofka xaq aanu lahayn sharci darro ku qaataana qiyaamaha ayuu iman isaga oo tuug ah.

4- Waxa waajib ah in aanad ku dhicin gefkii ay ku dheceen Yuhuudda iyo Kiristaanku. Xaraantu waa waxa ay diintu xaaraantimays, ee wadaad shuqul kuma laha, xalaashuna waa waxa uu sharcigu xalaaleeyay ee maaha waxa uu wadaad xalaaleeyay. Xushmaynta culimadu waa waajib, balse in gef lagu raacaa inna badbaadin mayso.

﴿وَإِذِ ٱعۡتَزَلۡتُمُوهُمۡ وَمَا يَعۡبُدُونَ إِلَّا ٱللَّهَ فَأۡوُۥٓاْ إِلَى ٱلۡكَهۡفِ يَنشُرۡ لَكُمۡ رَبُّكُم مِّن رَّحۡمَتِهِۦ وَيُهَيِّئۡ لَكُم مِّنۡ أَمۡرِكُم مِّرۡفَقٗا﴾ الكهف: 16

*"Markii aad ka durkayseen tolkiin iyo wixii ay caabudayeen Alle sokadii. Gala godka, Rabbigiin waxa uu idiin fidin naxariistiisa, arrinkiinana w aa uu idiin sahliye."*

Diintan arrinkeedu waa layaab. Qalbiyada raggu marka ay qallalaan, Alle waxa uu u dabciyaa qalbiyada dhagaxda. Qalbiyadu marka ay qallalaan ee ay noqdaan dhagax oo kale, ama wax ka sii adag, Alle naxariistiisa ayuu ku shubaa dhagaxaanta, kadib waxa ay noqdaan sida dadka, ama waa ay ka sii naxariis bataan. Dhalinyartii godka, suufiga ku jira sheekada dabka iyo Muxammadba god ayay magan galeen. Markii ay dadku garabohooga ka bexeen, dhagaxaan ayaa soo dhowaysay. Insaanku halka uu diin ka helayo ayaa hoy u ah, waddankuna haddii uu ka qaalisanaan lahaa diinta, dhalinyartii godku kama tageen tolkood, mana galeen god. Waddanku haddii uu ka qiimo badan yahay diinta, Nebigu kama tageen Maka. Rasuulku inta uu istaagay Maka dusheed ayuu yidhi: *"Ilaah baan ku dhaartaye dhulka adaan kuu jecelahay, haddii aan tolkaa iga kaa saarinna kaama bexeen."* Nebiga laguma saarin waxa aan diin ahayn, waana kuwii u soo bandhigay boqortinimada, madaxtinimada, hantida iyo haweenka. Isna waa kii adeerkii ku yidhi: *"adeerow, Ilaah baan ku dhaartaye qorraxda haddii ay dhigaan midigtayda, dayaxana bidixday; si aan uga tago diinta, ka yeeli maayo, xalkuna lama mid ayuu noqon: ama guul adduun, ama geeri aakhiro."* ***"Raggu wixii ay dhibsadeen, waxa soo dhoweeyay godka Qaaru Sawr."***

﴿وَقِيلَ يَٰٓأَرۡضُ ٱبۡلَعِي مَآءَكِ وَيَٰسَمَآءُ أَقۡلِعِي وَغِيضَ ٱلۡمَآءُ وَقُضِيَ ٱلۡأَمۡرُ وَٱسۡتَوَتۡ عَلَى ٱلۡجُودِيِّۖ وَقِيلَ بُعۡدٗا لِّلۡقَوۡمِ ٱلظَّٰلِمِينَ﴾ هود: 44

*"Dhulka waxa lagu yidhi: liq biyahaaga, cirkana hayso, biyihii waa ay gudheen, arrinkana waa la gooyay, doontii waxa ay dul istaagtay buurta juudi, waxaana la yidhi: fogaansho ayaa u sugnaaday dulmifalayaasha."*

Sheekada ugu gaaban, uguna xeesha dheer sooyaalka insaanku waxa ay isku darsatay hab-dhac bilan iyo soo koobis xiiso leh. Sheekadan cabsida badan, haddii la odhan lahaa af ha qoro sidan ayuu qori lahaa: cir da'aya bilaa daal, dhul burqanaya bilaa hawl iyo doonni lagu sameeyay lama degaan oo dul sabbaynaysa mowjad buuro la moodo oo sida mustaqbalka caalamka oo iskugu jira: Mu'miniin kooban iyo xayawaan walba laba lammaane oo ka mid ah. Dad baa baaba'aya, badh baa badbaadaya, dhulkuna waxa uu iska maydhayaa wasakhdii lagu dul sameeyay. Haddii uu qof soo warin lahaa waxa la odhan lahaa: waa uu ku talaxtegay, laakiin Quraan ayaa soo wariyay. Sidan ayuu Alle warka u soo koobaa.

Falka "قيل": in kasta oo ay ahayd goob guul lagu hantay, haddana lama xusin ciddii tidhi. Cidda guushan weyn gaadhay xaq ayay u lahayd in ay ku faanto, balse waa Alle (swt). Dhacdadan weyn iyo aargudashadan culus, Alle kuma faanin waayo; arrinkiisu waxa uu u dhexeeyaa Kaaf iyo Nuun "كن". Kaaf iyo Nuun ayuu dhul biyo ku harqiyaa, ku kalana ku qallaliyaa.

Soo koobis kale oo qurux badan ayaa ah "وقضي الأمر": dhacdadani waxa ay u baahan tahay faahfaahinta iyo faanka ay isla dhex maraan guulaystayaashu, laakiin Alle uma baahna in uu ka warramo awooddiisa iyo sidii uu u halaagay Gaaladii. Kani waa nas Quraan ah oo ka sharaf badan in uu ku digto Gaaladii in kasta oo ay u qalmaan. Alle (swt) waxa uu inna barayaa hankeenna ugu weyni in uu noqdo hiigsiga himiladeenna iyo sidoo kale in aynaan fiirin hareeraha ee aynu hore u soconno.

﴿كُتِبَ عَلَيْكُمُ ٱلْقِتَالُ وَهُوَ كُرْهٌ لَّكُمْ وَعَسَىٰٓ أَن تَكْرَهُوا۟ شَيْـًٔا وَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ وَعَسَىٰٓ أَن تُحِبُّوا۟ شَيْـًٔا وَهُوَ شَرٌّ لَّكُمْ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ﴾

**البقرة: 162**

*"Jihaadka ayaa la idinku waajibiyay idinka oo kahanaya, waxa xaqiiqo ah shay aad nacdeen in uu wanaag idiin leeyahay, sidoo kalena waxa dhacda wax aad jeceshihiin in uu shar idiin leeyahay. Ilaahay waxa uu og yahay wax aydaan ogayn"*

Jihaadku waa cibaado la mid ah soonka iyo salaadda. Sida aan Alle u aqbalayn haddii aan loola iman sida uu faray ayaanu u aqbalay jihaadkana. Haddii uu qof tukado salaad duhur shan rakcadood isaga oo ku marmarsoonaya jacaylka Alle iyo ka Nebigiisa, waxa aynu ku odhan: salaaddaadu sax maaha waayo; jacaylka Alle waxa lagu gaadhaa in aad u tukato sida uu kaaga warramay Nebigiisu. Haddii uu qof bisha ramadaan soomo afartan maalmood, waxa aynu ku odhan: Alle waxba ku fali maayo adiga iyo cibaadadaada. Sidan waxa la mid ah; cibaado walba oo aynu gudanayno, sidii aynu hore u soo xusnayna jihaadku waa cibaado.

Qofka diintan ugu jihaada wax aanay farin, jihaadkiisu wax ka soo qaad malaha. Sida aanu Alle u yeelayn salaadda duhur in la tukado shan rakcadood, qofka sidaa falana abaal daaye uu u ciqaabayo, waxa la mid ah dhiig walba oo lagu daadiyay magaca jihaadka ciddii doontaa ha daadisee. Jihaadku waxa uu saamayn ku leeyahay dhiigga, hantida iyo sharafta dadka; sidaa aawadeed waa cibaadooyinka ugu badan ee inta aan la gudagelin u baahan barasho iyo fahan dheeraad ah. Jihaadka ku dhisan aqoon la'aantu, muhaajidiinta waxa uu ka dhigaa dhiigyo cabyo iyo

mooryaan jidadka fadhiista waayo; aragtida uu ku dhisan yahay waa mid ku timid isku day shakhsi ah iyo ku dayashada cadowga, Islaamkuna maalinna uma baahan cid u yeedhisa waxa uu falayo iyo sida uu u falayatoona.

Wadiiqooyinka sillani kuma gaadhsiiyaan yoolal saxan, xaaladda jihaadka ee aynu maanta aragnaana waa mid aad looga xumaado. Intii aanu bilaabin waxa loo yaqaanno jihaadka casriga ah, Muslimiinta waxa aynu uga baqanaynay dadyow kale, balse maanta waxa aynu uga baqaynaa isla kuwa aammisan. Sidiinna oo kale ayaannu u jecel nahay Alle iyo rasuulkiisa, sidoo kalena Islaamka aad doonaysaan ayaannu u raadinaynaa, laakiin idinku halkii aad xal ka keeni lahaydeen ayaad Muslimiinta u soo jiidaysaan dhiigyo-cabyo ka halis badan kuwii hore. Dulmifale waa dulmifale uun cidda uu doono ha ahaado e, mana doonayno dambiile gaal ah in aannu ku beddelno mid tukada. Dambiile oo dhami waa iskugu kaaya mid diinta uu doono ha haysto e.

Beenin mayno halgankiinna, laakiin waxa aannu isweydiinay: ma Islaamka ayaa aad difaacaysaan, mise isaga ayaa aad duullaan ku tihiin? Waayo waxa aannu qabnaa Rabbiga soo diray Nebigii ciidankiisa u dardaarmaayy: "*ha jarina geed, ha duminina dhisme, mid aammin ah ha baqa gelininna, sidoo kalena la dagaallama keliya cidda idinla dagaallanta*", in aanu aqbalayn waxa aad falaysaan maanta.

﴿قَالُوٓاْ إِن يَسۡرِقۡ فَقَدۡ سَرَقَ أَخٞ لَّهُۥ مِن قَبۡلُۚ فَأَسَرَّهَا يُوسُفُ فِي نَفۡسِهِۦ
وَلَمۡ يُبۡدِهَا لَهُمۡۚ قَالَ أَنتُمۡ شَرّٞ مَّكَانٗاۖ وَٱللَّهُ أَعۡلَمُ بِمَا تَصِفُونَ﴾ يوسف: 77

*"Waxa ay yidhaahdeen: haddii uu wax xaday, walaalkii ayaa hore wax u xaday, Yuusuf waxba uma muujin ee waa uu is qariyay oo waxa uu yidhi: idinka ayaa ka shar badan, Alle ayaana u ogaal badan waxa aad tilmaamaysaan."*

Noloshii Yuusuf iyo khamiiska xidhiidh xooggan ayaa ka dhexeeyay. Khamiis loo adeegsaday been, khamiis loo adeegsaday bariyeelid iyo khamiis loo adeegsaday dawo. Beentu waa markii ay walaalihii ku tureen ceelkii, khamiiskiisii ayay ku shubeen dhiig laxeed, waxa aanay u tegeen aabbohood Yacquub; si ay ugu qanciyaan in uu Yuusuf cunay Yey oo aanay yagu dambi ku lahayn. Waxa ay hilmaameen in ay jarjaraan khamiiska, dhaqanka Yeygana waxa ka mid ah; in uu qofka ku dul jeexjeexo maryaha. Bariyeeliddu waa xilligii uu Yuusuf ka cararay Suleekha. Waa ay soo jidatay oo khamiiskiisii xagga dambe ka jeexday. Boqorkii markii uu soo galay gurigiisa, waxa uu ku wareeray dambiiluhu ma Yuusuf baa, mise waa xaaskiisa? Alle, waxa uu ka hadashiiyay ilme yar oo naaska nuugayay, kaas oo ay Suleekha ehel ahaayeen. Ilmihii yaraa, boqorka waxa uu faray in uu fiiriyo khamiiska, haddii uu xagga hore ka jeexan yahay Yuusuf baa weerar ahaa, Suleekhina waa ay iska difaacaysay. Haddii uu xagga dambe ka jeexan yahayna, yada ayaa weerar ahayd, isna waa uu ka cararayay. Milaygii la fiiriyay, waxa la ogaaday Yuusuf in aanu dambiile ahayn. Dawadu waa ammintii ay ilma Yacquub ka soo laabteen

Masar yaga oo aan wadan walaalkood Baniyaamiin waayo; Yuusuf ayaa kala hadhay. Yacquub waxa uu bilaabay oohin, ilaa uu ka indha beelay, ugu danbayntiina Yuusuf ayaa u soo diray khamiiskiisii. Markii uu Yacquub foolkiisa saaray, araggii ayuu Alle u soo celiyay. Kuwani waa sheekooyinka seddexda khamiis, laakiin aayadda sare waxa ku soo arooray khamiis afraad. Khamiiskan ma lahayn Yuusuf ee waxa lahaa awowgii Isxaaq, isna meel ayay iska soo galeen.

Yuusuf waxa uu ahaa rajay ay hooyadii xijaabatay isaga oo aad u yar. Hooyadii waxa ay umul aroortay markii ay umulaysay walaalkii Baniyaamiin, Eebbena waxa uu doonay in uu siiyo beddel khayr qaba oo waxa aad u jeclayd eddadii Faa'iqa, taas oo aan ogolaan jirin in uu ka maqnaado agteeda. Eddadii si ay u haysato Yuusuf, waxa ay degtay kaarto. Faa'iqa waxa ay haysan jirtay khamiiskii aabbeheed Isxaaq, Yuusufna waa uu soo buuqan jiray madaama oo ay deris ahaayeen. Haddaba, markii la gaadhay wakhtigii uu laabanayay, ayay hoosta uga xidhay khamiiskii aabbeheed. Goortii ay gurigooda ku soo celisay ayay dadkii u sheegtay in ay weyday khamiiskii aabbeheed Isxaaq, waxaana la bilaabay in la raadiyo. Dhaqankii reer Kancaan waxa ka mid ahaa; qofka wax xada ee lagu helo wixii uu xaday in uu addoon u noqdo ka uu wax ka xaday mudd laba sano ah. Khamiiskii waxa laga helay Yuusuf, Faa'iqana waxa ay ku adkaysatay in xeerka lagu fuliyo, sidaas ayaanay laba sannadood ku haysatay yada oo aad u xannaanaynaysay, tanina waa sababtii ay walaalihii u lahaayeen: *"haddii uu wax xaday, walaalkii ayaa hore u xaday"*

**Maxaynu ka baranaynaa sheekadan?**

1- Insaanku ma arko xumaantiisa ee waxa u muuqata ta walaalihii. Waa rag, walaalkooda yar ayay shirqoolayaan, balse walaalkood kale ayaa ka hor istaagay in ay dilaan, waxaanu ku yidhi: halkii aad ka dili lahaydeen fogeeya ninka. Qorshihii dilka waxa ay ku beddesheen in ay ceel guntii ku ridaan; si ay u helaan socotadu, kadibna ula tagaan meel fog. Waxa ay hilmaameen shirqoolkii, ceelkii ay ku rideen, beentii ay aabbohood u sheegeen iyo dhibkii iyo dhalanteedkii soo gaadhay aabbohood, balse waxa ay maanka ku hayeen dambigii Yuusuf lagu wanjalay waagii uu yaraa. Dadku waa sidan oo xumohooda waa ay hilmaamaan, balse adiga ku illaawi maayaan; sidaa darteed naftaada boro oo yaga waxba haka sugin.

2- *"Yuusuf waa uu is qabtay."* Carabtu hore ayay u tidhi: *"haldoorka bulshadu waa qofka wax ismoogaysiiya."* Haddaba, si aad ugu noolaato wanaag, iska dhig dhegoole. Runta haddii aad ku dedaasho waa lagaa carari. Isdhegamarintu maaha dhaqan munaafaq ee waa dhaqankii iyo akhlaaqdii Nebiyada. Yuusuf ayaa is dhegamariyay, Muxammadna waxa uu yidhi: *"dad baanu u qosolnaa, tiiyoo ay qalbiyadayadu nacdalayaan."* Dhacdadan aad u dhuux. Wakhtiyada qaar waxa lama huraan ah in aad dadka iswajahdaan, sidoo kalena waxa wanaagsan in aad isdhegamariso. Haddii aan la isdhegamarin, socon mayso noloshu.

﴿وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنْ خَلَقَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَٰجًا لِّتَسْكُنُوٓا۟ إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ﴾

الروم: 21

*"Aayadaha Alle waxa ka mid ah; in uu nafihiina u abuuray lammaane; si aad ugu degtaan, sidoo kale dhexdiina waxa uu dhigay kalgacal iyo naxariis, arrinkanna waxa wax ku qaadanaya duul fekeraya"*

Midkiin ma isweydiiyay: muxuu Alle, Xaawa uga abuuray feedha Aadan isaga oo ka abuuri karayay ciid ka madax bannaan? Sababtu waxa ay tahay; asalkii abuurku waa uu jirayaa, haba yeesho humaag kale e. Malaa'igta waxa lagu abuuray daacad, xataa haddii ay samayn karayaan xumaan, balse waligood xumaan lama ay iman waayo; asalka iftiinku waa khayr. Jinku wanaag waa uu samayn karaa, balse xumaanta ayaa ka xoog badatay maxaa yeelay; asalka dabku waa shar marka laga reebo in yar oo aynu ka faa'iidaysanno. Alle waxa uu ka abuuray Xaawa feedha Aadan; si ay u yeelato dhaqankii abuurta. Xaawa waxa looga abuuray feedha Aadan; si ay u dareento in ay qayb ka tahay Aadan iyo si uu isna u dareemo in ay Xaawi tahay qaybtii. Kani waa farshaxanka abuuraha iyo habka cajiibka ah ee ay isku soo jiitaan labada jinsi; si ay u sii jirto noloshu.

Dhuux xeeldheerida Quraanka *"si aad ugu xasishaan."* Sababta gabadha looga abuuray feedha ninku waa in ay isweheshadaan. Alle (swt) ma odhan: *"si aad ugu ag xasishaan"* waayo; guurku waa uu ka gudaballaadhan yahay keliya in lagu midoobo guriga, lammaanahana waxa kulmiya wax ka badan hunguri iyo hoy.

*"Si aad ugu xasishaan"*, waxa laga wadaa: si aad uga dhigataan guryo guryo kale ka hooseeya waayo; sida uu ninku gurigiisa uga dhigto meel uu isku asturo ayay xaaskiisuna ugu tahay hu' asturaya. Sida uu ninku gurigiisa ugu raaxaysto ayuu ugu raaxaystaa xaaskiisa. Markii Alle ka buuray Xaawa feedha Aadan, asal ahaan waxa uu ka dhigay qayb ka mid ah, abuurtana waxa ka dhalanaysa in ay labada shay u wada dhaqmaan sida laba is leh oo aan kala maarmin.

Ninku, xaaskiisa waxa uu u ilaaliyaa sida uu u dhawro labadiisa indhood oo aanu la'aantood socon karayn, gabadh la'aanteedna ninku wax ka soo qaad malaha. Dhanka kale, markii uu Alle, gabadha ka abuuray ninka, waxa uu uga dan lahaa in ay macaansato u iilaalashadiisa iyo baahida ay u qabto. Gabadha waxa aad mooddaa sidii qof muddo dheer ka maqnaa dhulkiisa, ama sida uu agoonku ugu boholyoobo aabbihii. Ilaahay (swt) ayaa u abuuray ragga iyo dumarka habkan u kafaala qaadaya in uu mid kastaa raalli ku ahaado ka kale waxa uu samaynayo. Ninku waa in uu jeclaadaa qaybtan dabacsan ee ka midka ah, gabadhuna waa in ay jeclaato asalkan ay ku abtirsato.

﴿قَالُوا حَرِّقُوهُ وَانصُرُوا آلِهَتَكُمْ إِن كُنتُمْ فَاعِلِينَ﴾ الأنبياء: 68

*"Waxa ay yidhaahdeen: haddii aad waxa samaynaysaan, guba Ibraahin oo u hiiliya ilaahyadiinna."*

Aayaddani waxa ay ka hadlaysaa markii uu Nebi Ibraahin burburiyay ilaahydii tolkii. Sheekadani waa caan oo waxba kaga noqon maayno, balse aynu ka istaagno dhanka luuqadda, gaar ahaanna falka "حرق."

Alle, muxuu u yidhi: "حرقوه" ee uu u odhan waayay: "أحرقوه"? labadan erey miyaanay isku macno iyo nuxur ahayn?

Warcelintu waa maya. aqoonyahanka ku takhasusay Afcarabigu waxa ay isku raacsan yihiin xeerka odhanaya: *"kala duwanaashe kasta oo xagga xuruufta ahi, waxa uu keenaa in uu macnuhuna kala duwanaado."* Haddaba, ma jiraan laba oo weedhood oo %100 isku macno ah, haba aynu u malaynu in ay isku mid yihiine. Ereyada isku macnaha ah waxa loo keena; si loo soo dhaweeyo macnaha iyo fahanka naska, laakiin ma jiraan laba erey oo isku mid ahi.

Haddaba, waa maxay macnaha labadan fal ee kala ah: "حرقوه" iyo "أحرقوه"?

Falka "حرقوه": waa in walax dab lagu shido; si loo dhammeeyo, ama loo baabi'iyo, halka uu falka "أحرقوه": ka yahay in la dulleeyo walaxda la gubayo. Dabkuna waxa uu ka mid yahay waxyaabaha wax lagu dulleeyo, waana isla sidii ay Ibraahin la damacsanaayeen tolkii. Ibraahin, tolkii haddii ay doonayeen keliya in ay dilaan, waxan oo xaabo ah ma soo

urursadeen. Xaabo badan ayay ka soo ururiyeen doox fog, maalmo badanna waxa ay ku bixiyeen sidii ay bulshada oo dhami u soo ururin lahayd.

Mufasirka Al-Musdi waxa uu xusay: gabadha bugta ayaa ku nadri jirtay haddii aan bogsado xaabo ayaan ka soo guridoonaa dooxa Al-Macda; si loogu gubo Ibraahin. Waxyaabaha inna tusaya weynidii dabkan waxa ka mid ah; Ibraahin markii lagu tuurayay waxa lagu qaaday *manjaniiq*[37] waayo; suuraggal ma ahayn in ay yagu ku tuuraan. Kani waa macnaha "التحريق" oo ah; dullayn. Sidoo kale, Quraanka waxa ku soo aroortay aayad kale oo inna tusaysa macnaha falkan in laga wado dullayn. Muuse markii uu ka soo laabtay la kulankii Alle, waxa uu arkay tolkii oo dul yuurura dibi ay caabudayaan, kaas oo uu Saamiri uga sameeyay dahabkii iyo agabkii ay isku qurxin jireen dumarku.

Muuse waxa uu ku yidhi:

﴿وَٱنظُرۡ إِلَىٰٓ إِلَٰهِكَ ٱلَّذِي ظَلۡتَ عَلَيۡهِ عَاكِفٗاۖ لَّنُحَرِّقَنَّهُۥ ثُمَّ لَنَنسِفَنَّهُۥ فِي ٱلۡيَمِّ نَسۡفًا﴾

Falka ku xusan aayaddani waa "حرق" ee maaha "أحرق." Muuse waxa ku filnayd in uu burburiyo dibigan, waana isla sidii uu Muxammad (NNKH) ku sameeyay sanamyadii Qureysheed maalinkii furashada Maka. Laakiin waxa uu adeegsaday "حرق"; si uu u tuso liidnimada waxa ay caabudayaan. Muuse, hore ayuu tolkii ugu warramay in uu

---

[37] **Manjaniiq (Mangonel):** waa hub waayadii hore loo adeegsan jiray go'doominta magaalooyinka, dhufaysyada iyo ciidamada, waana agab lagu tuuro dhagaxaan holcaysa.

Alle yahay casiis, balse dibiga waxa uu u gubay; si uu u dulleeyo wixii ay casiiska ka dhigeen. Dibigu waa ma noole, laakiin gubiddiisu waxa ay ka dhignayd xeerka odhanaya: "*waxa aad fashaa lagugu fali.*" Haddaba, maadaama oo ay qiimo u yeeleen dibiga, Muuse ayaa doonay in uu tuso qiimo la'aantiisa.

***"Baraha ay ku wada xidhiidhaan bulshadu, haddii aanad ku faafinayn wanaag kuu sii soconaya, fadlan ha kaga tegin xumaan kuu sii socota dhimashadaada kadib"***

﴿قَالَ فَمَا خَطْبُكَ يَٰسَٰمِرِيُّ ﴿٩٥﴾ قَالَ بَصُرْتُ بِمَا لَمْ يَبْصُرُواْ بِهِۦ فَقَبَضْتُ
قَبْضَةً مِّنْ أَثَرِ ٱلرَّسُولِ فَنَبَذْتُهَا وَكَذَٰلِكَ سَوَّلَتْ لِي نَفْسِي ﴿٩٦﴾ قَالَ فَٱذْهَبْ
فَإِنَّ لَكَ فِي ٱلْحَيَوٰةِ أَن تَقُولَ لَا مِسَاسَ ۖ وَإِنَّ لَكَ مَوْعِدًا لَّن تُخْلَفَهُۥ ۖ وَٱنظُرْ إِلَىٰٓ
إِلَٰهِكَ ٱلَّذِي ظَلْتَ عَلَيْهِ عَاكِفًا ۖ لَّنُحَرِّقَنَّهُۥ ثُمَّ لَنَنسِفَنَّهُۥ فِي ٱلْيَمِّ نَسْفًا ﴿٩٧﴾﴾

طه: 95-97

*"Muuse waxa uu yidhi: Saamiriyow, falkan maxaa kugu kallifay? Saamiri waxa uu ugu warceliyay: wax aanay arag baan arkay, waxa aan soo qaatay cantoobo ka mid ah raadkii rasuulka, waan tuuray, sidaas ayaanay ii qurxisay naftaydu. Muuse waxa uu yidhi: tag, inta aad nooshahay waxa kuu sugnaaday in aad tidhaahdo: yaan la i taaban, sidoo kalena waxa kuu sugnaaday ballan aanad ka dib dhacayn, fiiri ilaahaaga aad dul yuururto, waanu gubi, kadibna badda ku tuuri."*

Aayadahani waxa ay ka mid yihiin kuwa ugu layaabka badan ee ku jira Quraanka kariimaka ah dhisme ahaan iyo macne ahaanba, Quraankuna waa wada layaab marka la fiiriyo dhinacyada: *luuqadda, hab-dhaca ereyada iyo macnihiisa mar la aragga ah.* Sidee ayaanu Quraanku cajiib u ahayn kiiyoo hadalka dadka badhkii uu qalbiyada hanto sida uu xusay Nebigu (NNKH) milyagii uu maqlay doodda Sarbaraqaan binu Cadiyi oo difaacaya naftiisa, waana kii yidhi: "*hadalka badhkii waa sixir.*" Hadalka dadku haddii uu sidaa yahay, maxaa aad u malaynaysaa hadalka Allaha dadka abuurayna? Saamiriga Quraanka lagu xusay muran ayaa ka taagan cidda uu yahay, mufasiriintuna waa ay isku

maandhaafeen, balse fekerka aan u bogay akhris badan kadib waa kan:

Saamiri waa Muuse binu Dafar oo ka dhashay qabiil reer Banii Israa'iil ah oo lagu magacaabo Saamira. Ninkan qabiilkiisa ayaa loogu abtiriyaa oo waxa uu caan ku noqday magaca reerkiisa, waana arrin iska caadi ah oo Abu Bakar, Jaaxid iyo Mutanabi, waxa ay ka caansan yihiin Cabdillaahi binu Quxaafa, Camar binu Maxbuub iyo Cali binu Xuseen, sidoo kalena waxa la mid ah Acshaa, Shanfari, Akhdalu iyo Abii Tamaam. Saamiri, da' ahaan Muuse ayay isku dhowaayeen oo waxa uu dhashay waagii uu Fircoon wiilasha dili jiray, hablahana dayn jiray.

Dumarka uurka leh marka ay fooshu qabato waxa ay aadi jireen buuraha iyo godadka; si ay ugu soo umulaan. Haddii ay umulaan gabdho, waa ay soo qaadan jireen, haddii uu wiil noqdana halkaa ayay kaga iman jireen waayo; waxa ugaadhsanayay Fircoon iyo ciidamadiisa. Wiilasha goobtan lagaga tago quudintooda iyo barbaarintoodaba Alle waxa uu u wakiishay Jibriil, Saamirina waxa uu ka mid ahaa dhallaankaas, waana sababtii uu barigii dambe u gartay raadka faraska Jibriil oo ah ka lagu xusay Quraanka. Muuse hooyadii maxaa ay ugu umuli weyday buuraha iyo godadka sidii dumarkii kale? Warcelintu waxa ay tahay: Alle waxa uu qoray wiilkan yari in uu hoggaamiyo halganka lagu ridayo Fircoon, haddii uu Alle arin qorana waxa uu u diyaariyaa sababaha hirgelinaya, waana ciidan ka mid ah kuwa Alle oo uu arrimaha ku hirgeliyo.

Maalmo ayaa isdaba maray, Muuse waxa uu ku koray qasrigii Fircoon, Saamirina meel ka fog. Ammintii ay

gaadhay bixitaankii reer Banii Israa'iil, Saamiri waxa uu la baxay tolkii. Markii uu Fircoon dabagalay reer banii Israa'iil, Muusena ushisii ku kala jeexay badda, reer banii Israa'iilna ay tallaabeen, ayuu Fircoon isku soo qaaday badda. Jibriil oo fuushan faraskiisa *Xaysuum* ayaa u dhexeeyay Muuse iyo Fircoon, deedna niistii uu ku istaagay faraskiisu ayaa dhaqaaq samaysay sidii oo naf lagu abuuray. Tani waa barakada Jibriil maxaa yeelay; marar badan ayuu Alle ku tilmaamay Al-Ruux. Saamiri waxa uu gartay Jibriil maxaa yeelay; hore ayuu u arki jiray barigii uu dhallaanka ahaa, Reer Banii Israa'iilna ma daymoon waayo; wax aqoon ah uma ay lahayn. Alle waxa uu yidhi:

*"Saamir waxa uu yidhi: waxa aan arkay wax aanay arkin"*

Guntii iyo gunaanadkii Saamiri waxa uu soo qaatay niistii dhaqaaqa samaynaysay. Markii ay reer Banii Israa'iil ka soo badbaadeen baddii, Fircoon iyo ciddii la socotayna hiilfaha lo qaaday, ayuu Muuse u baxay la kulankii Alle, tolkiina waxa uu kaga sii tegay walaalkii Haaruun. Saamiri, waxa uu bilaabay in uu soo ururiyo agabkii isqurxinta ee ay dumarka reer banii Israa'iil ka soo ergisan jireen dumarkii reer Masar, waxaanu ku yidhi: *"dahabkani waa idinka xaaraan."* Dahabkii ayuu soo ururiyay oo dhalaaliyay, waxa uu ka sameeyay dibi, kadibna waxa uu ku saydhiyay ciddii uu soo qaatay. Dibigii ayaa bilaabay ci' iyo dhaqdhaqaaq, Saamirina dadkii waxa uu faray in ay caabudaan oo badi waa ay maqleen marka laga reebo Haaruun iyo koox yar. Milaygii uu Muuse soo laabtay, dibigii inta uu qaaday ayuu gubay, dadkiina waxa uu faray in ay faraha ka qaadaan. Alle waxa yidhi: *"Saamirow, waxa kuu sugnaatay in aad dhahdo: ha i taabanina"*

## Maxaynu ka baranaynaa sheekadan?

1- Muusihii uu Fircoon barbaariyay waxa uu noqday Nebi, halka kii uu Jibriil barbaariyayna ka caabuday dibi. Sirtu bilowga maaha ee waa dhammaadka.

2- Waxa uu Alle qoray, waa uu dhacayaa oo ma jiro shay joogin karaya, ama leexin karayaa. Fircoon, kumanaan wiil ayuu u gawracay; si uu u ilaashado boqortinimadiisa, balse kii baabi'in lahaa ayuu ku korsaday qasrigiisa.

3- Qalbiyadu waa ciidan ka mid ah kuwa Alle oo waa uu sugaa; si uu ugu fuliyo qorshayaashiisa, sidoo kalena waa uu jilciyaa; si uu ugu socodsiiyo doonistiisa. Qalbigii Muuse hooyadii ayuu sugay; si ay badda ugu tuurto, kii Aasiyana waa uu jilciyay; si ay u ilaaliso, una barbaariso. Alle, Muuse hooyo ayuu ka qaaday, tu kalena waa uu siiyay.

4- Gaalnimada Saamiri wax lala yaabo maaha waayo; guri Mu'min ayuu ka soo baxay Gaal sidii ina Nuux, guri Gaalna Nebi baa ku dhashay sidii Ibraahin. Xaaska yaa Gaalad noqon karta sidii xaasaskii Nuux iyo Luud. Alle, Aasiya ayuu guri uga dhisay jannada, xaaskeediina waxa uu lahaa: *"anigu waxaan ahay Rabbigiina ugu sarreeya"*

5- Siinta addoomuhu ma gaadho ta Alle. Insaanka uu Ilaahay (swt) wax siiyay waa uu ka gaaloobay, sanamyo ayuu la wadaajiyay, uma keliyeelin cibaadada, xadiiskuna waa kii ahaa: *"aniga iyo Jinka iyo Insiga war weyn baa iskugu kaaya hadhay, waa aan abuuray oo qayrkay ayuu caabudayaa, waa aan quudinayaa oo cid kale ayuu u mahadcelinayaa."*

6 Dadku waa ay illow badan yihiin. Reer banii israa'iil, Alle waxa uu ka badbaadiyay Fircoon, cadowgoodiina waa uu baabi'iyay, isla markii ay bannaanka u bixeenna dibi ayay caabudeen. Dadku haddii ay sidan Alle ula dhaqmayaan, dhexdoodana maxaa aad ka filaysaa? Wanaagga samee ehel baad u tahaye, balse dadka waxba haka sugin.

Qofka garaadka badani abaal ma sugo waayo; waxa uu og yahay in aan Alle waxba dayicin. Haddii uu qof wanaag kuu sameeyo oo aad u abaal gudiwaydo, waxa ku filan in aanad hilmaamin. Caaqnimadu aad ayay u xanuun badan tahay. In kasta oo uu Ilaahay (swt) ka cadhoodo ka gaaloobidda nimcooyinkiisa iyo qaarinta samihiisa isaga oo dadka ka maarma, haddana dadka ayaa ka mudan cadhada; waayo waa ay isku baahan yihiin.

﴿ نَحۡنُ نَقُصُّ عَلَيۡكَ أَحۡسَنَ ٱلۡقَصَصِ بِمَآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ هَٰذَا ٱلۡقُرۡءَانَ وَإِن كُنتَ مِن قَبۡلِهِۦ لَمِنَ ٱلۡغَٰفِلِينَ ﴾ يوسف: 3

*"Annagu waxaannu kaaga sheekaynaynaa sheekooyinka kuwooda ugu fiican oo aan kuugu sheegayno Quraankan aan ku waxyoonayno-aadba isaga ka hor ka mid ahaatid inta mooggane"*

Aayaddani waxay ku jirtaa bilowga suuradda Yuusuf, suuradda Yuusufna marka lagu eego xagal-suugaaneed waa figta ugu sarraysa ee qisooyinka Quraanka, haddii ay noqon lahayd falkinta qisada bilaabanaysa ka hor inta aanay shaqsiyaadka sheekadu ku aadin kaalmaha ay kaga jiraan dhismaha sheekada, ama haddii ay noqoto dhanka isdhammaystirka shaqsiyaadka gundhigga u ah iyo kuwa faraca ah ilaa xad ay suuragal tahay in tilmaamahooda oo dhan lagu guudyeelo shaqsiyaadka sheekhooyinka Quraanka oo dhan iyo haddii ay ahaan lahayd dhanka kala duwanaanshaha dhinacyada weriyayaasha iyo waqtiyada kala geddisan, ama shakhsiyaadka, ama waqtiga iyo goobta; oo ay dhammaan intaasna weheliso indhadaraandarka aftahamada iyo gundheerida farriimaha ay siddo, laakiin waxa aynu halkan kaga hadlaynaa waa shakhsiyaadka.

Shakhsiyaadka ku jira suuradda Yuusuf waxa ay u qaybsamaan kuwo farac ah iyo kuwo asaas ah si la mid ah badi suuradaha Quranka, waxa aynu caadaysannay in marka aynu akhrinayno shakhsiyaadka Quraanka ku jira aan ula dhaqanno sidii shaqsiyaad cad iyo dhiig ah, oo waxa aynu ismoogaysiinnaa wixii ay shaqsiyaadkaasi huwanaayeen ee

ay u taagnaayeen ee ahayd wax ka durugsan addoonimadooda. Waxa ay shakhsiyaadkani xambaarsan yihiin jihayn ka ballaadhan iyo bayaan ka gundheer qalfoofta dadnimada ee aynu ku xirayno. Quraanku marka uu inooga sheekaynayo Yuusuf waxa uu doonayaa in aan fahanno astaanta uu Yuusuf metalayo ee uu u taagan yahay. Sidan ayaan u arkaa in dhammaan shakhsiyaadka Quraanka ku jira, kuwooda san iyo kuwooda xunba ay yihiin isu tagga astaamo, tusaalayn iyo qiyam. Mar walba waxa sheekada looga jeedo maaha shakhsiyaadka laftooda ee waa waxa ay u taagan yihiin iyo waxa ay tusinayaan. Yuusuf waxa uu u taagan yahay dhawrsanida, Suleekhana waxay u taagan tahay baahida nafta. Sida dhabta ah, kani waa waxa uu doonayo in uu Quraanku inooga sheekeeyo; waa legdanka dhawrsanida iyo baahida nafta!

Kani waa waxa inoo sharraxaya in uu Alle Quraanka inooga sheegay labaatan iyo shan nebi ayada oo sida xadiisyada saxiixa ah ku soo arooray ay tiradoodu kor u dhaafayso boqol kun; kuwa uusan inooga warramin shakhsiyaddooda aadannimo waxa uu inooga warramay astaamahooda oo ay khasab tahay in laga helayo shakhsiyaad uu inooga warramay; halkan waxa soo galaya Icjaaskii sookoobidda. Waxa Yuusuf ku dabbaqmaya ee dhawrsanidaa iyo waxa Suleekho ku dabbaqmaya ee shahwada ah, waxa ay sidoo kale u gudbaysaa shakhsiyaadka kale oo Yacquub waxa ku beegmaya Aabbannimo, walaalaha Yuusuf xaasidnimo, Akhnaatoon xukunka iyo boqortooyada, haweenka saaxiibbada xun, Casiis qof farabadan, ninka oorida la-taliye, nuunnaha maragfurka xaqa ah, labada maxbuusna waa dadweyne. Sidaa darteed

ayuu Ibraahin ahaa Muuse, Namruudna Fircoon, Raha, Ayaxa, Injirta, Dhiigga, Usha, Maroodiga, shimbirihii kooxaha ah, dameerkii Casiis ay ahaayeen Ciidammada Eebbe, Qaaruunna waxa uu ahaa lammaanaha maalka iyo taliska. Intaa oo dhan marka laga yimaado, waxaa jirta in shakhsiyaadka noocyadoodu kala duwanaadaan ayada oo ay astaan isku mid ah u taagan yihiin oo Qudhaanjadii tolkeeda uga baqday in ciidankii Saleebaan ay ku durduriyaan ayaga oo mooggan waxa ay isku wax u taagan yihiin kii koonaha magaalada ka yimid asaga oo rooraya ee warkiisa lagu sheegay suuradda Yaasiin.

﴿وَلَمَّا سَكَتَ عَن مُّوسَى ٱلْغَضَبُ أَخَذَ ٱلْأَلْوَاحَ﴾ الأعراف: 154

1- Haka filan dadku in ay noqdaan Malaa'ig waayo; nebi la soo diray oo ka mid ahaa xulkii rususha ee shanta ahaa ayaa cadhooday oo tuuray looxyadiisii waayo; waa insaan.

2- Gobtu waxa ay u degdegtaa hagaajinta wixii ay xumaysay, kanina waa Muuse oo qaadanaya looxyadii uu tuuray. Marka aad gefto cudurdaar bixi, marka aad wax xumaysana hagaaji.

﴿وَمَا كُنتَ تَتْلُوا۟ مِن قَبْلِهِۦ مِن كِتَٰبٍ وَلَا تَخُطُّهُۥ بِيَمِينِكَ ۖ إِذًا لَّٱرْتَابَ ٱلْمُبْطِلُونَ﴾ العنكبوت: 48

*"Ma aad ahayn Quraankan hortii mid wax akhriya, midigtaadana waxba kuma aad qori jirin, haddii aad sidaa samayn lahaydna, waa ay shakiyi lahaayeen waxma garatadu."*

Dad baa dhaqan ka dhigtay luqun jabinta nusuusta; si ay Nebiga ugu leexiyaan umminimada[38]. Nebiga ummiga ah; mar waxa ay ku fasiraan kii reer Makaad, Quraankana waxa ku sugan "أم القرى". Mar kale ayay yidhaahdaan: Muxammad ummi ma ahayn, balse tolkii baan waxba akhrin jirin, waxna qori jirin, sidaa aawadeed ayaa isna loogu sifeeyay astaantii tolkii. Kuwani waa isku dayo aan meel haysan iyo difaacyo liita, waxaanad mooddaa sifadani in ay Nebiga ku tahay dhaliil iyo dhinnaan. Kuwani waxa illowsan yihiin in aan Alle, soo dirin nebi iin leh waayo; waxa ka dhalanaysa in ay ku dhaliilaan tolkii, suuraggalna maaha in uu noqdo Muxammad. Ma jirto cid Qureysh uga aqoon badnayd Nebiga, waa kuwii beeniyay ee ku sheegay gabyaaga maxaa yeelay; waxa ay ogaayeen tirinta suugaanta iyo umminimada in aan waxba iskaga shuqul ahayn. Badi halabuurkii Carbeed ummiyiin ayay ahaayeen oo suugaanta afka ayay iskugu gudbin jireen, kuwii qoray qasiidooyinka ee ka soo laalaadiyay gidaarrada Kacbada -marka aynu raacno fekradda odhanaysa: Mucallaqaad waxa loogu bixiyay Kacbadaa laga soo laalaadiyay- dad kale ayaa u qoray ee yagu waxba ma qori jirin. Qureyshi, Nebiga kuma ay tuhmin in

[38] **Ummi:** waa qof aan waxna akhrin, waxna qorin.

uu qortay Quraanka maxaa yeelay; waxa ay ogaayeen umminimadiisa, aayaddu si cad ayay u xustay in uu ahaa ummi, sidoo kalena waxa ay diiday in uu wax akhrin jiray, ama uu qori jiray. Laakiin qolyo uu madax maray difaaca Nebigu ayaa isku dhex qasay macnaha labada erey ee kala ah: **umminimo iyo jahli.**

Umminimadu waxa ay lid ku tahay qoraal iyo akhris la'aanta, halka uu jahliguna lid ku yahay aqoonta. Nebigu, ummi buu ahaa ee ma ahayn jaahil, haddii loo diido umminimadana waxa ka dhalanaysa in la diido oo la dafiro dhambaalkiisa. Marka ay nebinimada shardi uga dhigayaan akhris iyo qoraal, waxa aad mooddaa in ay aamminsan yihiin in Alle, Nebiga soo diray isaga oo bare ah. Ma ogi hadal sax ah oo Nebiga u diidaya umminimada, kuwa badan ee aynu maqalnaana waa caaddifad iyo qiiro jabbaan. Dhanka kale, dhacdooyin badan oo ka mid ah noloshii Nebiga ayaa sugaya umminimadiisa.

Tusaale: saxiixu Muslin waxa ku soo arooray xadiiska uu wariyay Baraa ee ka hadlaya heshiiskii Xudaybiya. Markii uu Suhayl binu Camar oo ahaa afhayeenkii Qureysheed yimid, Nebigu saxaabadiisa waxa uu faray qorista qodobbada heshiiska. Suhayl inta uu qaatay warqaddii heshiiska ayuu ka akhriyay: Bismillaahi Al-Raxmaani Al-Raxiim, waxaanu yidhi: *"waxan garan maayo ee aan qoro Bismika Allaahumma."* Nabigu, Cali ayuu ku yidhi: sida uu doonayo u qor. Mar kale ayuu akhriyay: *"kuwani waa qodobbada ay ku heshiiyeen Muxammad oo ah ergeyga Alle iyo Qureyshi."* Suhayl ayaa yidhi: *"haddii aannu qiri lahayn in aad tahay ergey Alle, kulama aannu dagaallanneen ee waxa aad qortaa: kani waa wixii ay ku heshiiyeen Muxammad binu Cabdillaahi iyo Suhayl binu Camar."*

Nebigu, Cali ayuu ku yidhi: masax. Cali ayaa ugu warceliyay: *"Ilaah baan ku dhaartaye masixi maayo."* Nebiga ayaa ku yidhi: *"i tus anigaa masixiye."* Cali waa uu tusay, isagaana gacantiisa ku masaxay.

Haddaba, haddii uu wax qori lahaa, waxna akhrin lahaa, uma baahdeen cid wax tusta. Hadalka loo tiiriyo Sharaaxiil binu Caamir ee odhanaya: *"Nebigu ma dhima isaga oo aan waxba qorin, waxna akhrin"*, waa hadal aan haadna haysan. Haddii aynu ka soo qaadno in uu saxan yahayna yaga ayuu xujo ku yahay maxaa yeelay; waxa ay qirayaan Nebigu in uu bilowgii hore ummi ahaa, haddii aanu ahaynna maxaa keenay in la yidhaahdo: *"ma dhiman ilaa uu wax qoray?!"*

﴿إِنَّآ أَنزَلۡنَٰهُ قُرۡءَٰنًا عَرَبِيّٗا لَّعَلَّكُمۡ تَعۡقِلُونَ﴾ **يوسف: 2**

*"Annaga ayaa soo dejinnay Quraan carabi ah; si aad u yeelataan garaad"*

Maadaama oo uu Quraanku yahay hoyga iyo gabbaadka cilmibaadhayaasha, ayay macneeyaan aayadihiis, ereyadiisa ayay fahmaan oo dhuuxaan, waxaana ka mid ah: Faqiih ku mashquulsan xukunka sharciga ah ee ku jira naska. Qaari wakhtigiisa u huray sixidda axkaamta tajwiidka. Naxwiile nafta dulsaaray jumladaha iyo waxa ay iska saaran yihiin. Balaaqi ku fooggan wanaagga sarbeebaha, sixirka sajciga[39], quruxda eekeeyayaasha iyo xeeldheeraanta sarbeebaha kala duwan iyo Afyaqaan baadha ereyada iyo lahjadaha. Dhab ahaantii, qof kastaa Quraanka waxa uu ka helay baadidiisii. Quraanku waa badweyn aan xeelli lahayn, waa bad ay ku dabbaashaan caqliyadu, taas oo aan lahayn marso, qofku in uu iskii u daalo mooyaane.

Muran baa ka taagan doodda odhanaysa: ereyada Quraanku ma wada Carabi baa? Quraanka ma ku jiraan erey aan Carabi ahayn? Ka warramaha afafka kale ee ay isa saameeyeen Afcarabiga waayo; afafku in ay is dhexgalaan oo ereyo kala ergistaan waa biyo kama dhibcaan si kasta oo uu afku hodan u yahay? Si guud, aayadaha Quraanka waxa ka muuqata in uu yahay Carabi badhaxla', culimadii hore ee Islaamkuna aragtidan si weyn ayay u difaaceen. Aragtidan,

---

[39] **Sajci:** waa dhammaadka hadalko oo ku soo xidhma xuruuf isku mid ah.

dadku waxa ay ugu qaybsameen seddex kooxood, laba waa maangal, laakiin ta seddexaad wax ka soo qaad malaha maxaa yeelay; waa laba mid uun: *aqoondarraa ka keentay, ama xiqdi iyo xumaan ay u hayaan Islaamka iyo dadkiisa.*

1- Kooxdani si duuduub ah ayay u diideen Quraanka in ay ku jiraan ereyo aan Carabi ahayn, waxaana hoggaaminaya: *Shaafici, Ibnu Jariir Al-Dabari, Abii Cubayda Macmar binu Musanna, Qaadi Abu Bakar iyo Ibnu Faaris.* Imaamu Shaafic meel adag ayuu ka istaagay qofka ku dooda aragtidan wax ka duwan.

2- Kooxdani waxa ay aammisan yihiin Quraanka in ay ku jiraan ereyo aan Carabi ahayn, waxaana hoggaaminaya culimadii calanka u sidda aqoonta Afcarabiga. Aragatidani waa maangal, aqoonyahannada qabana shaki kuma jiro in ay ka tahay u hiilinta Quraanka kariimka ah, waxaana ka mid ah: *Ibnu Hishaam, Sacaalab iyo Suyuudi.* Labadan aragtiyood, ayaynu dul istaagaynaa innaga oo isku deyayna in aynu is waafajinno, aragtida seddexaadna macquul ma aha oo gadaal ayaynu ku xusi.

Aragtida ku doodaysa Quraanka kuma jiraan ereyo aan Carabi ahayn, waxa ka muuqata ku talaxtag xooggan waayo; waxa jira daliilo door ah oo aan dhanna loo dhaafi karayn. *Abaariiq, Sajiil, Istabraq, Diinaar iyo Miski,* waa Afbeershiyaan. *Jahannama, Siraad, Qisdaas iyo Ibliis,* waa Afgiriig. *Qasaaq* waa Afturkigii hore, sidoo kalena *Mishkaat* waa Afhindi. Haddaba, sidee ayaynu isku waafajinnaa aragtidan iyo nusuusta badan ee xusaysa Quraanku in uu yahay Carabi badhaxla'? Ereyadani waa ay carabiyoobeen, carabayntuna: waa erey aan hore Carabi u ahayn oo gadaal

ka carabiyoobay kadib markii uu batay adeegsigiisu ka hor intaanu soo degin Quraanku. Sidaa darteed, Carabtu marka ay erey carabiyaynayaan duuduub kuma qaataan ee waxa ay ku sameeyaan isbeddelo door ah, sida: *sarfiga, dhawaqa iyo miisaanka hadalka.*

Qofka ku dooda Quraanka kuma jiro erey aan Carabi ahayn, run buu sheegay marka aynu ereyada badhkood u tixgelinno in ay caraboobeen, asalkii hore yaanay ahaanba Carabiye. Dhanka kale, qofka ku dooda Quraanka waxa ku jira ereyo aan Carabi ahayn, isna run buu sheegay, dooddan danbena waxa ay ku qotontaa asalka ereyga oo shaki lama gelin karo.

3- Kooxdani waxa ay qabaan: Carabtu aqoon hore uma lahayn ereyadan, mana ay adeegsan ee waxa ay Carabi noqdeen soo degistii Quraanka kadib. Dooddani wax ka soo qaad ma laha, qofka ku doodayaana waa laba mid uun: in uu jaahil yahay iyo in uu xaasid yahay.

Qureysh oo uu Alle ku tilmaamay duul muran badan, dhaqanna u leh doodaha ayaa xusi lahaa Quraanku in aanu ahayn Carabi. Qurayshi waxa ay caan ku ahayd aftahamada iyo suugaanta, haddana waligeed Quraanka kuma sheegin in aanu ahayn Carabi. Arrinkan lidkiisa, waxa ay la dhaygageen aftamahada, balaaqada iyo xeldheeraanta Quraanka, waxaana kugu filan reer Tamiimkii aftahamada ahaa iyo reer Hudaylkii afmaalka ahaa ee la dhacay carabinimada Quraanka kariimka ah.

﴿قَالَ ءَامَنتُمْ لَهُۥ قَبْلَ أَنْ ءَاذَنَ لَكُمْ ۖ إِنَّهُۥ لَكَبِيرُكُمُ ٱلَّذِى عَلَّمَكُمُ ٱلسِّحْرَ ۖ فَلَأُقَطِّعَنَّ أَيْدِيَكُمْ وَأَرْجُلَكُم مِّنْ خِلَٰفٍ وَلَأُصَلِّبَنَّكُمْ فِى جُذُوعِ ٱلنَّخْلِ وَلَتَعْلَمُنَّ أَيُّنَآ أَشَدُّ عَذَابًا وَأَبْقَىٰ﴾ طه: 71

*"Waxa uu yidhi: miyaad rumayseen aniga oo aan idiin ogolaan! Muuse waa kiinna ugu weyn ee idin baray sixirka, gacmihiinna iyo lugihiinna ayaan u jarjarayaa isweydaar, waxa aan idinka soo laalaadinayaa jirridaha timirta, sidoo kalena waxa aydun ogaan kaayaga cadaab iyo joogitaan daran."*

Asalku waxa uu ahaa in uu Alle yidhaahdo: (لأصلبنكم على جذوع النخل), balse ma ahayn in uu yidhaahdo: (في جذوع النخل). Maxaa yeelay; waxa la isku deldelaa timirta dusheeda ee ma aha dhexdeeda. Haddaba, waa maxay aftahamada ku jirta aayaddan? Waa maxay danta laga leeyahay in la isku beddelo labada xaraf ee "في" iyo "على"? Kuufiyiinta iyo Basriyiintu[40] waxa ay isku raaceen xuruuftu in ay wakiil kala noqon karto, balse waxa ay isku maadhaafeen macno cusub miyaa ka dhalanaya, mise waa maya? Kuufiyiintu waxa ay leeyihiin maya, halka ay Basriyiintuna ka leeyihiin: labada xaraf haddii la isku beddelo macno cusub baa ka dhalanaya, waana sida saxda ah ee uu qabo Siibawayhi. Deldelku waxa uu u dhici karaa laba hab oo kala ah:

---

[40] **Kuufiyiinta iyo Basriyiintu:** waa laba maddarasadood oo kala hoggaamin jiray cilmiga Naxwaha.

- In qofka lagu xidho timirta, kadibna masaabiir lagu garaaco ilaa uu hilibkiisu dhex galo timirta.
- In qofka lagu xidho xadhig adag, ilaa uu hilibkiisu dhex galayo jirridda timirta, macnahanna timirta ayuu qofku dhex galay ee ma dulsaarna.

Aayaddan waxa ku sugan macno xeeldheer oo inna tusaya arxandarradii deldelaaddii Fircoon, mana habboona in si fudud lagu dhaafo. Fircoon waxa uu dalbaday in la jarjaro jidhkii sixiroolayaasha, casharka muhiimka ah ee ku jiraana waa: in aynaan qofna ka quusan sababta oo ah; sixiroolayaashii subixii u soo kallahay; si ay Muuse u jebiyaan, ayaa galabtii loo deldelay isaga ayaad raacdeen, kamana ay tegin diintiisii. In aynaan ku talaxtegin qofna, kuwii Muuse la gudbay muddo yar kadib, waxa ay caabudeen dibi.

Qalbiyadu waxa ay ku dhex jiraan labada gacmood ee Alle, sida uu doono ayuu u gedgeddiyaa, diintanna waxa uu u soo hanuuniyaa rag aan laga filayn in ay soo galaan. Cumarkii Muslimiinta marin jiray hoogga iyo halaagga ayaa noqday faaruuqii[41] ummaddan, waxaanu burburiyay labadii quwadood ee dunida ugu weynaa: Beershiya iyo Roman. Khaalid binu Waliidkii Muslimiinta guuldarrada baday dagaalkii Uxud ayaa noqday seeftii Alle ee bilaa galka ahayd. Cikrama binu Abii Jahal oo uu suubbanuhu maalinkii furashada Maka dhiiggiisa ka dhiga bilaash ayaa maalinkii

[41] **Faaruuq**: waa qofka kala saara xaqa iyo baadilka.

Yarmuuk shahiiday isaga oo hoggaaminaya guutadii midig ee ciidankii Khaalid.

***"Diintan waxa dheefsada qofka ay dhab ka tahay, balse dhaxal uma helo ka u soo horreeyay, insaanka daacadda ahina waxa uu ka horreeyaa kuwii ka soo horreeyay."***

﴿وَنَصَرۡنَٰهُ مِنَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَآۚ إِنَّهُمۡ كَانُواْ قَوۡمَ سَوۡءٖ فَأَغۡرَقۡنَٰهُمۡ أَجۡمَعِينَ﴾ الأنبياء: ٧٧

*"Nuux, waxa aannu uga hiilinnay duulkii beeniyay aayadahayga waayo; waxa ay ahaayeen duul xun, dhammaantoodna biyaanu ku maashaynay"*

Mar hore waxa aynu soo xusnay Kuufiyiinta iyo Basriyiintu in ay isku waafaqsan yihiin xuruuftu in ay wakiil kala noqon karaan, sidoo kalena waxa aynu soo sheegnay in ay isku maandhaafeen isbeddelkani ma keenayaa macne cusub mise waa sidii hore? Kuufiyiintu waxa ay ku doodeen maya, halka ay Basriyiintu ka yidhaahdeen: haa, waana sida uu qabo Siibawayhi.

Waxa qummanayd in uu Alle yidhaahdo: "ونصرناه على", halka uu ka yidhi: "ونصرناه من". Haddaba, xuruuftan is weydaaratay maxay ku soo kordhinaysaa macnaha aayadda?

Aayaddu waxa ay ka hadlaysaa halaaggii Nuux tolkii. Waxa iska cad Nuux tolkii in lagu halaagay biyo kadib markii uu Alle faray in uu samaysto doon uu ku qaado Mu'miniinta iyo laba lammaane oo ka mid ah noolayaasha oo dhan.

Ereyga "النصر": waxa uu keensanayaa in ay laba awoodood iska hor yimaaddeen, sidaasina ma dhicin. Haddaba, falka "نصرناه" waxa uu la macno yahay "أنجيناه", iska hor-imaadkuna waxa uu dhex maray Nuux tolkii iyo biyihii, isna waa uu badbaaday. Biyuhu haddii ay yihiin

ciidan Alle oo ka qayb qaatay iska hor-imaadka, waxa ay ku yimaaddeen baryadii Nuux. Sidaa darteed, Nuux guusha qayb weyn ayuu ka ahaa, balse waa uu badbaaday. Alle waxa uu beddelay hadalka; falka "أنجى", waxa uu ku beddelay "نصر", xaraf ayuu mid kale ku beddelay; si aynu u baadhno sirta ka dambaysa naskan Quraanka kariimka ah.

﴿طَلۡعُهَا كَأَنَّهُۥ رُءُوسُ ٱلشَّيَٰطِينِ﴾ الصافات: ٦٥

*"Midheheeda waxa aad mooddaa madaxyo Shaydaan"*

Tani waa isku eekaysiinta ugu xeesha dheer, Quraanka oo dhamina waa wada cajiib. Isku-eekaysiinta waxa loo keenaa si loo soo dhaweeyo macnaha. Haddaba, si loo soo dhoweeyo shay qarsoon, waa in loo eekaysiiyo wax la isla yaqaanno oo uu qofku uga qiyaas qaato ka aanu garanayn, kadibna uu macnaha dhugto. Halkan, Alle waxa uu isku eekaysiiyay laba shay oo dahsoon. Ujeeddada laga wadaana maaha in la adkeeyo, balse waa si uu u sii qarsoonaado. Insaanku waxa uu ka baqaa waxa ka maqan, macnaha laga wado aayadduna waa cabsi gelin. Naskan Quraank ahi ma keensanayo qarin waayo; waxa loo soo dejiyay; si ay dadku u fahmaan, laakiin humaaggan waxa loo qariyay; si ay u sii korodho cabsidu. Yoolka iyo ujeeddada Quraanku waa in uu isku dheellitiro boorrinta iyo baqdinta. Maadaama oo uu yahay humaagga uu insaanku ka haysto Shaydaanku mid xun, halka ugu sii xumina ay tahay madaxiisa oo uu ku jiro foolku, ayaa macnaha loo qariyay. Alle waxa uu doonay in aynu sawiranno humaagga geed qarsoon oo dhalaya midho dahsoon, kaas oo ay dhibsanahayso naftu.

ISNIIN, 18-04-2022

*Ebboow; markii aad ku tidhi Ibraahin cs: "dadka ugu baaq xajka." Waa kii kugu yidhi: "Rabbiyow; sidee ayaan dadka ugu baaqaa, iyada oo aan dhawaqaygu gaadhaynin?" Waadigii ku yidhi: "adigu yeedh oo baaq uun, annagana gaadhsiinta noo daa, ka dibna uu codkiisii daafaha dunida gaadhay. Eebboow; dhiganahani waa dhawaqa addoonkaaga qalbiga jilicsan, ee yeedhmada jilicsan, ee dadka ugu baaqaya jacayl uu kuu qabo dartii, iyo rejo uu kaa leeyahay darteed, ee gaadhsiintaada ku maamuus oo ku kaal.*

— AD'HAM SHARQAAWI

Qalinmaal Publishing
@qalinmaalpublishing
qalinmaal@qalinmaalpublishing.com

ISBN 978-1-78280-808-4

9 781782 808084

Si aad u hesho buug badan oo PDF ah

Telegram ku search'garee :

KAYDBOOKS